

# Small-Business Guide

WASHINGTON STATE



---

### **Su'aallaha ama Faallooyinka**

**Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka ee Hal-abuurnimada Sharchiyeed iyo caawinaada**

*Xarunta Warfaafinta*

800-917-0043 / 360-725-0628

[help@oria.wa.gov](mailto:help@oria.wa.gov)

Si aad u hesho nuqulkii ugu dambeeyay ee dukumeentigan qaab elektaroonik ah, booqo:

<http://business.wa.gov>

Si aad dukumeentigan aad ugu hesho qaab kale, la xidhiidh Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka ee Hal-abuurnimada Sharchiyeed iyo caawinaada– Xarunta Warfaafinta.

---

## Liiska Mawduucyada

QORSHEE ganacsigaaga.....	2
Ma ku fikiraysaa inaad bilowdo ganacsi?.....	2
Marka hore, is weydii - "Sababta loo bilaabo ganacsi" .....	2
Tababarka ganacsiga .....	3
Qorshaynta ganacsiga.....	3
1. Odhaahyada hadafka & himilada.....	4
2. Sharaxaad ganacsi.....	4
3. Falanqaynta suuqa .....	9
4. Qorshaha suuq geynta .....	9
5. Qorshaha hawlgallada .....	10
6. Qorshaha shaqaalaha.....	11
7. Faa'iidooyinka shaqaalaha .....	13
8. Qorshaha maalgelinta.....	14
9. Ma u baahan tahay gargaar? .....	17
BILAW ganacsigaaga.....	19
1. Ma diyaarisay qorshahaaga ganacsi?.....	19
2. Ma waxaad iibsanaysaa ganaci jira oo hore u shaqaaynaaye?.....	19
3. Dooro qaab dhismeed ganacsiga .....	20
4. Go'aami magaca ganacsigaaga.....	25
5. Haddii aad dooranayso shirkad ama qaab-dhismeedka LLC, isdiwaangeli .....	26
6. Go'aami goobta ganacsigaaga.....	26
7. Hel lambarkaaga canshuurta federaalka oo waxaad tixgelisa ikhtiyaarada xereynta canshuurta federaalka (LLCs iyo shirkadaha) .....	27
8. Hel ruqsadaha ama sharciyada iyo ogolaanshaha loo baahan yahay .....	28
9. Dejiso hawlahaaga .....	30
10. Shaqaalaysii shaqaalo .....	32
11. Albaabadaada fur .....	34
12. Ma u baahan tahay gargaar? .....	35
MUSHAAR BIXINTA Ganacsigaaga.....	37
1. Waa maxay mushaar bixinta? .....	37
2. Ma u baahanahay mushahar-bixin? .....	37
3. Laftayda ma maamuli karaa liiska mushahar bixinta, mise waxaan u baahanahay khabir? .....	38

4. Waa maxay warbixinta mushahar bixinta iyo masuuliyadaha cashuuraha ee loo-shaqeeyayaashu ay leeyihiin? .....	39
Canshuuraha dakhliga federaalka– Shaqaalaha mishaarka la siiyay .....	42
Amniga Bulshada ee Federaalka iyo cashuuraha Medicare – loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha mishaarka oo la siiyay .....	43
Canshuurta Shaqo La'aanta ee Federaalka (Federal Unemployment Taxes, FUTA) – shaqaalaha mishaarka oo la siiyay.....	43
Bayaanka Mushaharka Federaalka iyo Cashuurta (Foomka W-2) Gudbinta (Foomka W-3) .....	44
Fasaxa mishaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad –Mushaarka shaqaalaha iyo loo shaqeeyayha oo la bixiyay.....	44
Canshuurta Shaqo La'aanta ee gobolka (State Unemployment Taxes, SUTA) – shaqaalaha mishaarka oo la siiyay .....	45
Khidmada caymiska magdhawga shaqaalaha gobolka – Mushaarka shaqaalaha iyo loo shaqeeyayha oo la bixiyay.....	45
Maalgelinta Daryeelka Washington - Mushaarka loo shaqeeyaha ee la bixiyay .....	46
Ma leedahay shaqaale fadhigoodu ama saldhigoodu yahay Gobolka Washington?.....	47
5. Waa maxay diiwaannada mushaar bixinta ee aan u baahanahay si aan u sameeyo oo aan u hayo? .....	47
6. Waa maxay diiwaannada mushaar bixinta ee aan u baahanahay in aan sameeyo si aan u siiyo shaqaalahayga? .....	48
7. Maxaan u baahanahay inaan haysto ka hor intaanan soo saarin jeegaga mushaharka? .....	49
8. Maxaa kale oo aan u baahanahay inaan ka ogaado mushahar siinta shaqaalaha? ....	50
9. Sideen ku qiyaasi karaa kharashyada mushaar bixinta? .....	51
10. Waa maxay mas'uuliyadaha kale ee aan leeyahay shaqo-bixiye ahaan? .....	53
11. Ma u baahan tahay gargaar? .....	53
FUR ganacsigaaga.....	55
Ma yahay qorshahaaga ganacsigaaga gobolka aad ugu sii balaarinaysid oo uu kasii shaqeeyo Washington? .....	55
1. Ma waxaad iibsanaysaa ganaci jira oo hore u shaqaaynaaye oo ku yaalo Washington?.....	55

2. Diiwangelinta ajaanibka (aan Washington ahayn) - Shuraakada iyo Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan .....	56
3. Hel ruqsadaha ama sharciyada iyo ogolaanshaha loo baahan yahay.....	56
4. Waaxaad shaqaalaysiisataa shaqaalooyin kuwaas oo ku sugaran Washington .....	59
5. Soo gudbi warbixinnada loo baahan yahay iyo canshuuraha .....	62
Canshuuraha ganacsiga gobolka:.....	62
Canshuuraha ganacsiga maxalliga ah:.....	64
Canshuuraha shaqada ee gobolka:.....	65
Ruqsada iyo Ogolaanshaha dib u Cusbooneysiinta:.....	66
6. Faham oo u hoggaansan shuruucda kale ee Washington.....	66
Gobolka .....	66
Maxaliga ah.....	67
7. Ku koritaanka Washington.....	67
8. Ma u baahan tahay gargaar? .....	68
SOCODSII ganacsigaaga.....	70
SOCODSII ganacsigaaga .....	70
1. Canshuuraha dakhliga ganacsiga ee federaalka.....	70
2. Canshuuraha ganacsiga gobolka:.....	72
3. Canshuuraha ganacsiga maxalliga ah:.....	73
Casimadooyinka & magaaloooyinka .....	73
Degmooyinka.....	74
Canshuurta hantida shakhsii ahaaneed.....	74
4. Canshuuraha shaqada ee federaalka .....	74
5. Canshuuraha shaqada ee gobolka:.....	75
6. Warbixinta sanadlaha ah, ruqsada iyo cusbooneysiinta ogolaanshaha.....	76
7. U hoggaansanaanta sharciga.....	77
Federaalka .....	77
Gobolka .....	78
Maxaliga ah.....	79
8. U diyaar garow wax aan la fileyn .....	80
9. Ma u baahan tahay gargaar? .....	81

KOBCI ganacsigaaga .....	83
Ma rabtaa inaad balaadhisoo ganacsigaaga?.....	83
1. lacag .....	83
Amaahyada: .....	83
Amaahda ganacsigu waxay caadi ahaan u baahan yihii "5C-yada":.....	84
Deyn bixiyaasha ganacsiga:.....	85
2. Shaqaalaha.....	86
3. Goobaha cusub .....	89
4. Suuqyo cusub.....	90
5. U hoggaansanaanta sharciga.....	93
6. Wawaan kuu rajeyneynaa guull! .....	93
7. Ma u baahan tahay gargaar? .....	93
XIR ganacsigaaga .....	95
Ma rabtaa inaad xirto ganacsigaaga?.....	95
1. Raadso talo sharci .....	96
2. Ogeysi hay'adaha sharciga .....	97
Federaalka .....	97
Gobolka .....	97
Maxaliga ah.....	100
3. Ogeysi dhinacyada kale ee danaynaya .....	100
4. Xiritaanka ganacsiga dhimashada awgeed.....	101
Guddiga khamriga iyo xashiishadda (Liquor and Cannabis Board, LCB):.....	101
Waaxda Dakhliga (DOR) – Adeegyada Ruqsadaaynta Ganacsiga (BLS)	
Canshuuraha:.....	102
Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (L&I):.....	102
Waaxda Ammaanka Shaqada (ESD): .....	102
Xoghayaha gobolka.....	103
Waaxda ruqsadaaynta (Department of Licensing, DOL).....	103
5. Ma u baahan tahay gargaar? .....	108



# QORSHEE ganacsigaaga



## Ma ku fikiraysaa inaad bilowdo ganacsi?

Bilaabida ganacsiga waa go'aan aad u weyn. Haddii aadan waligaa ganacsi hore u yeelan, waxaa laga yaabaa inaadan ka warqabin dhammaan waxyaabaha aad u baahan tahay inaad sameyso si ganacsigaaga u socdo. Qorshaynta taxadarka leh iyo cilmi baarista waxay kor uqaadi doontaa fursadahaaga guulaysga.

## Marka hore, is weydii - "Sababta loo bilaabo ganacsi"

Is weydiinta iyo ka jawaabista su'aashan waxay kaa caawin doontaa inaad dejiso dhiirigelintaada wax kasta oo aad u baahan doonto inaad sameyso oo aad barato inaad ganacsi bilowdo. Noqoshada ganacsade ma ahan wax cid walbo aay noqoni karo Ganacsiga, ma jiraan wax dammaanad ah. Ma jirto si fudud oo looga takhalusi karo dhammaan khataraha. Waxay u baahan tahay qof gaar ah oo leh go'aan adag iyo xirfado gaar ah si uu noqdo ganacsade guuleysto. Fahamka waxa loo baahan yahay si loo noqdo ganacsi waa qayb muhiim ah oo ka mid ah u diyaarinta naftaada ballanqaadka go'aaneed iyo culeyska shaqada ee loo baahan yahay si aad u guuleysato.

Diyaar ma u tahay inaad bilowdo ganacsi kuu gaar ah? Waxaa jiraan labo qalab oo kaa caawin karaan inaad si fiican u fahamto diyaargarowgaaga bilaabida ganacsi yar. Ma aha aalad qiimayn cilmiyeed. Laakin taa beddelkeeda waxeey kuu soo bandhigi doontaa su'aalo kuwaas oo kaa caawin doona qiimaynta xirfadahaaga, sifooyinkaaga iyo khibradaada – iyaga oo la bardhigi doono diyaargarowgaaga bilaabista ganacsi. Hal qalab ayaa ku siin doona muuqalo, qalabka labaadna waa liiska hubinta ee loo isticmaalo midka ku habboon qaabkaaga waxbarasho .

- [Akademiga Ganacsadaha](#)
- [Gelida Liiska Hubinta ee Ganacsiga](#)

Waxa kale oo jira akhrin weyn oo degdeg ah oo ay bixiso Waaxda Ganacsiga ee Gobolka Washington oo leh qalabyo sameeya qiimayn dheeraad ah.

- [Ciyaarta kahor](#)
- [Gelitaanka qaab-dhismeed aad u fiican](#)
- [Jabiyaasha Heshiiska](#)



## Tababarka ganacsiga

Uma baahnid inaad haysato shahaado jaamacad xagga ganacsiga ah, laakiin aqoontu waa awood. Qaadashada casharrada iyo ka qaybgalka aqoon-is-weydaarsiyada waa siyaabo aad u wanaagsan oo lagu helo aqoonta aad u baahan doonto si aad u guulaysato.

Fursadaha Tababarka:

- [Aqoon-is-weydaarsiyada Ganacsiga Yaryar \(Small Business Workshops, SBRR\)](#)
- [Maamulka Ganacsiga Yaryar](#)
- [SCORE](#)
- [Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar](#)
- [Saamaynta Ganacsiga NW](#)
- [Xarunta Washington ee Haweenka ganacsiga kujiro](#)
- [Xarunta Wacyigelinta Ganacsiga ee khibradda leh](#)
- Tababarka ganacsi - [Buundada Xirfadda](#)
- [Fursadaha tababar ee dowladda](#)
- [Kulliyadda bulshada ee deegaankaaga](#)
- [Rugta ganacsiga ee deegaankaaga](#)
- [Ururka horumarinta dhaqaalaha ee deegaankaada](#)

## Qorshaynta ganacsiga

Qoritaanka qorshe ganacsi oo dhammaystiran waa tallaabada ugu horreysa ee bilawga ganacsiga. Qorshahaaga ganacsi ayaa:

- Ku hagi doona markaad ganacsigaaga ka dhigto mid dhab ah.
- Waxay kaa caawin doontaa inaad iska ilaalso khaladaadka faa'iido darrada ah.
- Waxay kaa caawin doontaa diyaargarowdo dhaqaale ahaan, haddii aad qorsheynayso inaad maalgeliso ganacsigaaga laftaada ama inaad hesho maalgelin dibadda ah.
- Waxay kaa caawin doontaa inaad hesho kalsoonida dadka kale ee laga yaabo inay xiiseynayaan ganacsigaaga, sida Iskaashatada, maalgashadayaasha, mulkiilayaasha, iyo alaab-qeybiyeyaasha.

Qorista qorshaha waxqabadka ganacsiga waa waxbarashada ama aqoonta aad ku kasbato cilmi baadhista iyo qorista. Iyadoo laga yaabo inay noqoto mid damac leh inaad shaqaaleysiiso qof ku diyaariya qorshahaaga ama aad u soo iibsato qorshe ka



baxsan fikradaha nooca ganacsigaaga, waxa ay dantaada ku jirtaa inaad adigu qabato shaqada. Taas macnaheedu maaha inaad keligaa sameyso. Way fiicnaan lahayd in lala shaqeeyo hagayaal, la-taliyayaal takhasus uleh, ama la-taliyeyaal iyada oo loo marayo hanaanka. Hagidoodu ama Hanuunintoodu waxay kaa badbaadin kartaa waqtii badan iyo dadaal badan. Hoos waxaa ku qoran liiska ururrada kaa caawin kara marka aad horumarinayso qorshahaaga.

- [Waaxda Ganacsiga MyStartup365.com](#)
- [Maamulka Ganacsiga Yaryar ee Maraykanka](#)
- [SCORE](#)
- [Saamaynta Ganacsiga NW](#)
- [Xarunta Washington ee Haweenka ganacsiga kujiro](#)
- [Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar ee Washington](#) (la xidhiidh ka dib marka aad haysato qorshe qabyo ah)
- [Ganacsi Ku Xidhaha Bulshada \(Degmada King\)](#)
- [Ururka Ganacsatada Yaryar ee Gobolka Washington ee Evergreen BizLink](#)  
(bixiyayaasha taageerada farsamada ee gobolka oo dhan)

Qorshaha ganacsiga caadiga ah waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

## 1. Odhaahyada hadafka & himilada

Oraahda hadafku waa sharraxaad kooban oo ku saabsan waxaad qabato. Waxay kaa caawinaysaa adiga iyo kuwa kula shaqaynaya inaad diirada saartaan waxa muhiimka ah. Oraahda himilada ayaa ka jawaabaysa su'aasha ah "Maxaan rabnaa inaan noqono?" Waxay ku siinaysaa jihayn markaad samaynayso go'aamada saamayn doona mustaqbalka ganacsigaaga.

## 2. Sharaxaad ganacsi

Sharaxaada ganacsigu waxay ku siinaysaa "yaa, maxay, goorma, halkee" ganacsigaaga, oo ay ku jiraan nooca qaab dhismeedka ganacsiga, taariikhda bilawga, iyo goobta.

Qaab dhismeedka ganacsigaaga ayaa lagu dari doonaa qaybtan. Ganacsigu waa shirkad sharci ah ama ganacsiga aan shirkada lagu ahayn Waxay yeelan karaan hanti, waxay leeyihiin akawntiyada bangiga oo waxaana laga rabaa inay bixiyaan cashuur. Waxaa jira noocyoo kala duwan oo shirkado ganacsi ah, mid walbana wuxuu leeyahay faa'iidooyin iyo faa'iido darrooyin gaar ah.



Doorashada "saxda" ah ee adiga kugu habboon waxay ku xiran tahay danahaaga iyo baahiyahaaga. Wuxaad u baahan doontaa lataliye wanaagsan si aad u fahamto waajibaadkaaga ku saabsan ganacsigaaga. Baro fursadaha qaabdhismedka ganacsiga oo kala hadal la-taliyayaashaada si aad u go'aamiso midka adiga kuu fiican. Hel [sharci canshuur](#) iyo ganacsi ([SCORE](#), [Xarumaha Horumarinta Ganacsiga Yaryar](#)) la taliyayaasha. Waxyaabaha ay tahay in la tixgeliyo marka aad go'aan ka gaareyo waxaa ka mid ah:

- Tirada mulkiilayaasha hadda iyo mustaqbalka.
- Noocyada mulkiilayaasha - sida shakhsiyadka ama shirkada (shirkadaha, ganacsiga ku salaysan is aaminaada, iwm.).
- Dareenka mas'uuliyadda.
- Saamaynta canshuurta federaalka - [Adeegga Dakhliga Gudaha \(Internal Revenue Service, IRS\)](#).
- Diiwaangelinta iyo shuruudaha xereynta canshuurta iyo kharashyada.
- Dukumeentiyada qoran iyo tixgelinta maamulka hay'adda.

### **Ganacsiga aan shirkada lagu ahayn**

waxaa iska leh hal qof ama lamaane is qaba. Ganacsiyadani waa kuwa aan qaali ka aheyn in la sameeyo, mana jiraan wax shuruudo warbixineed oo lagaga baahan yahay oo gaar ah. Milkiilaha ayaa shakhsii ahaan mas'uul ka ah (ka mas'uul ah) dhammaan deymaha ganacsiga iyo canshuuraha federaalka.

**Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan** (Limited Liability Companies, LLCs) waa kuwo aan aad caan u ahayn. Ganacsigu waxa uu leeyahay masuuliyad sharci oo xadidan sida shirkad laakiin waxa uu leeyahay shuruudo maamul oo yar. Milkiilayaasha LLC waxaa loo yaqaan "xubnaha." Samaynta LLC waxay u baahan tahay ka iska fayl garaynta ama iskadiiwan galinta [Xoghayaha gobolka Washington](#). Marka aay timaado canshuuraha federaalka, LLCs waxaa sida caadiga ah loola dhaqmaa sida ganacsiga aan shirkada lagu ahayn haddii uu jiro hal milkiile, ama sida shuraakowga haddii ay jiraan wax ka badan hal milkiile. Si kastaba ha ahaatee, adoo buuxinaya [foomka doorashada kala soocida](#) IRS, LLCs waxaa loola dhaqmi karaa sida shirkadaha iyada oo ujeedooyinka yihii bixinta canshuurta federaalka In kasta oo aan loo baahnayn, samaynta LLC waa in la sameeyaa iyadoo la kaashanayo xirfadle shariyeed oo aqoon u leh. Shuruudaha kale waxaa ka mid ah, LLCs waa inay sameeyaan dukumeenti maamul kuwaas oo loo yaqaano Heshiiska Hawlgelinta. Xusuusnaw: dukumeentigan ma uusan diiwaangelinin Xoghayaha Gobolka. Ka eeg Maamulka Ganacsiyada Yaryar dulmar ku saabsan waxa ku jira [Heshiiska Hawlgelinta](#). Wuxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa matabadda xaafaddaada si aad si bilaash ah ugu bixiso tusaaleyaal heshiis hawleed madhan.



**Iskaashiga Guud waa sida** ganacsiga aan shirkada lagu ahayn oo leh wax ka badan hal milkiile. Shurakada waxay wadaagaan waajibaadka maaraynta, faa'iidada iyo khasaaraha, mid walbana shakhsii ahaan aaya mas'uuliyad aay u saarantahay (mas'uul ka ah) dhammaan deynta ganacsiga. Sababtoo ah ficillada uu sameeya mid ka mid dadka shirkada ah waxay keeni karaan masuuliyad shakhsiyeed kuwa kale, shuraakooyinka waxay noqdeen kuwo aan caan ahayn tan iyo inti aay socdeen LLCs. Ujeedooyinka canshuurta federaalka, ganacsiga waxaa looga baahan yahay inuu xareeyo ama uu diiwan galiyo soo celinta [shuraakada](#), iyadoo oo uu la socdo dakhliga ama khasaarahaa uu u socdo lammaane kasta iyadoo lagu saleynayo inta uu le'eg yahay waxa mid kasta uu ku leeyahay ganacsiga.

**Shirkaduhu** ayaa ka qaab-dhismeed ballaran kuwa kale. Sida LLCs, shirkaduhu waxay leeyihiiin masuuliyad sharci oo xaddidan. Si aad u samaysato shirkad, waa inaad ka fayl garaysataa [Xoghayaha gobolka](#) Washington waana inaad samaysaa dukumeenti maamul – kaas, oo hada noqoni doono xeer hooseed. Xeer-hoosaadyada (loo yaqaan go'aamada kuwa aan faa'iido doonka ahayn) waa dokumentiyada maamulka gudaha ee shirkad. Waxay qeexaan sida go'aamada ganacsiyada ee muhiimka ah loo gaaro, iyo sidoo kale waajibaadka, awoodaha, iyo mas'uuliyadaha sarkaalka iyo saamilayda. Waxaa si weyn loogu talinayaa in la abuuro mid si aad naftaada u ilaalso iyo ganacsigaaga, xitaa haddii gobolkaagu aanu ku amrin. Shirkaduhu waxay sidoo kale leeyihiiin shuruudo kale, sida bixinta shahaadooyinka saamiyada, qabashada shirarka sannadlahaa ah iyo ilaalinta daqiiqadaha shirarka, doorashada agaasimayaasha, iwm. Milkiilayaasha shirkadaha waxaa loo yaqaanaa "hantiwadaagta" ama "saamilayda." Milkiilayaasha shirkadaha ee isla shirkada ka shaqeeya waa shaqaale waana inay haystaan Canshuurta mushaar bixinta federaalka oo laga reebay oo ay soo sheeqo tagaan sida shaqaalaha kaleba. [Shirkadaha](#) waxay xareeyaan ama aay fayl gareeyaan canshuur celinta shirkadaha federaalka IRS. Haddii ay u qalanto oo ay codsato waqtii ku habboon, shirkaduhu waxay dooran karaan canshuur dhaaf oo canshuurta ganacsiga aan lagu bixinaynin heer shirkad ("[Shirkadaha-S](#)"). In kasta oo aan loo baahnayn, samaynta Shirkadda waa in la sameeyaa iyadoo la kaashanayo xirfadle shariyeed oo aqoon u leh.

**Shuraakada xaddidan** (Limited Partnerships, LPs) inta badan looma isticmaalo ganacsiyada yaryar, inkastoo ay ku badan yihiin lahaanshaha hantida ma guurtada ah. LPs waxay ka kooban yihiin hal ama in ka badan oo shuraako guud ah iyo hal ama in ka badan oo la-hawlgalayaal xaddidan. Wada-hawlgalayaasha guud ayaa maamula shirkadda oo si buuxda u wadaaga faa'iidada iyo khasaaraha. Si ay naftooda uga

ilaaliyaan mas'uuliyadda, la-hawlgalayaasha guud inta badan waa shirkado ama LLCs halkii ay ka ahaan lahaayeen shakhsiyaad. Wada-hawlgalayaasha xaddidan waxay wadaagaan faa'iidada ganacsiga, laakiin khasaarahoodu wuxuu ku kooban yahay inta uu le'eg yahay maalgashigooda. Wada-hawlgalayaasha xaddidan badanaa kuma lug yeeshaan hawl-maalmeedka shirkadda. Wuxuu ku kooban yahay inta dooran qaab-dhismeedka LP ee ganacsigaaga. Sida LLCs iyo Iskaashiga, Samaynta LP-yada waxay u baahan tahay fayl garaaynta ama iskadiiwan galinta [Xoghayaha gobolka](#) Washington.



#### **Ganacsiga Gobolka Washington iyo Tixgelinta Qaabdhismeedka Ganacsiga:**

Tixgelinta	ganacsiga aan shirkada lagu ahayn	Iskaashiga Guud	Shirkadda Masuuliyadda Xaddidan (LLC)	Shirkadda
Fayl garee ama iska diiwaan geli <b>Xoghayaha gobolka Washington</b>	Maya	Maya	Haa	Haa
Dhibaatada Samaynta	Hooseeya	Hooseeya	Dhex dhexaad ah	Dhex dhexaad/Sareeya
Masuuliyadda	Mulkiilaha Kelia ah waxa uu leeyahay masuuliyad aan xadinayn oo	Wada- hawlgalayaash u waxay leeyihii masuuliyad aan xadinayn oo deymo iyo	Xubnaha caadi ahaan masuul kama aha deymo laakin waxay masuul ka yihiin cashuurta.	Hantiwadaagta caadi ahaan masuul kama aha deymo laakin waxay masuul ka yihiin cashuurta.
Shuruudaha Hawlgalka	Shuruudo sharci oo aad u yar.	Shuruudo sharci oo aad u yar	Qaar ka mid ah shuruudaha rasmiga ah sida heshiisyada hawlgalka iyo warbixinta sanadlaha ah.	Guddiga maamulka, shirarka sannadlaha ah, iyo warbixinta sannadlaha ah ee loo baahan yahay.



Tixgelinta	ganacsiga aan shirkada lagu ahayn	Iskaashiga Guud	Shirkadda Masuuliyadda Xaddidan (LLC)	Shirkadda
<b>Maamulka</b>	Mulkiilaha Keligisa ah ayaa si buuxda gacanta ugu hayaa maamulka iyo hawlahaa.	Sida caadiga ah, lammaane kastaa oo shurakada kamid ah wuxuu leeyahay cod la siman kuwa kale, haddii aan si kale loo kala sareesiinin xaga maamulka iyo masuuliyada.	LLCs waxay leeyihiiin heshiis hawlgal oo qeexaya maamulka iyo maareynta.	Shirkaduhu waxay leeyihiiin xeer-hoosaad qeexaya maamulka. Sida caadiga ah waxaa maamula agaasimeyaal ay doorteen Hantiwadaagta.
<b>Canshuurta Federaalka</b>	Milkiilaha keligiis ah ayaa ka warbixiya dhammaan dakhliga iyo kharashyada ganacsiga wuxuuna ku bixiyaa canshuurta cashuur celinta shakhsii ahaaneed.	Lamaane kastaa ee kamid ah shuraakada wuxuu soo sheegaa oo uu ka warbixiyaa qaybtiiisa dakhliga iyo kharashaadka ganacsiga waxayna si shakhsii ahaaneed kaga bixiyaan canshuurta wixi ganacsiga kaso galoo.	Haddii hal xubin oo LLC ah, sida caadiga ah u bixiyo canshuur si shaqsi ahaan. Haddii wax ka badan hal xubin, aay caadi ahaan u bixiyaan canshuurta shuraako ahaan. Waxay la dooran karaan IRS si loogu canshuuro sidi s-corp. Mid kasta oo ka mid ah saamileyaasha s-corp waxay ka warbixiyaan qaybtooda dakhliga iyo kharashyada ganacsiga waxayna ku bixiyaan canshuuraha cashuur celinta shakhsii ahaaneed.	Haddii shirkad caadi ah (c-corp), loo canshuuro ganaci ahaan. Haddii saami qaybsiga loo badalo Hantiwadaagta, saami qaybsiga waxa lagu cashuuraa heer shakhsii ah. Waxay la dooran karaan IRS si loogu canshuuro sidi s-corp. Mid kasta oo ka mid ah saamileyaasha s-corp waxay ka warbixiyaan qaybtooda dakhliga iyo kharashyada ganacsiga waxayna ku bixiyaan canshuuraha cashuur celinta shakhsii ahaaneed.



Tixgelinta	ganacsiga aan shirkada lagu ahayn	Iskaashiga Guud	Shirkadda Masuuliyadda Xaddidan (LLC)	Shirkadda
<b>Cashuur dulsarka ee alaabta la sameeyay la dulsaaray ee Washington iyo Mas'uuliyadda (Waaxda Dakhliga ee Washington)</b>	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. Mulkiilaha Keliga ah waxa uu leeyahay masuuliyad aan xadidnayn.	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. La-hawlgalayaa sha guud waxay leeyihin masuuliyad aan xadidnayn.	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. Xubnaha waxaa laga yaabaa inay mas'uul ka yihiin canshuuraha.	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. Dadka maamulka waxaa laga yaabaa inay mas'uul ka yihiin canshuuraha.

OGOW: Macluumaadkan waxaa loogu talagalay tixraac kaliya, haddii aad u baahan tahay tixgalin faahfaahsan la xiriir sharciga aad ku kalsoon tahay ama lataliyayaasha cashuuraha.

### 3. Falanqaynta suuqa

Falanqaynta suuqa ayaa kaa caawin doonta in aad go'aamiso haddii ay jirto baahi suuqa ka jirta oo loo qabo badeecadaada ama adeeggaaga, cidda ay u badan tahay inay iihsadaan wax-soo-saarkaaga, iyo halka ay macaamiishaadu joogaan. Oo aay kujiraan:

- Falanqaynta warshadaada.
- Caddaynta baahida badeecadaada ama adeeggaaga.
- Sharaxaada suuqa aad beegsaneyso (Bogga macaamiisha).
- Cabirka suuqaaga (Eegitaanka tirakoobka aagagga iyo kobaca warshadaada).
- Tartankaaga iyo sababta ay dadku oga dooran lahaayeen badeecadaada ama adeeggaaga kuwa kula tartamaaya.
- Heerka iibka la qiyaasay iyo dakhliga.
- Ganacsigu wuxuu leeyahay qorsheeye bilaash ah si uu u sameeyo falanqayn bilow ah, [Balaarinta!](#)

### 4. Qorshaha suuq geynta

Markaad aqoonsato macmiilkaaga, waxaad u baahan tahay inaad sharaxdo sida aad macaamiishaada aad ugu qancini karto inay iihsadaan badeecadaada ama adeegaaga.

Oo aay kujiraan:

- Istaraatijiyyada qiimaha, oo ay ku jiraan qiimaha sharci ahaan ugu hooseeya (qiimaha aad hoos sii dhigi karto xitaa), Qiimaha ugu sareeya ee beeeca la dalici karo (qiimaha ugu badan ee dadku aay dhici lahayd inay ku bixiyaan



badeecadaada ama adeegaaga), iyo qiiamahaaga marka loo eego tartankaaga (isku mid ah, hooseeya, sareeya).

- Sawirka aad doonayso (iyadoo la eegayo suuqa aad beegsanayso) iyo sidaad ku gaadhi lahayd adiga oo adeegsanaaya xayasiis, calaamado, kaadhadhka ganacsiga iyo warqada aay ku qorantahay calaamada ganacsigaaga, buug-yaraha, muuqaalka xafiiska/bakhaarka, muuqaalkaaga, iyo habab kale oo wacyigelineed.
- Xayeyiintaada iyo istiraatijiyaddaada xayasiis si aad u gaarto suuqa aad beegsaneyso (sida isticmaalka mareegaha ama wabseetyada, baraha bulshada, bogagga jaalaha ah, sii daynta wararka, shabakadaha gaarka ah, wicitaanada codsiga macaamiisha, wargeysyada, raadiyaha, xayaysiinta telefishinka, boostada tooska ah, iwm.).
- Kharashka iyo waqtiga aad samaynayso howlahaaga suuqgeynta

## 5. Qorshaha hawlgallada

Tani waxay ka tarjumaysaa dhammaan aasaaska ka shaqaynta ganacsigaaga waxaana ka mid ah:

- Goobtaada ganacsiga Yaa iska leh? Waa maxay shuruudaha heshiiska? Maxaa loo baahan doonaa si loo diyaariyo marka la eego aagaynta, ogolaanshaha, dhismaha iyo hagaajinta kiraystaha?
- Qalabaynta, isku rakibka, qalabka, iyo baahida gaynta.
- Liiska Alaabta Maxaad liiska alaabta u samayni doontaa tiro nooceee ah? Yaa noqon doona iibiyeyaashaada? Sideed u kaydin doontaa oo aad ula socon doontaa alaabta?
- Sharaxaada hawlgalka, sida hawlaha laga bilaabo marka dalabka badeecada/adeegyada aay ku imaadaan qaab dhiibaal ah, wareegyada alaabada ama agabka/iibsashada sahayda, iyo wareegyada kale ee muhiimka u ah ganacsigaaga.
- Shaqaalaha muhiimka ah iyo doorkooda shaqo ee ganacsiga (Shuraakada, maareeyayaasha, la taliyayaasha)
- Baahiyaha sharciga, baahiyaha caymiska, iyo fahamka shuruudahaaga sharchiyeed.
- Diiwaangelinta iyo baahiyaha xisaabinta (dabagalka alaabada, nidaamka xisaabaadka, habka biilasha, nidaamyada faylasha, iwm.). Yaa qaban doona xisaabta maalinlaha ah? Yaa noqon doona xisaab hayahaaga ganacsiga?



Yaa noqon doona xisaabiyahaaga ganacsiga iyo adeeg nooceee ah ayay bixin doonaan?

- Tixgalin oo ay ku jirto qaybta ku saabsan u diyaargarowga xaaladaha degdeggaa ah. Dhacdooyinka dabiiciga ah ee lama filaanka ah iyo kuwa bini'aadmiga keenay waxay dhaawici karaan ama burburin karaan ganacsigaaga iyo diiwaanadiisa. [Waxaa aad xili hore diyaarisataa](#) qorsho
- Qalab kale ama aalad kale oo qorsheyn oo wanaagsan oo si gaar ah loogu talagalay ganacsiyada yaryar ayaa laga heli karaa [goobta ganacsiga yaryar](#) ee Ganacsiga.

## 6. Qorshaha shaqaalahaa

Inta badan ganacsiyada cusub waxay bilaabtaan ayaga oo yaryar kadibna way kobcaan Markaad shaqaaleysiiso, haysashada shaqaale leh sifooyin sax ah iyo xirfadaha ganacsigaaga ayaa aad muhiim ugu ah in aad guulaysato. Waxaa jira ilo-maalaadyo oo kaa caawini doono qorsheynta xiriirka shaqada, waxaana ka mid ah [Macluumaadka Suuqa Shaqada](#).

Shaqadu waa meel ay ka jirtaan nidaamyo badan, oo ay ku jiraan mushaharka ugu yar ee la bixiyo, mushaharka shaqada wakhtiyada dheeraadka ah, fasaxa iyo faa'iidooyinka, hoyga uurka, shaqaalaynta carruurta aan qaan-gaarin iyo xubnaha qoyska, badbaadada goobta shaqada, iwm.

Isticmaalka qandaraaslayaasha madax-bannaan waa wax marar badan dadka aaysan aad u fahmin karin. Guud ahaan, sharciga gobolka iyo federaalku wuxuu u baahan doonaa in shaqsiga loola dhaqmo sidii shaqaale ahaan ilaa qofka:

- Uu si dhab ah ganacsi uu u samaysanaayo ama u samaysanayso.
- Uu yahay mid ruqsadeeysan oo si firfircoon u suuq u geynaya adeeggiisa ama iyada.
- Uu haysto macaamiil/macaamiil badan.
- Uu sameeyo shaqo ka baxsan hawlaha caadiga ah ee ganacsiga.

Shaqo-bixiye ahaanshahu waxay sidoo kale kaaga baahan tahay inaad hayso diiwaanno faahfaahsan oo aad fuliso waajibaadyada warbixinta cashuurta. Waa muhiim inaad fahanto sharciyada iyo kharashyada markaad qorsheynayso ganacsigaaga. Xidhiidhada ama links-ka hoose ayaa kaa caawin kara inaad fahanto masuuliyadahaaga.



## Sharciga Shaqada

- [Mushaharka iyo Sharciyada saacadaha \(sida mushaharka ugu yar ee shaqada lagu bixiyo, saacadaha dheeraadka ah, nasashada, iwm.\)](#)
- [Shuruudaha boodhka ee goobta shaqada](#)
- [Shaqaalaysiinta carruurta yaryar](#)
- [Sharciyada takoor la'aanta](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(Shaqada & ganacsiga\)](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(Ammaanka Shaqada\)](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan IRS](#)
- [Badbaadada goobta shaqada \(oo ay ku jiraan barnaamijka ka hortagga shilalka ee qoran ee loo baahan yahay\)](#)
- [Canshuurta mushaar bixinta federaalka](#)
- [Sharciyada Haynta Masruufka Ilmaha](#)
- Xakamaynta [heshiisyada aan tartanka ahayn](#), [taariikhda mushaharka](#), iyo [sirta mushaharka](#)
- [Shaqaalaha aanan badalka haysanin ee kaligiisa shaqeeya](#)
- [Isbeddelka Xeerarka Wakhtiga Dheeriga ah](#)

## Faa'iidooyinka Shaqaalaha

- [Canshuurta shaqo la'aanta ee gobolka](#)
- [Caymiska magdhowga shaqaalaha](#)
- [Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington](#)
- [Washington Healthplanfinder](#)
- [Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalaha](#)
- [Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad](#)
- [Noocyada kale ee Fasaxa](#)
- [Ka hawl gabka goobta shaqada](#)

Ogow: Haddii aad shaqaale ku leedahay Seattle, Tacoma ama SeaTac, ka hubi magaaladaada mushaharka ugu yar iyo shuruudaha kale ee shaqada.

Ku dar Qorshahaaga Shaqsiga:

- Boosaska loo baahan yahay iyo goorta.



- Haddi shaqaaluhu yihii kuwo joogto ah ama ku meel gaadh ah. Haddii ku meel gaar yahay, haddii aad si toos ah u shaqaaleysiiso ama aad isticmaasho wakaalad dibadda ah.
- Sharaxaada sida shaqada la doonaayo in loo qabto iyo baahida xirfadeed.
- Shuruudaha tababarka.
- Magdhawga iyo dheefaha.
- Xeerarka shaqaalaha

## 7. Faa'iidooyinka shaqaalaha

Caymiska Caafimaadka

Bixinta faa'iidooyinka, sida caymiska caafimaadka, ayaa kaa caawin kara inaad soo jjidato oo aad haysato shaqaalaha wanaagsan. Markaad u raadinayso qorshe caafimaad naftaada ama shaqaalahaaga, waa muhiim inaad ogato yoolalkaaga bixinta caymiska caafimaadka. Tusaale ahaan, ma waxaad rabtaa inaad wax ku darsato khidmadaha caafimaadka ee shaqaalahaaga bishii, mise waxaad rabtaa inaad ku taageerto shaqaalahaaga sidii ay u heli lahaayeen caymiskooda? Wax kasta oo hadafyadaada ama agabkaagu noqon karaan, [Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington](#) ayaa kaa caawin kara adiga iyo/ama shaqaalahaaga inaad wax ka barataan fursadahaaga.

Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington wuxuu ka shaqeeyaa suuqa caymiska caafimaadka ee tooska ah ee gobolka, [Washington Healthplanfinder](#).

*Washington Healthplanfinder*, loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhu waxay:

- wax ka iibsan karaan, barbar dhigi karaan oo ay iska qori karaan ama iska diiwan galini karaan qorshayaasha caafimaadka iyo ilkaha ee shakhsiga.
- Si gaar ah u hel cashuurta federaalka si aad hoos ugu dhigto kharashyada bisha.
- Wuxaad codsata Washington Apple Health (Medicaid).

Ma la yaabanahay waa maxay fursadahaagu? Loo-shaqeeyayaasha iyo/ama shaqaaluhu waxay usoo gudbin karaan codsi aan waajib ahayn *Washington Healthplanfinder* si ay u arkaan qorshayaasha gaarka ah iyo dhibcaha cashuurta ee ay heli karaan.

Waqtiyada Is-diiwaangelinta

Adiga iyo/ama shaqaalahaagu waxa aad iska qori kartaan qorshayaasha gaarka ah inta lagu jiro mudada aay isdiiwaangelinta aay furan tahay (laga bilaabo Noofambar 1)

caymiska sanadka soo socda. Haddii aad isku daydo inaad iska diiwaan geliso meel ka baxsan diiwaangelinta furan, shakhsiyadka waxay u baahan yihin dhacdo nololeed oo u qalma. Tusaalooyinka dhacdooyinka nolosha ee u qalmida waa luminta caymiska loo-shaqeeyaha, marka lagu daro qoyskaaga, u guuritaanka joogtada ah ee gobolka WA, ([eeg liiska buuxa ee dhacdooyinka nolosha ee u qalmidda](#)). Dhacdooyinka nolosha ee u qalmida waa in lagu soo wargeliyaa 60 maalmood gudahooda marka ay dhacdo noloshu dhacday.

Washington Apple Health (Medicaid) waxay diyaar u tahay kuwa u qalma sanadka oo dhan (yacni uma baahna wakhti isdiiwaangalin gaar ah).

Qorshayaasha Kooxda iyo qaar kaloo badan  
Ma waxaad raadineysaa inaad ku taageerto shaqaalahaaga adoo siinaya ama kabaayo caymiskooda caafimaad? Dilaaliinta shahaadaysan ee xarumahayada isdiiwaangalinta ayaa kaa caawin kara isbarbardhiga fursadaha qorshaha kooxda, xisaabaha lacag celinta caafimaadka iyo doorashooyinka akoontiga kaydka caafimaadka.

Ma u baahantahay caawimaad  
Dallaalayaasheena shahaadadeysan waxay kaa caawin karaan adiga iyo shaqaalahaaga *lacag la'aan ah* si aad u fahantaan fursadahaaga caymiska, iyo kaalmada maaliyadeed ee la heli karo iyo xitaa waxay kaa caawinayaan inaad codsataan caymiska.

Si aad wax badan uga barato doorashooyinkaaga caymiska ama lagugu xidho dullaal, iimayl u dir [smallbusiness@wahbexchange.org](mailto:smallbusiness@wahbexchange.org).

## 8. Qorshaha maalgelinta

Saadaasha:

Waxaad u baahan tahay inaad lahaato qiyaas si wanaagsan loo baadhay oo ku saabsan bilawga iyo kharashaadka hawlgelinta ganacsigaaga. Wuxaad sidoo kale u baahan tahay inaad leedahay rajo macquul ah oo ku saabsan qadarka lacagta ganacsigaagu uu keeni doono. Saadaashani waxay kaa caawin doontaa inaad dhaqaale ahaan u diyaargarowdo bilawga ganacsigaaga, haddii aad adigu maalgeliso ganacsiga ama aad raadsato deymo dibadda ah ama maalgashadayaasha.





### Ku dar saadaasha:

- Kharashaadka lagu bilaawaayo. Go'aami inta lacag ee aad ku bilaawi karto ee aad u baahan doonto tas-hiilaadka ama xarumahaaga, qalabka, alaabta guriga, alaabta guriga, agabka, calaamadaha, ruqsada iyo ogolaanshaha, la-taliyayaasha, iwm. Ku dar dhammaan kharashyada lagama maarmaanka u ah fulinta qorshahaaga ganacsi.
- Saadaasha socodka lacagta caddaanka ah bishiiba. Odoroska socodka kaashka ayaa wax ku ool u ah miisaaniyadaada. Waa inaad miisaaniyad u samaysaa ugu yaraan 24 bilood oo tafaasiil heer sare ah, taasoo muujinaysa cadadka iyo wakhtiga lacagta caddaanka ah ee soo galaysa iyo ka baxaysa ganacsiga. Si wada jir ah, kharashyada bilowga ah iyo odoroska socodka lacagta caddaanka ah ayaa cadayni doona wadarta guud ee lacagaha looga baahan yahay ganacsiga si loo gaadho heerka sii jiritaanka ganacsiga (markaas uu ganacsigu isaga uu iska bixin karo).
- Warbixinta faa'iidata & khasaaraha la saadaaliyay (P&Ls) ugu yaraan laba sano. P&Ls, oo sidoo kale loo yaqaan xisaabaadka dakhliga, waxay muujinayaan muuqaalka ganacsiga iyagoo isticmaalaya isla'egta:  
Dakhliga - Kharashaadka = Faa'iido (ama khasaare)
- Xaashiyaha hadhaaga ee la saadaaliyay ee bilowga ganacsiga, dhamaadka sanadka koowaad iyo dhamaadka sanadka labaad. Xaashiyaha dheelitirka waxay muujinayaan sawirkha ganacsiga iyadoo la isticmaalayo isla'egta:  
Hantida - Dayamaha maqan = Lacagta saafida ah  
(lacagta mulkiilaha)

### Maalgelinta:

Marka aad ogato inta lacag ah ee uu u baahan doono ganacsigaagu si uu u gaadho heerka uu bilaabi karo in uu is taageero oo uu kobco, waxa aad go'aamin kartaa sida aad ku heli lahayd lacagaha loo baahan yahay.

- Ilaha dhaqaale ee suurtogalka ah waxaa ka mid ah kaydinta mulkiilaha, asxaabta, qoyska iyo deyn-bixiyeyaasha kale ee gaarka ah, lamaanayaasha ama shurakada ganacsiga, kaararka deynta, deynta ganacsiga, bixinta saamiyada dadweynaha, iwm. Dhammaan ilahan waxaa laga yaabaa inaysan ku habooneyn adiga iyo ganacsigaaga.
- Inkastoo laga yaabo inaad maqashay xanta sheegaya inay jiraan deeqo lagu bilaabo ganacsi, guud ahaan run maaha. Xaalado gaar ah oo keliya ayaa la bixiyaa deeqo lagu bilaabo ganacsi; tusaale ahaan waxay noqon kartaa cilmi-



baaris cilmiyeed iyo horumarin ay u baahan yihii hay'adaha federaalku. Waaxda ganacsigu waxay leedahay hage bilaash ah oo qeexaya 27 xeeladood oo kor loogu qaadayo raasamaalka ganacsiga oo la yidhaa [Xikmada bilawga](#).

- Amaahda ganacsigu waxay caadi ahaan u baahan yihii "5C-yada":
  - Capital/Cash (Raasamaalka/Lacagta caddaanka ah ) – Maalgelinta lacagta caddaanka ah ee mulkiilaha. Milkiilyaasha badanaa waa inay keenaan 25-30% dhaqaalaha loo baahan yahay si loo bilaabo ganacsi cusub.
  - Capacity/Cash Flow (Awoodda/Socodka Lacagta) – Caddaynta in mulkiilaha ganacsigu uu awood u leeyahay in uu bilaabo oo uu si guul leh oo wanaagsan uu u socodsiyo ganacsiga. Khibrada milkiilaha ee ganacsigiisa, tababarka ganacsiga iyo khibrada maaraynta, oo ay weheliso qorshe ganacsi oo si wanaagsan loo horumariyay, ayaa gacan ka geysan doona in la dhiso awoodda. Saadaasha socodka lacagta caddaanka ah ayaa muhiim ah halkan, waxayna u baahan tahay inay muujiso awoodda ganacsigu u leeyahay inuu ka soo baxo waajibaadkiisa maaliyadeed, oo ay ku jiraan bixinta deynta.
  - Collateral (Dammaanad laga sii haayo) – wax qiimo leh oo lagu dammaanad qaado. Caadi ahaan dammaanad waxaa ka mid ah hantida ganacsiga, alaabta guriga, alaabta guriga aan guur guurin, qalabka, iyo alaabada, iyo hantida mulkiilaha ee ka baxsan ganacsiga (hanti ma-guурto ah, saamiyada, iwm.).
  - Character (Dabeeecada) - kalsoonida in mulkiiluhu uu si dhab ah u qaato masuuliyadaha, sida lagu muujiyay, qayb ahaan, iyada oo loo marayo taariikhda deynta mulkiilaha.
  - Conditions (Shuruudaha) - Kalsoonida in jawiga guud (dhaqaalaha, isbeddellada warshadaha, iyo xoogagga suuqa) in ay taageeraan awoodda ganacsiga ee guusha.
- Falka raadinta maal-gashadayaasha iyo amaah-bixiyeyaasha gaarka ah waa mid si heersare ah loo habeeyey oo u baahan fahamka [sharciyada dammaanadda](#).
- Haddii aadan ganacsigaaga ku maalgelin karin heerkii aad markii hore qorshaysay, ka fikir siyaabaha aad dib ugu soo celin karto qorshayaashaada, sida in aad waxyar ku qarash gareeysid marka hore, adeeg yar aad so iibsato/alaab yar, so amaahashada alaabta ama so iibso alaab horay loo isticmalay, waxaad shaqaalaysiisataa shaqaalo tiradoodu yartahay, waxaadna raadsataa goob aan aad qaali u ahayn, iwm. La soco in isbeddelada aad ku samayso dhinaca kharashka ay u badan tahay inay sidoo kale saamayn doonto odoroska dakhligaaga.

- Booqo wabseetyadan ama mareegahan si aad u hesho caawinaad ku saabsan maalgelinta ganacsiga:
  - [Maamulka Ganacsiga Yaryar ee Maraykanka](#)
  - [Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar](#)
  - [Waaxda Ganacsiga ee Washington](#)
  - [Maamulka Ganacsiga Yaryar \(SBA\) Xafiiska mijaahidiinta ciidanka](#)
  - [Maamulka Ganacsiyada Yaryar \(SBA\) Amaah bixiyayaasha yaryar ee Gobolka Washington](#)
  - [Fundera](#)

## 9. Ma u baahan tahay gargaar?

[Xiriirka Ganacsiga Yaryar](#) ee Gobolka Washington ayaa kaa caawin kara inaad hesho macluumaadka iyo khayraadka aad u baahan tahay. Sidoo kale, naga caawi horumarinta Hagaha Ganacsiga Yaryar adiga oo buuxinaya [sahan ama xog uruurin](#) gaaban oo qarsoodi ah.



**BILAW**



**ganacsigaaga**



# BILAW ganacsigaaga

## 1. Ma diyaarisay qorshahaaga ganaci?

Ma rabi doontid inaad bilowdo ganacsigaaga ka hor intaadan dhamaystirin qorshahaaga ganaci! Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad gujiso sanduuqa "Qorshaynta (Planning)" ee tilmaamaha qorshaynta ganacsiga. Gargaarka qorsheynta iyo macluumaad qoto dheer oo ku saabsan mid ka mid ah tillaabooyinka boggan, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad hubiso ilaha soo socda:

- [Maamulka Ganacsiga Yaryar ee Maraykanka](#)
- [SCORE](#)
- [Saamaynta Ganacsiga NW](#)
- [Xarunta Washington ee Haweenka ganacsiga kujiro](#)
- [Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar ee Washington](#) (la xidhiidh ka dib marka aad haysato qorshe qabyo ah)

## 2. Ma wuxaad iibsanyasaan ganaci jira oo hore u shaqaaynaaye?

Haddii aad iibsanyaso ganaci ama xitaa qaar ka mid ah hantida ganacsiga, La soco in laga yaabo inaad si badheedh ah u iibsanyaso deymihii hore oo ah cashuuro aan la bixin iyo qiimayn khibradeed. Qaado la talin sharchiyeed karti leh ka hor inta aadan iibsani ganaci, sababtoo ah daymihi hore ma aha inay qayb ka yihiin dukumeentiyada dhaqaale ee caadiga ah.

- Wixii daymaha suurtagalka ah ee la xidhiidha Waaxda Dakhliga, wuxaad qasbiyan ubaahantahay in mulkiilaha inuu ku siiyo [Warqada Xaaladda Cashuur \(Tax Status Letter\)](#) ee ku saabsan cashuur kasta oo ka maqan ganacsigu. Wuxaad sidoo kale u baahan kartaa in aad waaxda dakhliga u bixisaa [canshuurta isticmaalka](#) oo ku saabsan qiimaha hantida la taaban karo ee ku jirta iibsigaa, tusaale ahaan qalabka, alaabta guriga, alaabta, iwm. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg Daawacadeena aan ka qornay Mawduucyada Cashuuraha ee cinwaankiisu yahay [libka hantida ganacsiga](#).
- Magdhawga shaqaalah, libsadaha ganacsiga waxa suurtogal ah in uu masuul ka noqdo qiimaynta hanti dhawrka ee lagu leeyahay, qiimaynta hantidhawrka oo la sugayo, iyo sidoo kale in la dhaxlo mas'uuliyadaha sheegashada iyo saamaynta ay ku yeelanayaan qiimayaasha caymiska mustaqbalka.

- Iibsadayaasha suurtagalka ah waa in ay ka codsadaan iibiyaha xogta iyo macluumaadka ku taxan daabacaadan [libsadaha halista u bareera](#).
- Caymiska shaqo la'aanta, waxaa laga yaabaa inaad si badheedh ah u iibsanayso deymantii hore waxaana laga yaabaa in lagula xisaabtamo dayn kii ka horeeyey.

### 3. Dooro qaab dhismeed ganacsiga

Ganacsigu waa shirkad sharci ah. Waxay yeelan karaan hanti, waxay leeyihii akawntiyada bangiga oo waxaana laga rabaa inay bixiyaan cashuur. Waxaa jira noocyoo kala duwan oo shirkado ganacsi ah, mid walbana wuxuu leeyahay faa'iidooyin iyo faa'iido darrooyin gaar ah.

Doorashada "saxda" ah ee adiga kugu habboon waxay ku xiran tahay danahaaga iyo baahiyahaaga. Wuxuu doontaa lataliye wanaagsan si aad u fahamto waajibaadkaaga ku saabsan ganacsigaaga. Baro fursadaha qaabdhismedka ganacsiga oo kala hadal la-taliyayaashaada si aad u go'aamiso midka adiga kuu wanaagsan [Hel sharci, canshuur](#) iyo ganacsi ([SCORE, Xarumaha Horumarinta Ganacsiga Yaryar](#)) la taliyayaasha. Go'aannada wanaagsan waxay ku saleysan yihii:

- Tirada mulkiilayaasha hadda iyo ee loo qorsheeyay mustaqbalka.
- Noocyada mulkiilayaasha - dhamaantood ma yihii kuwa shaqsiyaad ah ama aay shirkad yihii (sida shirkadaha, ganacsiga ku salaysan is aaminaada, iwm.)?
- Dareenka mas'uuliyadda.
- Saamaynta canshuurta federaalka - [Adeegga Dakhliga Gudaha \(IRS\)](#).
- Diiwaangelinta iyo shuruudaha xereynta canshuurta iyo kharashyada.
- dukumeentiyada qoran iyo tixgelinta maamulka hay'adda.

**Ganacsiga aan shirkada lagu ahayn** waxaa iska leh hal qof ama lamaane is qaba.

Ganacsiyadani waa kuwa aan qaali ka aheyn in la sameeyo, mana jiraan wax shuruudo warbixeeneed oo lagaga baahan yahay oo gaar ah. Milkiilaha ayaa shakhsii ahaan mas'uul ka ah (ka mas'uul ah) dhammaan deymaha ganacsiga iyo canshuuraha federaalka. Si aad u fayl garaysato Codsiga ruqsada ganacsiga ee gobolkeena si aad u hesho lahaanshaha ganacsiga aan shirkada lagu ahayn daawo muqaalkan [Waaxda Dakhliga](#).

**Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan** (LLCs) waa kuwo aan aad caan u ahayn.

Ganacsigu waxa uu leeyahay masuuliyad sharci oo xadidan sida shirkad, laakiin waxa uu leeyahay shuruudo maamul oo yar. Milkiilayaasha LLC waxaa loo yaqaan "xubnaha."

Samaynta LLC waxay u baahan tahay ka iska fayl garaynta ama iskadiiwan galinta [Xoghayaha gobolka Washington](#). Marka aay timaado canshuuraha federaalka, LLCs waxaa sida caadiga ah loola dhaqmaa sida ganacsiga aan shirkada lagu ahayn haddii uu jiro hal milkiile, ama sida shuraakowga haddii ay jiraan wax ka badan hal milkiile. Si kastaba ha ahaatee, adoo buuxinaya [foomka doorashada kala soocida](#) IRS, LLCs waxaa loola dhaqmi karaa sida shirkadaha iyada oo ujeedooyinka yihii bixinta canshuurta federaalka In kasta oo aan loo baahnayn, samaynta LLC waa in la sameeyaa iyadoo la kaashanayo xirfadle sharchiyeed oo aqoon u leh. Shuruudaha kale waxaa ka mid ah, LLCs waxaa looga baahanyahay inay sameeyaan dukumeenti maamul kuwaas oo loo yaqaano Heshiiska Hawlgelinta.

**Iskaashiga Guud waa sida** ganacsiga aan shirkada lagu ahayn oo leh wax ka badan hal milkiile. Shurakada waxay wadaagaan waajibaadka maaraynta, faa'iidada iyo khasaarahaa, mid walbana shakhsii ahaan ayaa mas'uuliyad aay u saarantahay (mas'uul ka ah) dhammaan deynta ganacsiga. Sababtoo ah ficillada uu sameeya mid ka mid dadka shirkada ah waxay keeni karaan masuuliyad shakhsiyeed kuwa kale, shuraakooyinku waxay noqdeen kuwo aan caan ahayn tan iyo inti aay socdeen LLCs. Ujeedooyinka canshuurta federaalka, ganacsiga waxaa looga baahan yahay inuu xareeyo ama uu diiwan galiyo soo celinta [shuraakada](#), iyadoo oo uu la socdo dakhliga ama khasaarahaa uu u socdo lammaane kasta iyadoo lagu saleynayo inta uu le'eg yahay waxa mid kasta uu ku leeyahay ganacsiga.

**Shirkaduhu** ayaa ka qaab-dhismeed ballaran kuwa kale. Sida LLCs, shirkaduhu waxay leeyihii masuuliyad sharchi oo xaddidan. Si aad u samaysato shirkad, waa inaad ka fayl garaysataa [Xoghayaha gobolka](#) Washington waana inaad samaysaa dukumeenti maamul – kaas, oo hada noqoni doono xeer hooseed Shirkaduhu waxay sidoo kale leeyihii shuruudo kale, sida bixinta shahaadooyinka saamiyada, qabashada shirarka sannadlaha ah iyo ilaalinta daqiqadaha shirarka, doorashada agaasimayaasha, iwm. Milkiilayaasha shirkadaha waxaa loo yaqaanaa "Hantiwadaagta" ama "saamilayda." Milkiilayaasha shirkadaha ee isla shirkada ka shaqeeya waa shaqaale waana inay haystaan Canshuurta mushaar bixinta federaalka oo laga reebay oo ay soo sheeqo tagaan sida shaqaalaha kaleba. [Shirkadaha](#) waxay xareeyaan ama aay fayl gareeyaan canshuur celinta shirkadaha federaalka IRS Haddii ay u qalanto oo ay codsato waqtii ku habboon, shirkaduhu waxay dooran karaan canshuur dhaaf oo canshuurta ganacsiga aan lagu bixinaynin heer shirkad, halkaas oo cashuurta dakhliga ay bixiyaan mulkiila(yasha) laakiin sidoo kale ma bixiyaan shirkadda ("[Shirkadaha-S](#)"). In kasta oo

aan loo baahnayn, samaynta Shirkadda waa in la sameeyaa iyadoo la kaashanayo xirfadle sharchiyeed oo aqoon u leh.

**Shuraakada xaddidan** (LPs) inta badan looma isticmaalo ganacsiyada yaryar, inkastoo ay ku badan yihii lahaanshaha hantida ma guurtada ah. LP-yada waxay ka kooban yihii hal ama in ka badan oo shuraako guud ah iyo hal ama in ka badan oo la-hawlgalayaal xaddidan. Wada-hawlgalayaasha guud ayaa maamula shirkadda oo si buuxda u wadaaga faa'iidada iyo khasaaraha. Si ay naftooda uga ilaaliyaan mas'uuliyadda, la-hawlgalayaasha guud inta badan waa shirkado ama LLCs halkii ay ka ahaan lahaayeen shahsiyad. Wada-hawlgalayaasha xaddidan waxay wadaagaan faa'iidada ganacsiga, laakiin khasaarahoodu wuxuu ku kooban yahay inta uu le'eg yahay maalgashigooda. Wada-hawlgalayaasha xaddidan badanaa kuma lug yeeshaan hawl-maalmeedka shirkadda. Waxa aad heshaa la-talin sharchi ka hor intaadan dooran qaab-dhismeedka LP ee ganacsigaaga. Sida LLCs iyo Iskaashiga, Samaynta LP-yada waxay u baahan tahay fayl garaaynta ama iskadiiwan galinta [Xoghayaha gobolka Washington](#).

#### Ganacsiga Gobolka Washington iyo Tixgelinta Qaabdhismeedka Ganacsiga:

Tixgelinta	ganacsiga aan shirkada lagu ahayn	Iskaashiga Guud	Shirkadda Masuuliyadda Xaddidan (LLC)	Shirkadda
Fayl garee ama iska diiwaan geli Xoghayaha gobolka Washington	Maya	Maya	Haa	Haa
Dhibaatada Samaynta	Hooseeya	Hooseeya	Dhex dhexaad ah	Dhex dhexaad/Sareeya
Masuuliyadda	Mulkiilaha Keliga ah waxa uu leeyahay masuuliyad aan xadidnayn oo deymo iyo canshuuraad ah.	Wada-hawlgalayaashu waxay leeyihii masuuliyad aan xadidnayn oo deymo iyo canshuuraad ah.	Xubnaha caadi ahaan masuul kama aha deymo laakin waxay masuul ka yihiiin cashuurta.	Hantiwadaagta caadi ahaan masuul kama aha deymo laakin waxay masuul ka yihiiin cashuurta.

Tixgelinta	ganacsiga aan shirkada lagu ahayn	Iskaashiga Guud	Shirkadda Masuuliyadda Xaddidan (LLC)	Shirkadda
<b>Shuruudaha Hawlgalka</b>	Shuruudo sharci oo aad u yar.	Shuruudo sharci oo aad u yar	Qaar ka mid ah shuruudaha rasmiga ah sida heshiisyada hawlgalka iyo warbixinta sanadlaha ah.	Guddiga maamulka, shirarka sannadlaha ah, iyo warbixinta sannadlaha ah ee loo baahan yahay.
<b>Maamulka</b>	Mulkiilaha Keligisa ah ayaa si buuxda gacanta ugu hayaa maamulka iyo hawlaha.	Sida caadiga ah, lammaane kastaa oo shurakada kamid ah wuxuu leeyahay cod la siman kuwa kale, haddii aan si kale loo kala sareesiinin xaga maamulka iyo masuuliyada.	LLCs waxay leeyihii heshiis hawlgal oo qeexaya maamulka iyo maareynta.	Shirkaduhu waxay leeyihii xeer-hoosaadqeexaya maamulka. Sida caadiga ah waxaa maamula agaasimeaal ay doorteen Hantiwadaagta.

Tixgelinta	ganacsiga aan shirkada lagu ahayn	Iskaashiga Guud	Shirkadda Masuuliyadda Xaddidan (LLC)	Shirkadda
<b>Canshuurta Federaalka</b>	Milkiilaha keligiis ah ayaa ka warbixiya dhammaan dakhliga iyo kharashyada ganacsiga wuxuuna ku bixiyaa canshuurta cashuur celinta shakhsii ahaaneed.	Lamaane kastaa ee kamid ah shuraakada wuxuu soo sheegaa oo uu ka warbixiyaa qaybtiiisa dakhliga iyo kharashaadka ganacsiga waxayna si shakhsii ahaaneed kaga bixiyaan canshuurta wixi ganacsiga kasogalo.	Haddii hal xubin oo LLC ah, sida caadiga ah u bixiyo canshuur si shaqsi ahaan. Haddii wax ka badan hal xubin, aay caadi ahaan u bixiyaan canshuurta shuraako ahaan. Waxay la dooran karaa iyaga oo uu la socdo IRS si ay u bixiyaan canshuurta shirkad ahaan (ama c- ama s-).	Haddii shirkad caadi ah (c-corp), loo canshuuro ganacsi ahaan. Haddii saami qaybsiga loo badalo Hantiwadaagta, saami qaybsiga waxa lagu cashuuraa heer shakhsii ah. Waxay la dooran karaan IRS si loogu canshuuro sidi s-corp. Mid kasta oo ka mid ah saamileyaasha s-corp waxay ka warbixiyaan qaybtooda dakhliga iyo kharashyada ganacsiga waxayna ku bixiyaan cashuuraha cashuur celinta shakhsii ahaaneed.
<b>Cashuur dulsaarka ee alaabta la sameeyay la dulsaaray ee Washington iyo Mas'uuliyad da (Waaxda Dakhliga ee Washington)</b>	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. La-hawlgalayaasha guud waxay leeyihiin masuuliyad aan xadidnayn.	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. La-hawlgalayaasha guud waxay leeyihiin masuuliyad aan xadidnayn.	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. Xubnaha waxaa laga yaabaa inay mas'uul ka yihiin canshuuraha.	Canshuurtu waxay ku saleysan tahay dakhliga ganacsiga. Dadka maamulka waxaa laga yaabaa inay mas'uul ka yihiin canshuuraha.

OGOW: Macluumaadkan waxaa loogu talagalay tixraac kaliya, haddii aad u baahan tahay tixgalin faahfaahsan la xiriir sharciga aad ku kalsoon tahay ama lataliyayaasha cashuuraha.

## 4. Go'aami magaca ganacsigaaga

Markaad go'aansanayso magaca ganacsiga, waxaa jira waxyaabo badan oo la tixgeliyo:

- Ma soo jiidan doontaa macaamiishaada mustaqbalka?
- Si fiican miyay uga shaqayn doontaa naqshadaynta garaafyada iyo suuqgeynta?
- Ma jiraa qof kale oo isticmaalaya magaca? Hadday sidaas tahay, ma laga yaabaa in jahawareer ka jiro suuqa, mise waxaad ku xad-gudbi kartaa magacooda sharciga ah, calaamadaha ganacsiga ama calaamad adeeg? Baro farqiga u dhexeeyaa "[Magaca shirkada Sharciga ah Qodobka 3 ee Xeerka Washington oo dib loo eegay \(Revised code of Washington RCW\) 23.95](#)" "[Magaca ganacsiga](#)," magaca loo isticmaalo ganacsiga dartiis, iyo "[calaamadaha ganacsiga](#)," xuquuqda gaarka ah ee isticmaalka magaca. Waxaad samayn kartaa raadin waxaadna ka raadini kartaa [Xafiiska xuquuq siinta so saarayaasha iyo calaamadaha ganacsiga ee Maraykanka](#), Waaxda Dakhliga ee Gobolka - [Adeegga Shatiga Ganacsiga, ee Gobolka Washington](#), Xoghayaha Gobolka – [Qeybta Shirkada & Samafalada](#),
- Haddii meheraddaadu tahay shirkad ama shirkad masuuliyad xaddidan, magacu waa inuu muujiyaa nooca shirkada (sida Corp., Inc., LLC, iwm.).
- Markaad magaca u gudbiso Xoghayaha gobolka waxay dib u eegi doontaa in magaca yahay mid diyaar ah oo la heli karo haddii magaca la heli karo diiwaangelinta ayaa la buuxin doonaa. Si kastaba ha ahaatee, waxaad ka codsan kartaa boos celin magaceed Xoghayaha gobolka Washington.

Magacyada Shirkada Sharciga ah waxay noqonayaan diiwaanno markaad xerayso shirkad sharci ah sida LLC ama Shirkad. Waxaad iska diiwaan gelin kartaa magaca ganacsiga markaad buuxiso Codsiga ruqsada Ganacsiga Washington, oo ay ku kacayso \$5 magaciiba. Haddii aad sidoo kale rabto inaad calaamad u samayso magaca, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad la tashato [qareenka](#) kiisaska la xidhiidha hantida. Haddii hawlahaga ganacsi ay dhaafsiisanaan doonaan Gobolka Washington, ka fayl garee calaamada ganacsiga ee [Xafiiska xuquuq siinta so saarayaasha iyo calaamadaha ganacsiga ee maraykanka](#). Haddii hawlahaga ganacsi ay kusii ekaani doonaan oo aaysan dhaafi doonin gudaha Washington, ka xarayso ama ka fayl garee calaamada ganacsiga [Xoghayaha gobolka](#).

## 5. Haddii aad dooranayso shirkad ama qaab-dhismeedka LLC, isdiiwaangeli

Haddii qaabka ganacsi ee aad dooratay uu yahay shirkad, Shirkadda mas'uuliyadda xaddidan, ama shuraakada xaddidan, waxaad u baahan doontaa inaad hagaajiso shirkadda ama uu qareenkaagu kuu sameeyo.

- Waxaa laga yaabaa inaad maqashay in diiwaangelinta shirkadada ganacsiga ee ku taalo gobol aan Washington ahayn ay tahay dariiqo loo maro. Samee shaqada lagaaga baahanyahay ka hor intaadan ku dhaqaaqin taladaas! Haddii aad ka shaqaynayso ganacsigaaga gudaha Washington, waxaad u baahan doontaa inaad iska diiwaan geliso Washington. Haddii aad ka samayso iska diiwaangelinta bilowga ah gobol kale, waxaad u baahan doontaa inaad iska diiwaan geliso Washington sidii "shirkad shisheeye". Waxba kuma kaydini doontid diiwaangelinta gobolka, shatiga, iyo kharashka cashuurta ee hawlgalkaaga Washington, laakiin waxaad yeelan doontaa kharashyada dheeraadka ah ee gobolka kale.
- Go'aanso cidda noqon doonta "[wakiilkaaga diiwaangashan](#)," qofka Washington deggan kaas oo heli doona adeeggaaga rasmiga ah ee habka iyo ogeysiisyada shirkada ganacsiga. Waxay noqon kartaa adiga, qareenkaaga, ama dad kale
- Wuxaan samaysaa "Qodobada Is dhexgalka" (shirkada) ama "Shahaadada Sameynta" (shirkadamas'uuliyad xaddidan), kadibna ka fayl gareyn xafiiska Xoghayaha gobolka. Ka fayl garaynta Xoghayaha gobolka waxa lagu samayn karaa <https://www.sos.wa.gov/corporations-charities>.
- Marka aad fayl garaynayso, waxaad heli doontaa Aqoonsigaaga Ganacsiga Midaysan ee Gobolka Washington, ama lambarka aqoonsiga Ganacsiga (Unified Business Identifier, UBI). Ogow: Hubi inaad isticmaasho UBI ee la soo saaray markaad la macaamilayso wakaaladaha kale ee gobolka.
- U samee dukumeentiga maamulka shirkadaada: "[Xeer-hoosaadyo](#)" (hay'ad iskaashiyeed); "[Heshiiska Hawlgelinta](#)" (shirkada mas'uuliyadda xaddidan); ama "[Heshiiska Iskaashiga](#)" (iskaashiga xadidan).

## 6. Go'aami goobta ganacsigaaga

Waxaa laga yaabaa in ganacsigaagu leedahay meel bayaan ah, sida dukaanka tafaariiqda, makhaayadda ama xafiiska xirfadlaho takhasuska leh, ama waxa laga yaabaa inay tahay mid soconaaysa ama ku saleeysan shabakad ama Web-ku-saleysan.

Si kastaba ha noqotee, si aad ruqsad ugu yeesho ganacsigaaga waxaad u baahan doontaa inaad bayamiso oo aad cadaayso goobta saxda ah ee ganacsigaaga uu ku yaalo. Tixgeli waxyaabaha soo socda markaad go'aaminayso meesha aad doonayso in ganacsigaaga aad asal uga dhigto:

- Meeshu ma soo jiidan doontaa macaamiishaada?
- Miyaad xisaabisay dhammaan goobaha la xiriira bilawga iyo kharashyada hawlgalka ee qorshahaaga ganaci?
- Goobtu ma tahay mid ku taalo meel ku habboon?
- Haddii ay ku lug leedahay [heshiis kiro](#), maxay shuruudaha noqon doonaan?
- Waa maxay ruqsadaha gaarka ah, haddii ay jiraan, ayaa looga baahan doonaa goobtaas?
- Haddii guri-ku-salaysan yahay, waa maxay xannibaadaha [caasimadaada ama magaaladaada, gobolka](#), ama ururka mulkiilaha gurigu ay saareen ganacsigaaga?

## 7. Hel lambarkaaga canshuurta federaalka oo waxaad tixgelisa ikhtiyaarada xereynta canshuurta federaalka (LLCs iyo shirkadaha)

Haddii ganacsigaagu yahay shirkad gaar loo leeyahay ama LLC-ka mid ah oo aanad yeelan doonin shaqaale, waxaad u isticmaali kartaa Lambarkaaga Amaanka Bulshada sida lambarka aqoonsiga federaalka ee ganacsiga, inkasta oo qaar badan oo ka mid ah milkiilayaasha ganacsiga ay doorteen inaysan samayn sababo qarsoodi ah dartood.

Haddii kale, waxaad u baahan doontaa inaad hesho [lambarka aqoonsiga federaalka](#) (sidoo kale loo yaqaan lambarka aqoonsiga canshuur bixiyaha iyo lambarka aqoonsiga shaqo-bixiyaha).

Foomka canshuurta federaalka ee [ganacsiga aan shirkada lagu ahayn](#) waa 1040-Jadwalka C, iyo [iskaashatada](#), Foomka 1065. [Shirkadaha](#) caadiga ah, xaraynta ama fayl garaynta canshuurtu waxay ku jirtaa Foomka 1120. Haddii aad rabi lahayd in laguula dhaqmo sidii [Shirkadaha-S](#) (Foomka 1120S ee canshuur dhaafka ah ee canshuurta ganacsiga aan lagu bixinaynaynin heer shirkad), Waa inaad buuxisaa [Foomka 2553 - Doorashada Shirkadha](#) Ganacsiga Yaryar 75 maalmood gudahooda markaad sameysid ganacsigaaga (eeg [Tilmaamaha Foomka 2553](#)). IRS ma aqoonsana LLCs inay yihiin kala soocidda ujeeddooyinka canshuuraha. [LLCs](#) waxay ku dhacaan cashuurta ganacsiga aan shirkada lagu ahayn haddii hal milkiile, iyo cashuurta

shuraakada haddii aay yihii in ka badan hal milkiile. Si kastaba ha noqotee, LLCs waxay dooran karaan in loola dhaqmo sida caadiga ah ama shirkadaha-S iyada oo ujeedada tahay canshuurta federaalka iyada oo loo marayo [foomka 8832](#) ee IRS. La tasho xirfadlahaaga cashuuraha wixii macluumaad dheeraad ah iyo talo bixin ah.

## 8. Hel ruqsadaha ama sharciyada iyo ogolaanshaha loo baahan yahay

Ganacsiyada badankoodu waa in ay ruqsad ka haystaan heer gobol iyo heer deegaan, qaar badana waxay u baahan yihii [shatiyo ama ruqsadooyinka xirfadeed](#). Waxay u badan tahay inaad u baahan tahay ruqsadooyin meel kasta oo aad ka ganacsanayso; ma aha oo kaliya meesha aad salka ku hayso oo aad markaas ka gacansanayso. Sidoo kale, ganacsiyada qaarkood waxay u baahan yihii ogolaanshooyin dheeraad ah.

Qalabka [ruqsadaaynta ganacsiga](#) ee onlaynka ah waa qalab waxtar badan leh U isticmaal si aad u barato ruqsad bixinta iyo shuruudaha oggolaanshaha ee ganacsigaaga gaarka ah. Geli dhaqdhaqaqa ganaci ee aad damacsan tahay in aad ka shaqayso, goobta, iyo macluumaadka kale ee muhiimka ah, oo hel liis onlays ah oo ruqsadaha gaarka ah iyo ogolaanshooyinka kuwaas oo ay u badan tahay in loo baahdo.

- Markaad xerayso ama aad fayl garayso [Codsiga Ruqsadaynta Ganacsiga Washington](#), u diyaargarow inaad wax ka qabato kuwan soo socda:
  - Haddii aad u rabto caymiska shaqo la'aanta ee saraakiisha shirkadaha. Saraakiisha adeegyada ka bixiya Washington waxaa si toos ah looga dhaafayaa caymiska shaqo la'aanta, haddii aan shaqo-bixiyuhu si gaar ah u codsan in uu bixiyo. Haddii aad rabto inaad buuxiso saraakiishaada shirkadda, waa inaad soo gudbisaa Foomka Doorashada ikhtiyaariga ah. Xog badan ka hel [halkan](#).
  - Macluumaadka guud ee ganacsiga oo aay kujiraan goobta ganacsigu ku yalo iyo lahaanshaha.
  - Qiyaas dulmar ah oo xaqiiq ahayn oo ah dakhligaaga guud ee sanadlaho ah ee la filayo.
  - Haddii aad doonayso inaad shaqaale aad ku shaqaalaysiiso 90 maalmood gudahooda markaad bilawdo.
  - Haddii aad rabto [caymiska magdhawga shaqaalaha ikhtiyaariga ah](#) ee milkiilayaasha ganacsiga.

- Codsiga Ruqsadaynta Ganacsigu waa foomka ruqsada ganacsiga ee gobolka oo uu xisaabaadkaaga ka samaystaa wakaalado badan oo gobolka Washington ah oo ay ku jiraan Waaxaha Dakhliga, Ammaanka Shaqada, iyo Shaqada & ganacsiga. Qaar ka mid ah ruqsadaha deegaanka iyo kuwa gaarka ah waxaa lagu heli karaa iyadoo la isticmaalayo Codsiga Ruqsada Ganacsiga. Raac xiriirinta ama links-ka sare si aad u hesho macluumaadka ku saabsan deegaanka iyo khidmadaha ruqsada gaarka ah.
- Wixii macluumaad ah ee ku saabsan Ruqsadaha deegaanka AAN lagu maamulin Codsiga Ruqsada Ganacsiga, la xidhiidh caasimad kasta ama magaalo kasta oo aad ganacsi ka samayn doonto.
- Ganacsiyada qaarkood waxay u baahan yihii ruqsadooyin caalami ah, sida naqshadeeyayaasha, injineerada, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, la-taliyayaasha, qareennada, Xisaabiyyaha guud ee la aqoonsanyahay (Certified Public Accountants, CPAs), iwm. Si aad macluumaad u hesho oo aad u ogaato shuruudaha, la xidhiidh maamulka ruqsadaaynta u qaabilsan xirfaddaas.
- Ganacsiyada la xiriira cuntada (sida maqaayadaha, meelaha qaxwada lagu iibyo, kuwa cuntada laga iibsado, kuwa wax soo saara wax soo saarka cuntada ah, iwm.) waxay u baahan doonaan ogolaanshaha maamulaha jikada iyo cuntada. La xidhiidh waaxda caafimaadka degmadaada. Soosaarayaasha cuntada iyo cabitaanka iyo sameeyaasha waxay u baahan doonaan Ruqsad ka timaada Waaxda Beeraha ee Washington. Haddii aad qorsheyneyso inaad iibiso, oo aad dadka ka iibiso, ama soo saarto cabitaan khamri ah, la xidhiidh Guddiga Khamriga iyo Xashiishka ee Gobolka Washington si aad u ogaato nooca Ruqsada aad u baahan tahay inaad codosato. Badeecada lagu daray xasiishka, waxaad u baahani doontaa inaad hesho ruqsada xashiiska. La xidhiidh Adeegga Ruqsadaaynta Ganacsiga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo codosado. Si aad u hesho caawimo ku saabsan ka furitaanka makhaayad Seattle, booqo goobta makhaayadda Seattle.
- Ganacsiyada ku jira ganacsiga dhismaha waa in loo diwaan galiyo in aay yihii qandaraaslayaal dhismo, taasoo u baahan isku xidhid iyo caymis. Ogsongoow in xitaa suuqgeynta ama u tartamida shaqada dhismaha ay kaaga baahan tahay in adiga laguu diwaan galiyaa qandaraasle ahaan.
- Qaar ka mid ah ganacsiyada adeegga waxay u baahan karaan diiwaangelinta qandaraaslaho haddii adeegyadoodu u bataan takhasusyada qandaraaslaho Tusaalooyinka: (a) Qaadayaasha qashinka waxay guraan qashinka dhismaha; (b) Adeegyada dayactirka cawska oo wax ka beddelaya ubaxa sariiraha, dhisida

waddooyinka, beerista dhirta, laama ka jarista dhirta ka xoog badan in uu jaro maqaska loppers-ka, ama isticmaalka qalabka korontada si meesha looga saaro dhirta aan loo baahnayn; (c) Adeegyada nadaafadda ee ka saara qashinka dhismaha marka ay nadiifinayaan dhismaha cusub; (d) Mashiinada bixiya adeegyada cadaadiska dhaqida ee nadiifiya dhismayaasha ama sagxadaha. Wuxuu jira ugu yaraan lacah dhan \$1,000 oo ganaax ah oo lagu fulinaayo shirkadaha ama shaqsiyaadka bixinaayaa adeegyada qandaraaslahaa iyada oo aan loo diiwaan gelin qandaraasle. Sharaxaadaha [kala-soocida qandaraaslahaa gaarka ah](#).

- Ganacsiyada keeni doona saamaynta deegaanka waxay u baahan karaan ogolaansho heer degmo iyo/ama heer gobol. Inta badan ruqsadaha waxaa maamula Waaxda Deegaanka ee Washington ama waaxda qorsheynta ee degmada maxalliga. Wixii ah Inta badan ogolaanshiyaha waxaa maamula Waaxda Cilmi-nafsiga ee Washington ama waaxda qorsheynta degmada. Wixii ah macluumaadka dheeraad ah ee ku saabsan meesha ugu fiican ee laga bilaabo jihaynta iyo caawinta la xidhiidh [Xafiiska dawladeed ee hal-abuurka iyo kaalmaynta Sharciveed](#)
- Dhismayaasha hoyga sida huteelada iyo loojyaasha meelaha baakimada ah laga helo, waa inay Ruqsad aay ka haystaan [Waaxda Caafimaadka](#) ee gobolka.
- Ganacsiyada bixiya daryeelka deegaanka iyo meheradaha bixiya adeegyada caafimaadka iyo caafimaadka waa inay Ruqsad aay ka haystaan [Waaxda Caafimaadka](#) ee gobolka. Xirfadlayaasha & Adeeg-bixiyayaasha Daryeelka Muddada Dheer sida dadka waaweyn ama adeegyada daryeelka ee guriga lagu bixiyo waxay shat siisay [Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka ee Gobolka Washington](#).
- Ganacsiyada xanaanada cunugga waa in ay ruqsad aay ka heystaa [Waaxda Caruurta, Dhalinyarada & Qoysaska](#) ee gobolka.

## 9. Dejiso hawlaaga

- Hadaad haysato Lambarkaaga aqoonsiga federaalka, lambarka aqoonsiga Ganacsiga Midaysan ee gobolka (UBI), dukumeentiga maamulka haddii aad tahay shirkad (xeer hoosaadka) ama LLC (heshiiska hawlgalka), iyo xoogaa lacag caddaan ah, waxaad samayn kartaa akoonti bangi. Markaad dooranayso bangi sida ugu fiican u daboola baahiyahaaga, tixgeli:
  - Helitaanka daynta (amaahda, kaararka deynta).
  - Badeecoyinka iyo adeegyada ganacsiga iyo kharashkooda.
  - Ku habboonaanta (goobta ku haboon iyo saacadaha ku haboon).

- Xiriirka shaqaalaha.
- Hubi fahamka shuruudaha sharchiyeynta iyo canshuurta, oo ay ku jiraan shayadan hoos ku taxan (ogoo: [Cutubka SOCODSII Ganacsigaaga](#) ayaa ku caawin kara):
  - Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka - canshuurta dakhliga, canshuurta Lambarka Amaanka Bulshada, Medicare, canshuurta shaqo la'aanta ee federaalka.
  - Waaxda Dakhliga ee Washington - canshuurta ganacsiga iyo shaqada, canshuurta iibka, canshuurta isticmaalka, canshuuraha gaarka ah.
  - Waaxda Shaqada & ganacsiga ee Washington - Ruqsadaaynta qandaraaslaha, magdhowga shaqaalaha, mushaharka & sharchiyada saacadaha
  - Waaxda Ammaanka Shaqada ee Washington - cashuurta shaqo la'aanta ee gobolka, ururinta lacagta caymiska ee Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad.
  - Degmadaada - canshuurta hantida, shuruudaha la xidhiidha cuntada, shuruudaha deegaanka.
  - Caasimooyinkaaga, magaaloooyinkaaga iyo degmooyinka - cusboonaysiinta ruqsada, qaanuunka calaamadaynta, xaddidaadaha aagagga, ganacsiga maxalliga ah iyo cashuurta shaqada.
- Si loo habeeyo oo loo dedejiyo codsiga iyo habka oggolaanshaha, Waaxda Ganacsiga ee Washington ayaa soo saartay [Tilmaamaha habraaca](#) oo loogu talagalay warshadaha gaarka ah Tan waxaa ku jira makhaayadaha (Seattle, Tacoma, Spokane iyo Spokane Valley), wax soo saarka (Arlington, Lynnwood iyo Marysville – Degmada Piece iyo Sumner ayaa kuso biiri doona dhawaan) iyo qandaraasyada (Kennewick).
- Samee nidaamka xisaabaadkaaga, fikrad ahaan adiga oo ka caawinaya xisaabiye ama diiwaangaliye xirfad leh.
- Hel caymis ganacsi.
- Go'aanso faa'iidooyinka shaqaalaha, sida caymiska caafimaadka (eeg qaybta [7. Caymiska](#) caafimaadka ee hoos yimaada qaybta "qorshee Ganacsigaaga".
- Haddii aad rabto in ganacsigaaga loo shahaadeeyo sida ganacsi [dumar ahaan, dadka laga tirada badan yahay ama ganacsiga dhaqaale ahaan liidata, ama ganacsi uu leeyahay shaqsi ciidan ahaan uso shaqeeyay](#), waxaad buuxisaa warqadaha shahaadaynta.

## 10. Shaqaalaysii shaqaalo

- Isku diyaar inaad wax shaqaalaysiiso, hadii loo baahdo. Inaad haysato shaqaale leh sifooyin iyo xirfado ku habboon ganacsigaaga ayaa muhiim u ah korriinka guusha leh ee ganacsigaaga. Waxaa jira ilo-maalaadyo oo kaa caawini doono qorsheynta xiriirkha shaqada, waxaana ka mid ah [Macluumaadka Suuqa Shaqada](#).
- Bixinta faa'iidooyinka caafimaadka ama taageeridda shaqaalaha si ay u helaan caymis caafimaad oo gaar ah waxay kaa caawin kartaa inaad shaqaalaysiiso oo aad haysataa shaqaale tayo leh. Baro wax badan oo ku saabsan doorashooyinkaaga adigoo isticmaalaya [Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington](#).
- Wuxuu kuu keeni karaa cadsade xirfad leh oo diyaar u ah inay shaqeeyaan.
  - [Worksource](#) wuxuu kuu keeni karaa cadsade xirfad leh oo diyaar u ah inay shaqeeyaan.
  - Shaqo bilaash ah oo cadaalad ah, [soo dhejinta shaqada onlaynka ah](#) waxay kaa caawin kartaa kordhinta tirada dadka cadsadaayaasha ah.
  - [Dhibcaha canshuurta](#) waxay kaa caawin kartaa dhimista kharashka shaqaalaha cusub.
  - Ikhtiyaarada kaalmada [tababarka shaqaalaha](#).
  - [Kabka mushaharka tababarka shaqada](#).
  - Agabka tababarka shaqaalaha - [Buundada Xirfadda](#)
  - [Barrnaamijka tababarka la xaqiijiyay ee la isticmaalo xiliga shaqaaleysiinta](#)
  - [Tababarka la xaqiijiyay ee la isticmaalo xiliga shaqaaleysiinta ee Worksource](#)
  - [Shaqaalaha waxbarashada shaqada](#)
- Haddii aad ku qorto foomka in aad shaqaale qaadanayso, macluumaadka Codsiga Ruqsada Ganacsiga waxaa loo gudbin doonaa Waaxda Ammaanka Shaqada si loo sameeyo xisaab cashuureedka shaqala'aanta ee gobolka, iyo Waaxda Shaqada & ganacsiga si ay u dejiso magdhowga shaqaalaha koontada caymiska oo aay u bixiso ogolaanshahaaga shaqo ee yar, haddii ay khuseyso. Wuxuu kuu keeni karaa cadsade xirfad leh oo diyaar u ah inay shaqeeyaan. Waxaa doontaa mas'uuliyado xarayn saddex biloodle ah oo aad la yeelan doonto labada wakaladood, oo lagu daray IRS (eeg qaybta [SOCODSII ganacsigaaga](#) ee hagaha ganacsiga yaryar)
- Shaqaale kasta oo cusub wuxuu u baahan doonaa inuu buuxiyo [Foomka Xaqiijiinta U-qalmitaanka Shaqaalaysiinta ee federaalka ee I-9](#) saddex maalmood gudahooda ee shaqada, iyo Adeegga Dakhliga Gudaha IRS [Foomka W-4](#).

- Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad ka warbixiso shaqaale kasta oo dhawaan la shaqaaleysiyyay iyo kuwa dib loo shaqaaleysiyyay iyada oo loo sii marayo Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka, Qaybta Taageerada Ilmaha ee [Barnaamijka Ka Warbinta Shaqaalaysiinta Cusub](#) 20 maalmood gudahooda ee shaqlaysiinta. Ka warbixintu waa aay sahan tahay waxaana lagu samayn karaa onlayn iyada oo loo marayo marin shabakadeed oo sugaran, [Isticmaalka sugar ee Washington \(Secure Access Washington, SAW\)](#) iyadoo la isticmaalayo Qaybta Taageerada Ilmaha ee Adeegyada khadka tooska ah (DCSOnline). Haddii aanad hore u lahayn akoonka SAW, waxaad u baahan doontaa inaad saxiixdo oo aad ku darto adeega khadka tooska ah ee DCS. Si aad u soo gudbiso warbixin cusub oo shaqaaleysiin ah, baahida loo-shaqeeyaha si ay u bixiso magacooda, ciwaankooda iyo Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Federaalka (Federal Employer Identification Number, FEIN). Waxay sidoo kale u baahan doonaan maclummaadka laga helo Foomka W-4 ee shaqaalaha, oo ay ku jiraan magacooda, ciwaankooda iyo Lambarka Amaanka bulshada (SSN), oo lagu daray taariikhda shaqaalaynta shaqaalaha iyo taariikhda dhalashada. Kala xidhiidh **Kooxda Xiriirka Loo-shaqeeyaha ee DCS** lambarka ah **800-562-0479** haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabto.
- Shaqadu waa meel ay ka jirtaan nidaamyo badan, oo ay ku jiraan mushaharka ugu yar ee la bixiyo, mushaharka shaqada wakhtiyada dheeraadka ah, fasaxa iyo faa'iidooyinka, hoyga uurka, shaqaalaynta carruurta aan qaan-gaarintu iyo xubnaha qoyska, badbaadada goobta shaqada, iwm.
- Isticmaalka qandaraaslayaasha madax-bannaan waa wax marar badan dadka aaysan aad u fahmin karin. Haddii aanu qofku si dhab ah ugu ganacsanayn naftiisa ama nafteeda, uu ruqsad haysto, oo uu fayl garaynaayo cashuuraha federaalka iyo gobolka ganacsi ahaan, oo uu si firfircooni uga ganacsanaayo suuqa, oo uu leeyahay macaamishal\macaamiil badan, oo uu qabanayo shaqo ka baxsan hawlahaaaga ganacsi ee caadiga ah, fursadaha waa sharciyada gobolka iyo federaalku waxay u baahan doonaan in qofka loola dhaqmo sidii shaqaale.
- Shaqaalaysigu sidoo kale waa meel diiwaangalin muhiim ah iyo masuuliyadaha cashuuraha. Waa muhiim inaad fahanto sharciyadaas iyo kharashyada markaad qorsheynayso oo aad ka shaqaaynaayso ganacsigaaga.

## **Sharciga Shaqada**

- [Mushaharka iyo Sharciyada saacadaha \(sida mushaharka ugu yar ee shaqada lagu bixiyo, saacadaha dheeraadka ah, nasashada, iwm.\)](#)
- [Shuruudaha boodhka ee goobta shaqada](#)
- [Shaqaalaysiinta carruurta yaryar](#)
- [Sharciyada takoor la'aanta](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(Shaqada & ganacsiga\)](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(Ammaanka Shaqada\)](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(IRS\)](#)
- [Badbaadada goobta shaqada \(oo ay ku jiraan barnaamijka ka hortagga shilalka ee qoran ee loo baahan yahay\)](#)
- [Canshuurta mushaar bixinta federaalka](#)
- [Sharciyada Haynta Masruufka Ilmaha](#)
- Xakamaynta [heshiisyada aan tartanka ahayn](#), [taariikhda mushaharka](#), iyo [sirta mushaharka](#)
- [Shaqaalaha aanan badalka haysanin ee kaligiisa shaqeeya](#)
- [Isbeddelka Xeerarka Wakhtiga Dheeriga ah](#)
- [Sharciga Fursada & Sinaanta Mushaharka](#)

## **Faa'iidooyinka Shaqaalaha**

- [Canshuurta shaqo la'aanta ee gobolka](#)
- [Caymiska magdhowga shaqaalaha](#)
- [Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington](#)
- [Washington Healthplanfinder](#)
- [Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalaha](#)
- [Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad](#)
- [Noocyada kale ee Fasaxa](#)
- [Ka hawl gabka goobta shaqada](#)

Ogow: Haddii aad shaqaale ku leedahay Seattle, Tacoma ama SeaTac, ka hubi magaaladaada mushaharka ugu yar iyo shuruudaha kale ee shaqada.

## **11. Albaabadaada fur**

Hambalyo - nasiib wacan!

## 12. Ma u baahan tahay gargaar?

Xiriirka Ganacsiga Yaryar ee Gobolka Washington ayaa kaa caawin kara inaad hesho macluumaadka iyo khayraadka aad u baahan tahay. Sidoo kale, naga caawi horumarinta Hagaha Ganacsiga Yaryar adiga oo buuxinaya sahan ama xog uruurin gaaban oo qarsoodi ah.

Mareegta Ganacsiga ee Bilawga sidoo kale waxay leedahay khayraad aad u fiican, oo ay ku jiraan qdobada, caawimaada farsamo iyo qaybo gaar ah oo haweenku leeyihiiin iyo ganacsiyada ay leeyihiiin mujaahidiinta.

**MUSHAAR BIXINTA**



**Ganacsigaaga**



# MUSHAAR BIXINTA Ganacsigaaga

## 1. Waa maxay mushaar bixinta?

"Mushaar-bixinta" waxaa loola jeedaa lacagaha la siiyo shaqaalah, halkaasoo lacagahaas looga baahan yahay in lagu wargeliyo hay'adaha gobolka iyo federaalka, sida IRS, Maamulka Amniga Bulshada, Waaxda Ammaanka Shaqada ee Washington, iyo Waaxda Shaqada & ganacsiga ee Washington.

## 2. Ma u baahanahay mushahar-bixin?

Shakhsiyadka intooda badan aad shaqaalaysiisay waxa loo arkaa "shaqaale" sharci ahaan. Waxaa kamid ah:

- Shaqaale ku meel gaadh ah
  - Haddii aan laga shaqaaleyn shirkad adeegyo ku meel gaar ah oo shaqaaluhu ku jiro liiska mushahar bixinta
- "Shaqaalah mudada kooban" iyo qaar badan oo "1099 shaqaale ah"
- Saaxiibada, qaraabada, iyo kuwa kale ee helaaya wax kasta oo qiimo lacageed leh oo ay ku beddelanayaan shaqadooda
- Qandaraaslayaasha madax-bannaan
  - Qandaraaslayaasha madaxbannaan waa inay buuxiyaan shuruudo gaar ah si loogu tixgeliyo kuwa laga dhaafay shariyada shaqada.
  - Waxaa jira shariyo dhown ah oo qeexaya qandaraaslayaasha madax-bannaan, mid walbana wuxuu leeyahay shuruudo kala duwan.
  - Ma qaadan kartid qof buuxiya shuruudaha qandaraaslahaa madaxa banaan oo laga dhaafay hal sharci oo shaqo ah sidaas darteed waa ka dhaaftay shariyo kale.
  - Culaysku adigaa saaran si aad u caddayso in qofka ku shaqeeya aanu ahayn shaqaale ama shaqaale uu xaq u leeyahay shaqo la'aanta ama caymiska magdhawga shaqaalah.
  - Shariyada qandaraasleyaasha ee madaxa banaan ee saameeya mas'uuliyadaha canshuurta mushaar bixinta
    - Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka  
Si loo go'aamiyo haddii aad leedahay mas'uuliyadaha Lambarka Amaanka Bulshada iyo canshuurta Medicare, canshuur celinta dakhliga, canshuuraha shaqo la'aanta federaalka, iyo warbixinta W-2



- [Shaqada & ganacsiga](#)  
Si loo go'aamiyo haddii aad leedahay mas'uuliyadaha bixinta caymiska magdhowga shaqaalahaa
- [Ammaanka Shaqada](#)  
Si loo go'aamiyo haddii aad leedahay mas'uuliyadaha canshuuraha shaqo la'aanta ee gobolka
- [Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad](#)  
Si loo go'aamiyo haddii aad leedahay mas'uuliyado ka qaybqaadashada barnaamijka
- [Deeqda WA Cares](#)  
Si loo go'aamiyo haddii aad u qalanto dheefaha eeg shuruudaha wax ku biirinta.

### 3. Laftayda ma maamuli karaa liiska mushahar bixinta, mise waxaan u baahanahay khabiir?

- Xisaabinta mushahar bixinta iyo cashuuraha la xidhiidha maaha mid adag; si kastaba ha ahaatee, diiwaan gelinta, fayl garaynta ama xereynta iyo mas'uuliyadaha lacag-bixinta ayaa muhiim ah.
- Barashada dhammaan waxaad u baahan tahay inaad ogaato, la socoshada isbeddellada, iyo qaadashada wakhtiga lagama maarmaanka ah si aad u buuxiso shuruudahaaga waa wakhtiga aanad ku bixinayn dhismaha ganacsigaaga.
- Haddii ganacsigu uu shaqaaleysiyo hal qof horaantii sanadka, waxaa jiri doona 18 foomam oo la buuxinayo sanadkaas, oo lagu daray mas'uuliyadda sharciga ah ee abuurista iyo ilaalinta shaqada iyo diiwaannada mushaar bixinta. Taasi waa wax badan in lala socdo!
- Sababtoo ah dhammaan shuruudaha iyo waqtiga ku lugta leh, manacsiyo badan ayaa qandaraas la gala kaydiyaasha diiwaanada xisaabta, xisaabiyeaal ama adeegyada mushahar bixinta si ay u maareeyaan nidaamka oo ay uga baahan yihiin warbixintooda.
- Fadlan ha illoobin inaad si dhow ula shaqeyso xirfadlayaashaada mushaar bixinta sababtoo ah milkiilayaasha ganacsiga ayaa dhab ahaanti mas'uul ka ah saxnaanta, dhameystirka iyo waqtiga xisaabinta mushaar bixinta iyo canshuuraha la xiriira.

#### 4. Waa maxay warbixinta mushahar bixinta iyo masuuliyadaha cashuuraha ee loo-shaqeeyayaashu ay leeyihiin?

Inta badan masuuliyadaha waxaa lagu soo koobay jaantuusyada Sharaxaad faahfaahsan lasoco jaantuusyada

Shuruudaha: (Si aad u ficileeyso wakhtiga)	Ujeeda:	Ficilka	Wakaalada
<b><u>Foomka W-4</u></b> <b>(Shaqaaluhu buuxiyey ka hor mushahar bixinta ugu horreeya; foomamka cusub ayaa la buuxin karaa wakhti kasta)</b>	Loo baahan yahay macluumaadka shaqaalaha iyo si loo go'aamiyo haynta cashuurta dakhliga federaalka	Fayl garaynta sii wad	Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka
<b><u>I-9 (Waxaa buuxiyay labada shaqaale iyo loo shaqeeyah 3 maalmood gudahooda ee shaqada)</u></b>	Loo baahan yahay si loo bixiyo caddaynta u-qalmitaanka shaqaalaha inuu ka shaqeyyo U.S.	Fayl garaynta sii wad	Waaxda Amniga Gudaha ee Mareykanka
<b><u>Foomka Ogeysiinta Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalaha ee Shaqaalaha (waxaa buuxiya shaqaalaha iyo loo shaqeeyah marka la shaqaalaysiinayo)</u></b>	Loo baahan yahay in la bixiyo ogaysiis ku saabsan xaqaa uu shaqaaluhu u leeyahay Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalaha	Sii koobi ama nugul shaqaalaha oo koobi kalana ku kaydso faylka	Waaxda Shaqada & ganacsiga WA



Shuruudaha: (Si aad u ficileeyso wakhtiga)	Ujeeda:	Ficilka	Wakaalada
<b><u>Warbixinta shaqaalaynta Cusub</u></b> <b>(oo uu buuxiyo loo-shaqeeyaha 20 maalmood gudahooda laga bilaabo shaqaalaynta ama dib u shaqaalaynta)</b>	Wakaaladu waxay go'aamisaa haddii shaqaaluhu uu haysto kiis masruuf ilmo waxayna sidoo kale la wadaagtaa macluumaadka kirada cusub ee Ammaanka Shaqada iyo Shaqada & ganacsiga	<a href="#">onlayn</a> , fakis u dir DSHS (800-782-0624) ama wac DSHS (800-562-0479)	WA. Waaxda Adeegyada Bulshada & Caafimaadka
<b><u>Nidaamka Bixinta Canshuurta Federaalka ee Elektarooniga ah ee IRS (Electronic Federal Tax Payment System, EFTPS)</u></b>	Waxa aad u baahan tahay xisaab si aad u bixiso cashuuraha dawladda dhexe.	Waxaad hagaajisaa akoon	Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka
<b><u>Foomka IRS 941 - Soo celinta Canshuurta Federaalka ee Saddex-biloodlaha ah ee Loo-shaqeeyaha (1 rubuc kalandar kasta shaqaale kasta)</u></b>	Ka warbixi dakhliga shaqaalaha, loo shaqeeyaha iyo cashuuraha Lambarka Amaanka Bulshada iyo canshuurta Medicare, iyo canshuurta dakhliga ee uu bixiyo shaqaalaha.	Foomamka sadddexdii biloodba mar ugu dir IRS boostada (wakhtiga kama dambaysta ah 4/30, 7/31, 10/31, 1/31). U dir lacag-bixinta adoo isticmaalaya nidaamka khadka tooska ah ee IRS EFTPS	Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka
<b><u>Warbixinta lacagta magdhowga shaqaalaha (1 rubuc kalandar kasta shaqaale kasta)</u></b>	Caymiska magdhowga shaqaalaha ee kharashka caafimaadka iyo beddelka mushaharka haddii uu ku dhaawacmo shaqada.	Buuxi oo ku bixi lacagta qaab <a href="#">onlayn</a> ah oo ah <a href="http://www.lni.wa.gov">www.lni.wa.gov</a> (wakhtiga kama dambaysta ah 4/30, 7/31, 10/31, 1/31)	Waaxda Shaqada & ganacsiga WA

Shuruudaha: (Si aad u ficileeyso wakhtiga)	Ujeeda:	Ficilka	Wakaalada
<b>Warbixinta canshuurta shaqala'aanta ee gobolka</b> (1 rubuc kalandar kasta shaqaale kasta)	Dheefta shaqo la'aanta ee shaqaalayaasha waayay shaqadooda.	Buuxi oo ku bixi lacagta qaab onlayn ah oo ah <a href="http://esd.wa.gov">esd.wa.gov</a> (wakhtiga kama dambaysta ah 4/30, 7/31, 10/31, 1/31)	Waaxda Ammaanka Shaqada ee WA
<b>Warbixinta <u>Fasaxa</u> <u>musharka la bixiyo</u> <u>ee loo qaato sababa</u> <u>la xiriira daryeel</u> <u>qoys iyo sababa</u> <u>caafimahad</u></b>	Fasaxa mushaharka leh ee shaqaalaha si ay u daryeelaan naftooda ama qoyskooda	Buuxi oo ku bixi lacagta qaab onlayn ah oo ah <a href="http://paidleave.wa.gov">paidleave.wa.gov</a> (wakhtiga kama dambaysta ah 4/30, 7/31, 10/31, 1/31)	Waaxda Ammaanka Shaqada ee WA
<b>Foomka IRS 940 - Soo Celinta Canshuurta Shaqo La'aanta ee Federaalka ee Sannadlaha ah</b>	Waxay bixisaa kharashka maamulka barnaamijka caymiska shaqo la'aanta qaranka	Ku dir Foomka boostada IRS oo ku samee lacag bixinta adoo isticmaalaya nidaamka khadka tooska ah ama onlatnka ah ee IRS 1/31 sannadkii hore	Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka
<b>Foomka IRS W-2 - Bayaanka Mushaharka iyo Cashuurta ee shaqaale kasta sannad kalandarka</b>	Shaqaaluhu waxay u baahan yihiin foomka si ay u xareeyaan ama u fayl gareeyaan cashuurta dakhliga federaalka. IRS iyo Maamulka Amaanka Bulshada waxay u baahan yihiin diwaangelin.	Sii saddex koobi ama nugul shaqaale kasta 1/31 sanadka soo socda. Wuxaad u dirta nuqulka asalka ah oo wata W-3 Maamulka Amaanka Bulshada 2/28	Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka iyo Maamulka Amaanka Bulshada



Shuruudaha: (Si aad u ficileeyso wakhtiga)	Ujeeda:	Ficilka	Wakaalada
<b><u>Foomka IRS W-3,</u></b> <b>Gudbinta</b> <b>Warqadaha</b> <b>Mushaharka iyo</b> <b>Cashuurta</b> <b>(Foomamka W-2).</b>	Maamulka Amaanka Bulshada waxay u baahan yihiiin diiwaangelin. IRS waxay u baahan tahay dib u heshiisiin foomamka 940 & 941.	U dir foomamka W-2 Maamulka Lambarka Bulshada 2/28 ee sanadka soo socda.	Adeegga Dakhliga Gudaha ee Maraykanka iyo Maamulka Amaanka Bulshada

### Canshuuraha dakhliga federaalka – Shaqaalaha mushaarka la siiyay

- Loo-shaqeeyayaashu waxay ka jaraan cashuurta dakhliga jeegaga mushaharka shaqaalaha.
  - Qadarka haynta waxay ku salaysan tahay wadarta guud ee shaqaale kasta iyo IRS ee ugu dambeeyay Foomkii W-4 ee shaqaaluhu buuxiyay.
  - Qadarka lagu hayo, eeg tables-ka cashuuraha ee daabacaadda IRS 15 – Hagaha Canshuuraha Loo-shaqeeyaha.
- U dir qaddarka laga hayo IRS si elektaroonik ah adoo isticmaalaya EFTPS (Nidaamka Bixinta Canshuurta Federaalka ee Elektarooniga ah) wakhtiga ku habboon (sida caadiga ah saddexdii biloodba mar ama bishiiba ganacsiyada yaryar, taas oo ku xidhan wadarta cashuuraha)
- Ku dar macluumaadka ku saabsan haynta shaqaalaha ee Foomka IRS 941 – Soo celinta Canshuurta Federaalka ee Saddex-biloodlaha ah ee Loo-shaqeeyaha. Foomka 941 taariikhda ku habboon:
  - Rubuca 1-aad - Abriil 30
  - Rubuca 2aad - Luulyo 31
  - Rubuca 3aad - Oktoobar 31
  - Rubuca 4-aad - Janaayo 31 ee sanadka soo socda

OGOW: IRS waxay ku dhiirigelinaysaa qof walba inuu isticmaalo haynta aalada ee wax lagu xisaabiyo si uu u sameeyo "baaritaan mushahar-bixineed" degdeg ah. Aalada ee wax lagu xisaabiyo wuxuu ka caawiyaa shaqaalaha inay hubiyaan inay haystaan cadadka canshuurta saxda ah ee laga jaray jeeggooda shaqada waxayna ka caawiyaa inay go'aamiyaan inay u baahan yihiiin inay siiyaan loo shaqeeyahooda Foom cusub W-4, Shahaadada Gunnada Ka-goynta Shaqaalaha.

## **Amniga Bulshada ee Federaalka iyo cashuuraha Medicare – loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha mishaarka oo la siiyay**

- Ka jooji 7.65% wadarta guud ee mushaharka shaqaalaha iyo gunnada kale ee jeegaga mushaharka shaqaalaha (Isticmaal tirada guud ee mushahar bixinta sida loo isticmaalo go'aaminta haynta cashuurta dakhliga)
  - 6.2% ee Amaanka Bulshada
  - 1.45% oo loogu tala galay Medicare
- Qaybta loo-shaqeeyaha waxay u dhigantaa qaddarka laga jaray shaqaalaha.
- Loo shaqeeyuhu wuxuu ku bixiyaa saamiga shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha labadaba IRS.
- U dir labadaba cashuurta shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha IRS si elektaroonig ah adoo isticmaalaya [EFTPS](#) (Nidaamka Lacag-bixinta Cashuuraha Federaalka ee Elektarooniga ah) wakhtiga ku habboon (sida caadiga ah saddexdii biloodba mar ama bishiiba ganacsiyada yaryar, iyadoo ku xidhan wadarta cashuuraha)
- Ku dar macluumaadka ku saabsan Caymiska Amaanka Bulshada iyo Canshuuraha Medicare ee ku jira IRS [foomka 941](#) – Soo celinta Canshuurta Federaalka ee Saddex-biloodlaha ah ee Loo-shaqeeyaha. Foomka 941 taariikhda ku habboon:
  - Rubuca <sup>1-aad</sup> – Abriil 30
  - Rubuca <sup>2aad</sup> – Luulyo 31
  - Rubuca <sup>3aad</sup> – Oktoobar 31
  - Rubuca <sup>4-aad</sup> – Janaayo 31 ee sanadka soo socda

## **Canshuurta Shaqo La'aanta ee Federaalka (Federal Unemployment Taxes, FUTA) – shaqaalaha mishaarka oo la siiyay**

- Xisaabi cashuurta ku salaysan wadarta guud ee mushaharka shaqaalaha iyo magdhawga kale.
- FUTA waxa la bixiyaa ilaa mushaharka shaqaalaha iyo magdhawga kale aay ka gaaraan ilaa \$7000 sanadka kalandarka.
- Haddii shaqaaluhu uu kasbado wax ka badan \$7000 sanadka kalandarka, ma jirto wax FUTA ah oo la bixinayo sanadkaas.
- U dir lacagaha cashuurta IRS si elektaroonik ah adoo isticmaalaya [EFTPS](#) (Nidaamka Bixinta Cashuuraha Federalka ee Elektarooniga ah) wakhtiga ku habboon (sida caadiga ah rubucii ama sannadlaha ganacsiga yaryar, iyadoo ku xidhan mushahar bixinta).



- Buuxi [Foomka IRS 940](#) –Dhammaadka sanadka kalandarka dhamaystirka Soo Celinta Canshuurta Shaqo La'aanta ee Federalka ee Loo-shaqeeyaha oo soo gudbi Janaayo 31 ee sanadka soo socda.

### **Bayaanka Mushaharka Federaalka iyo Cashuurta (Foomka W-2) Gudbinta (Foomka W-3)**

- Ilaa Janaayo 31, sii shaqaale kasta nuqlada foomkooda W-2 taas oo koobaaya dakhliga qofka shaqaalaha iyo haysashada dawladda federaalka ee sannadkii kahoreeyey.
- Buuxi [Foomka W-3](#) – Gudbinta Mushaharka iyo Bayaanada Cashuurta, kaas oo soo koobaya dhammaan foomamka W-2 ee uu bixiyo loo shaqeeyaha.
- Marka la gaaro taariikhda ugu dambeysa ee Febraayo, u soo dir Foomka W-3 iyo dhammaan foomamka W-2 asalka ah ee sanadka ka horeeya Maamulka Amaanka Bulshada.

### **Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad – Mushaharka shaqaalaha iyo loo shaqeeyayha oo la bixiyay**

- [Xisaabi](#) khidmadahaaga adoo isticmaalaya qorshaha gobolka.
- Loo-shaqeeyayaashu waxa laga yaabaa inay ka celiyaan khidmadaha shaqaalaha jeeggooda ama waxay bixiyaan qayb ama dhammaan khidmadaha iyagoo matalaya shaqaalaha.
- Loo-shaqeeyayaashu ma qaadi karaan khidmadaha seegay xilliyada mushaharka dambe.
- Khidmadaha waxaa lagu xisaabiyyaa iyadoo lagu salaynayo mushaharka guud ee shaqaalaha.
- Khidmadaha caymiska waxa ay wadaagaan shaqaalaha iyo inta badan loo shaqeeyayaasha.
- Khidmadaha waxa lagu koobaa Saldhigga Mushaharka Amaanka Bulshada.
- Ka sameeyso koonto leh lambarka ganacsiga aqoonsiga Ganacsiga Midaysan (Unified Business Identifier, UBI), magaca ganacsiga iyo macluumaadka xiriirka.
- Loo-shaqeeyayaashu waxay ka warbixin karaan ayaga oo isticmaalaya [xaraynta buug-gacmeedka](#), [xaraynta halka fayl](#) ama waxay leeyihiiin wakiilkha loo shaqeeyayha oo isticmaalo faylka [ICESA](#).
- Buuxi warbixinnaada [saddexdii biloodlaha ah oo ku bixi qaab onlayn ah](#).
- Taariikhaha kama dambaysta ah
  - Rubuca 1-aad - Abriil 30

- Rubuca 2aad - Luulyo 31
- Rubuca 3aad - Oktoobar 31
- Rubuca 4-aad- Janaayo 31 ee sanadka soo socda
- Loo-shaqeeyayaashu waxay raaci karaan [gorshe tabaruc ah](#) oo la ansixiyay ama waxay isticmaali karaan qorshaha gobolka. Xisaabinta qiimaha jaban way ka duwanaan kartaa haddii la isticmaalo qorshe ikhtiyaari ah.

### **Canshuurta Shaqo La'aanta ee gobolka (State Unemployment Taxes, SUTA) –**

#### **shaqaalaha mishaarka oo la siiyay**

- Isticmaal heerka cashuurta ee ay ku siiso Waaxda Ammaanka Shaqada Washington.
- SUTA waxaa laga bixiyaa mushahar iyo magdhow kale, ilaa ugu badnaan qofkiiba shaqaale ah inta lagu guda jiro sanad kasta ("Aasaaska mushaharka la canshuuri karo" waa \$67,600 sanadka 2023).
- Haddii shaqaaluhu uu kasbado wax ka badan aasaaska mushaharka la canshuuri karo, ma jirto wax canshuur ah oo la bixinayo sanadkaas.
- Buuxi warbixinnda [saddexdii biloodlaha ah oo ku bixi qaab onlayn ah](#).
- Taariikhaha kama dambaysta ah
  - Rubuca 1-aad - Abriil 30
  - Rubuca 2aad - Luulyo 31
  - Rubuca 3aad - Oktoobar 31
  - Rubuca 4-aad- Janaayo 31 ee sanadka soo socda

### **Khidmada caymiska magdhawga shaqaalaha gobolka – Mishaarka shaqaalaha**

#### **oyo loo shaqeeyayha oo la bixiyay**

- Isticmaal qiimaha ama qiimayaasha ay ku siisay Waaxda Shaqada & ganacsiga ee Washington (L&I).
- Inta badan, qiimayaasha saacadiiba waa la shaqeeyaa, waxayna ku salaysan yihiin qaybahaa halista sida ay L&I u qoondaysay nooca ganacsigaaga.
- Xisaabi khidmadaha adiga oo ku dhufanaya saacadaha shaqaalaha, sida lagu soo warramey xaashiyaha wakhtiga, qiyasta heerka khatarta ku habboon ee L&I u qoondaysay.
- Ha ku darin wakhtiga fasaxa, fasaxa jirada ama saacadaha fasaxa xisaabinta khidmadaha.
- Loo-shaqeeyayaashu waxay dooran karaan inay soo sheegaan saacadaha shaqaalaha mushaharka ah 160 saacadood bishii, ama 480 saacadood rubuciiba.

Haddii loo-shaqeeyayaashu doortaan doorashadan, dhammaan shaqaalaha mushaharka qaata waa in si isku mid ah loo maareeyaa, iyo waraaqaha wakhtiga ee shaqaalahaas looma baahna. (Haddii aad ku jirto warshadaha xamuulka, fadlan la xiriir L&I si aad u hesho tilmaamo gaar ah.)

- Hayso qaybta shaqaalaha ee la ogolyahay (oo ay bixiso L&I) laga soo bilaabo jeegaga mushaharka shaqaalahaaga.
- Buuxi warbixinnda [saddexdii biloodlaha ah oo ku bixi qaab onlayn ah](#).
- Taariikhaha kama dambaysta ah
  - Rubuca 1-aad - Abriil 30
  - Rubuca 2aad - Luulyo 31
  - Rubuca 3aad - Oktoobar 31
  - Rubuca 4-aad- Janaayo 31 ee sanadka soo socda

#### **Maalgelinta Daryeelka Washington - Mushaarka loo shaqeeyaha ee la bixiyay**

- Laga bilaabo Luulyo 1, 2023, waxa aad shaqaalahaaga ka qaadan doontaa khidmadaha si la mid ah sida aad hadda u qaadato Fasaxa Lacagta ah.
- Haddii aad iskaa u shaqeysid, waxaad dooran kartaa inaad doorato.
- Xisaabi wadarta qaddarka khidmada caymiska ee mid kasta oo ka mid ah shaqaalahaaga. Kharashka 2023 waa 0.58 boqolkiiiba mushaharka guud ee shaqaalaha, Sidaas darteed: Mushaharka Guud x 0.0058 = khidmadaha shaqaalaha. [Aalada xisaabiyaha ah ee khidmada](#).
- Shaqaaluhu waxay dooran karaan inay codsadaan ka-dhaafitaanka Maalgelinta Daryeelka WA. Waa mas'uuliyadda shaqaalaha inuu codsado iyo haddii la oggolaado – inuu ku ogeysiyo oo uu ku siyo nuqlu ka mid ah warqadda oggolaanshaha Waaxda Amniga Shaqada (Employment Security Department, ESD).
- Qaybaha kale ee ka-dhaafitaanka ayaa shuruud ku ah shaqaaluhu inuu sii wado buuxinta shuruudaha ka-dhaafitaanka. Waa mas'uuliyadda shaqaalaha in ay ogeysiiso loo-shaqeeyaha wixii isbeddel ah ee ku yimaadda heerka ka-dhaafitaanka iyo ku guul-darrida in ay sidaas sameeyaan waxay keeni kartaa dib-u-bixinta khidmadaha iyo ganaaxyada dheeraadka ah.
- Loo-shaqeeyayaashu waa inay ku hayaan nuqlu ka mid ah warqadda oggolaanshaha shaqaalaha oo ay ku jiraan faylka, oo aan laga jarin khidmadaha daryeelka WA shaqaalaha laga dhaafay. [Halkan ka akhri wax badan oo arrintaas ku saabsan](#).



### **Ma leedahay shaqaale fadhligoodu ama saldhigoodu yahay Gobolka Washington?**

- Raac isla shuruudaha federaalka
- Baro oo raac shuruudaha gobol kasta oo aad ku leedahay shaqaale.

## **5. Waa maxay diiwaannada mushaar bixinta ee aan u baahanahay si aan u sameeyo oo aan u hayo?**

- Diiwaanada mushaar bixinta waa lama huraan oo waa muhiim. Hay'ado badan oo dawladeed ayaa xaq u leh inay eegaan oo ay xisaabiyaan diiwaanka mushahar bixinta. Maqnaanshaha diiwaanka, wakaaladu waxay awood u leeyihin inay qiyaasaan cashuuraha ku waajibay, iyo inay qiimeeyaan ganaaxyada ku guuldaraysiga diiwaangalinta.
- Diiwaanada mushahar bixinta waa in la hayaa oo la xajiyaa si aaysan u lumin. Wakaaladaha kala duwani waxay leeyihin shuruudo haynta oo kala duwan laakiin 6 sano ayaa ku filan.
- Diiwaanada mushahar bixinta waxaa ka mid ah:
  - Macluumaadka shaqaalah (Magaca, taariikhda shaqaalaysiinta, magaca shaqada iyo waajibaadka, ciwaanka, lambarka amaanka bulshada, taariikhaha beddelka shaqada, taariikhda joojinta shaqada)
  - Foomka W-4 ee shaqaale kasta
  - Qiimaha lacagta ee la bixiyo
  - Waxyaalahaa saldhigga mushaharka ah (saacaddii, bille, komishanka ama dilaalka, gunnada, qayb qiimaha kamid ah, iwm.)
  - Xaashimaha wakhtiga (ay ku jiraan taariikhaha iyo saacadaha la shaqeeyay; oo aay ku jiraan hawlo haddii ay jiraan qaybo halis ah magdhowga shaqaalahama ama mushaharka jira "xajmiga shaqada" khuseeya)
  - Magdhow aan lacag caddaan ah lahayn (Sida Guryaha, Baabuurada, iwm)
  - Xisaabinta mushaarka wakhtiga dheeeraadka ah
  - Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalahaa ee mushaarka leh ee dhurmay ama aruu ray, inta la isticmaalay iyo hadhaaga. Xisaabi wakhtiga jirada ee ururay iyadoo lagu salaynayo saacadaha caadiga ah iyo saacadaha dheeeraadka ah ee la shaqeeyay. Wuxuu ugu yar ee loo baahan yahay waa 1 saac oo fasax jirro ah 40-kii saacadood ee shaqada (ama 0.025 saacadood oo fasax jirro ah oo la kasbaday saacaddii shaqada).
  - Xisaabinta mushahar bixinta guud
  - Cashuur ka celinta qofka shaqalahaa ah



- Waxyaalaha kale ee jarmaaya xiliga mushaar bixinta ee kale ee uu ogolaaday shaqaaluhu (sida caymiska caafimaadka, xubinimada jimicsiga ama jiimka, iyo jarista samafalka)
  - Diiwaanada jeegaga mushahar bixinta
  - Diiwaanka mushaharka shaqaalaha (diiwaanka faahfaahinta mushaharka iyo macluumaadka mushaharka ee shaqaalaha)
  - Bayaanada bangiga
  - Warbixinta cashuuraha iyo lacag bixinta
6. **Waa maxay diiwaannada mushaar bixinta ee aan u baahanahay in aan sameeyo si aan u siiyo shaqaalahayga?**
- Jeeg kasta oo mushahar ah, waxaad u baahan tahay inaad siisid shaqaalaha warqadda caddaynta mushaharka ama jeegga diiwaanka faahfaahinta mushaharka iyo macluumaadka mushaharka ee shaqaalaha, oo ay ku jiraan macluumaadka soo socda
    - Taariikhaha muddada lacag bixinta
    - Asaaska qiimaha mushaarka (Tusaale ahaan aasaaska waxaa ka mid ah saacadle, mushahar, qayb shaqo ah, iwm.)
    - Mushaharka guud
    - Canshuurta laga jarayo kharashaadka kala duwan iyo waxyaalaha kharashayada ah ee laga jaro mushaar bixinta
    - Mushaharka saafiga ah (mushaharka guud oo laga jaray kharashyada jarmaayo)
    - Fasaxa jirada ee mushaarka leh ee dhurmey ama aruuray, inta la isticmaalay and hadhaaga (Ogeysiiska waxaa la bixin karaa si ka duwan diiwaanka faahfaahinta mushaharka iyo macluumaadka mushaharka ee shaqaalaha) Haddii aad leedahay shaqaale ka shaqeeya Seattle, Tacoma fadlan ka hubi shuruudaha deegaanka magaalada)
  - Macluumaadka waxaa lagu bixin karaa si elektaroonig ah haddii shaqaaluhu uu heli karo maalinta lacag bixinta ee la hagaajiyay ama la sameeyay.

Ogow: Haddii aad shaqaale ku leedahay Seattle, Tacoma ama SeaTac, ka hubi magaaladaada mushaharka ugu yar iyo shuruudaha kale ee shaqada.

## 7. Maxaan u baahanahay inaan haysto ka hor intaanan soo saarin jeegaga mushaharka?

- Samee toddobaad shaqo oo 7-maalmood ah oo caadiga ah iyada oo ujeeddooyinka yihiin xisaabinta saacadaha dheeraadka ah.
  - Loo-shaqeeyayaal badan ayaa doorta in aay sacadaha shaqada aay ka dhigtaan Isniinta 12:00 subaxnimo ilaa Axad 11:59 galabnimo.
  - Loo-shaqeeyayaashu ma beddeli karaan toddobaadka shaqada caadiga ah si ay uga fogaadaan bixinta saacadaha dheeraadka ah, laakiin waxay u beddeli karaan sababo ganacsi awgeed haddii ay siiyan shaqaalaha ogeysiis hore.
- Samee waqtiyada lacag bixinta caadiga ah iyo maalmaha lacag bixinta, wax aan ahayn kuwa ka yar ibille loo baxsho.

Tusaalooyinka qaar:

- Toddobaadle:
  - muddada lacag bixinta Isniinta ilaa Axadda*  
--> *maalinta lacag bixinta Arbacada soo socota*

- Labadii toddobaadba mar (labadii toddobaadba):
  - muddada lacag bixinta Isniinta illaa 2<sup>da</sup> Axadda*  
--> *maalinta lacag bixinta Jimcaha soo socda*

- Bishii laba jeer (bishiiba laba jeer):
  - 1<sup>st</sup> Mudada 1<sup>aa</sup>d ee mushaharka 1aad ilaa 15<sup>ka</sup> bisha*  
->*maalinta 25<sup>aad</sup>*
  - 2 aad ee mushahar bixinta 16<sup>aad</sup> ilaa dhamaadka bisha*  
->*maalinta bixinta 10<sup>ka</sup> bisha xigta*

- Mushaarka
  - bisha 25<sup>ka</sup> bisha ilaa 24<sup>ka</sup> bisha soo socota*  
-->*maalinta la bixiyo 1<sup>da</sup> bisha xigta*
- Samee aasaaska mushaharka
  - Saacadlaah ah: Lacag go'an oo la bixiyay saacad kasta oo la shaqeeyay
  - Mushaarka qaato: Waxaa la bixiya mushaar cayiman oo lagu bixiyo wakhti cayiman
    - Mushaharka lagu saleeyo mushaharka macnaheedu maaha in shaqaaluhu aanu qaadan mushaharka saacadaha dheeraadka ah marka ay saacadahoodu ka badan yihiin 40 usbuuca shaqada. Hoos ka eeg "xisaabinta saacadaha dheeraadka ah"



- Haddii la bixiyo laba jeer bishii ama bishiiba, xisaabinta saacadaha dheeraadka ah ayaa laga yaabaa inay u baahato inaad eegto mushaar bixinti hore ee hore si loo go'aamiyo haddii saacadaha shaqaalaha ay dhaafeen 40 usbuuc shaqo gudaheed.
- Qayb shaqo: Waxaa la bixiyay qaddar go'an oo loogu talagalay shay kasta oo la soo saaray ama adeegga la bixiyay
- Komishanka ama Dilaalka: La bixiyay boqolkiiba qayb kamid ah iibka la sameeyay ama faa'iidata
- Shaqada qaabka onlaynka ah: waxaa mushaarka lagu siiya in ka badan hal nooc

## 8. Maxaa kale oo aan u baahanahay inaan ka ogaado mushahar siinta shaqaalaha?

- Sii faahfaahintan shaqaalahaaga maalin kasta oo lacag bixin ah si aad u muujiso sida aad u xisaabisay jeeggooda mushaharka:
  - Mushaharka guud
  - Cashuuraha laga reebay
  - Waxyaalaha kale ee jarmaaya xiliga mushaar bixinta
  - [Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalaha ee mushaarka leh ee dhurmay ama aruuray, inta la isticmaalay iyo hadhaaga.](#)
- Akhri waaxda Shaqada & ganacsiga [Shuruudaha Mushaharka](#) Wershadaha bogga shabakadda si aad u fahamto shuruudaha mushaar bixinta loo shaqeeyaha.
- [Shaqaale u qalma saacadaha dheeraadka ah](#) iyo shaqaalaha laga reebay saacadaha dheeraadka ah:
  - Shaqaalaha badankoodu waxay xaq u leeyihii inay helaan mushaharka saacadaha dheeraadka ah ee saacadaha ay shaqeeyaan in ka badan 40 toddobaad gudihii, oo ah 1½ jeer qiimaha mushaharkooda caadiga ah.
  - Si loo go'aamiyo qaddarka mushaharka saacadaha dheeraadka ah ee shaqaalaha la bixiyo saacaddii
    - Qaado tirada saacadaha uu shaqaaluhu shaqeeyay in ka badan 40.
    - Kadibna ku dhufo lambarkaas saacadii shaqaalaha
    - Ku dhufo natijjada 1.5.
  - Si loo go'aamiyo qadarka mushaharka saacadaha dheeraadka ah ee shaqaaluhu ay bixiyen laba ama in ka badan saacadii, mushahar caadi ah,



- ama qayb qiimaha ah, akhri Xisaabinta saacadaha dheeraadka ah, ee ka socota Waaxda Shaqada & ganacsiga.
- Sharchiyada federaalka iyo gobolka ayaa kaa doonaya inaad bixiso mushaarka saacadaha dheeraadka ah. Shaqaalaha u qalma saacadaha dheeraadka ah ma dooran karaan inay helaan fasax kaas oo beddel u ah wakhtigi dheeraa ee aay shaqeeyeen.
  - Kordhinta mushaharka saacadaha dheeraadka ah waxay saameyn doontaa xisaabinta canshuurta mushahar bixinta.
  - Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg Waaxda Shaqada & ganacsiga qaybta Fahamka shaqada wakhtiga dheeraadka ah bogga shabakadda.
  - Loo-shaqeeyayaashu maaha inay bixiyaan saacadaha dheeraadka ah ee maareeyayaasha qaarkood, maamulayaasha iyo xirfadlayaasha muhiimka u ah go'aan qaadashada, wakiilada iibka ee ka shaqeeya dibada, qaar ka mid ah ayaa daryeelayaasha ku nool, shaqaalaha beeraha qaarkood, iyo noocyoo kale oo shaqaale ah kamid ah. Kahor intaadan go'aamin in shaqaalaha laga dhaafay saacadaha dheeraadka ah, akhri bogga shabakadda L&I's Shaqooyinka aan mushaarka lahayn wakhtiga dheeraadka ah.
- Lacagaha laga jaray jeegaga mushaharka
    - Eeg L&I's bogga shabakadda Lacagaha laga jaray jeegaga mushaharka

## 9. Sideen ku qiyaasi karaa kharashyada mushaar bixinta?

- Si aad u xisaabiso kharashka Lacagta Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad ee Gobolka Washington, isticmaal xisaabiyyaha Waaxda Ammaanka Shaqada.
  - Loo shaqeeyayaasha:  
<https://paidleave.wa.gov/estimate-your-paid-leave-payments/>
  - Shaqaalaha:  
<https://paidleave.wa.gov/question/how-much-money-will-i-receive/>
- Isticmaal "xisaabiyyaha mushaharka" ee khadka tooska ah si aad u qiyaasto kharashyada mushahar bixinta (Eeg hoos). Waxaa jira laba xisaabiye oo kala duwan, mid loogu talagalay shaqaalaha saacdлаha ah iyo kan kale ee shaqaalaha mushaharka qaata.

- Waxaad u baahan doontaa inaad geliso macluumaadka ku habboon qaybaha ama cells-ka cad. qaybaha ama cells-ka calaamada loo yeelay si otomaatig ah ayey wax u xisaabini doontaa.
- Laga bilaabo Janaayo 1, 2018, loo-shaqeeyayaasha Washington waxaa looga baahan yahay inay shaqaalahooda siiyaan Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalah Xisaabiyaha ma galinaayo xisaabta alaabta oo dhan hal xariijin si loo bixiyo shuruudahan.
- Intaa waxaa dheer mushaharka shaqada yar ama mushaharka iyo saacadaha la shaqeeyay, waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad gasho heerka cashuurta caymiska shaqala'aanta ee gobolka (UI) oo ay bixiso Waaxda Ammaanka Shaqada iyo heerka caymiska magdhawga shaqaalah ee ay bixiso Waaxda Shaqada & ganacsiga.
  - Haddii aadan weli garanaynin qiiamahaaga UI, waxaad u isticmaali kartaa 2% qiyaas macquul ah, ama waxaad la xidhiidhi kartaa Ammaanka Shaqada haddii saxnaanta ay muhiim tahay.
  - Haddii aadan weli garanayn heerka xisaabaadka shaqaalah, waxaad aadi kartaa Qiiamaha & Qaybaha Khatarta oo aad ka heli kartaa heerka dhaqdhaqaqyada ganacsi ee la midka ah, ama wac L&I 360-902-4817 haddii saxnaanta ay muhiim tahay.

PAYROLL CALCULATOR - HOURLY EMPLOYEE

Employer payroll costs (one employee, one pay period)		
1 Hourly wage	\$ per hour	\$ 15
2 Hours at straight time	hours	80
3 Hours at overtime	hours	10
4 Base pay	line 1 x line 2	\$1,200.00
5 Overtime pay	line 1 x 1.5 x line 3	\$225.00
6 Gross payroll*	line 4 + line 5	\$1,425.00
7 Social Security	line 6 x rate	6.2% \$88.35
8 Medicare	line 6 x rate	1.45% \$20.66
9 Federal Unemployment Tax**	line 6 x rate	0.6% \$8.55
10 State Unemployment Insurance Tax***	line 6 x rate	0% \$0.00
11 Employment Administration Fund****	line 6 x rate	0% \$0.00
12 Paid Medical Leave Premium*****	line 6 x rate	0.4% \$5.70
13 Workers' compensation premium*****	lines 2+3 x rate	\$ 0 \$0.00
14 Less employee share of wkr's comp*****	lines 2+3 x rate	\$ 0 \$0.00
15 Employer paid benefits (if any)		\$ 0 \$0.00
<b>16 Total employer cost</b>		<b>\$1,548.26</b>

\*Gross payroll should include value of noncash items, such as apartments and vehicles  
\*\*If state unemployment taxes don't apply (such as in the case of exempt corporate officers), the federal unemployment tax rate is 6% (rather than 0.6%) of the first \$7000 of compensation per year  
\*\*\*UI and EAF tax rates provided to you by Employment Security Dept.  
\*\*\*\*Paid Family and Medical Leave premiums can be split between employer and employee. Employers can withhold up to 63.33% of the total premium. (0.004 \* .6333) Employers with fewer than 50 employees are assessed less and should see [paidleave.wa.gov](#) for more details  
\*\*\*\*\*Employer and employee rates provided to you by Dept. of Labor & Industries

Employee paycheck

Gross payroll	line 6	\$1,425.00
Social Security	line 7	-\$88.35
Medicare	line 8	-\$20.66
Income Taxes	per tax tables	\$ 0 \$0.00
Paid Family Leave Premium Maximum Withholding*	line 12 x rate	63.33% -\$3.61
Workers' comp - employee share	line 14	\$0.00
Other voluntary deductions (if any)		\$ 0 \$0.00
<b>Net paycheck</b>		<b>\$1,312.38</b>

\*Paid Family and Medical Leave employee premiums are capped at 63.33% of the total premium. If an employer chooses to withhold employee portions of the premium, their contribution in the employer portion of this table would be less the employee's amount

PAYROLL CALCULATOR - SALARIED EMPLOYEE

Employer payroll costs (one employee, one pay period)		
1 Salary	\$ per payperiod	\$ 1200
2 Regular hours	hours	80
3 Overtime hours	hours	10
4 Annualized salary		\$ 31200
5 Overtime rate	line 4 / 2080 x 1.5	\$22.50
6 Overtime pay	line 3 x line 5	\$225.00
7 Gross payroll*	line 1 + line 6	\$1,425.00
8 Social Security	line 7 x rate	6.2% \$88.35
9 Medicare	line 7 x rate	1.45% \$20.66
10 Federal Unemployment Tax**	line 7 x rate	0.6% \$8.55
11 State Unemployment Insurance Tax***	line 7 x rate	0% \$0.00
12 Employment Administration Fund****	line 7 x rate	0% \$0.00
13 Paid Medical Leave Premium*****	line 7 x rate	0.4% \$5.70
14 Workers' compensation premium*****	lines 2+3 x rate	\$ 0 \$0.00
15 Less employee share of wkr's comp*****	lines 2+3 x rate	\$ 0 \$0.00
16 Employer paid benefits (if any)		\$ 0 \$0.00
<b>Total employer cost</b>		<b>\$1,548.26</b>

\*Gross payroll should include value of noncash items, such as apartments and vehicles  
\*\*If state unemployment taxes don't apply (such as in the case of exempt corporate officers), the federal unemployment tax rate is 6% (rather than 0.6%) of the first \$7000 of compensation per year  
\*\*\*UI and EAF tax rates provided to you by Employment Security Dept.  
\*\*\*\*Paid Family and Medical Leave premiums can be split between employer and employee. Employers can withhold up to 63.33% of the total premium. (0.004 \* .6333) Employers with fewer than 50 employees are assessed less and should see [paidleave.wa.gov](#) for more details  
\*\*\*\*\*Employer and employee rates provided to you by Dept. of Labor & Industries. For salaried employees, employers can calculate workers' compensation premiums on actual hours (as shown here), or a standard number of hours to total 480 hours per quarter (160 for monthly pay periods, 80 for semimonthly, 74 for biweekly, 37 for weekly).

Employee paycheck

Gross payroll	line 7	\$1,425.00
Social Security	line 8	-\$88.35
Medicare	line 9	-\$20.66
Income Taxes	per tax tables	\$ 0 \$0.00
Paid Family Leave Premium Maximum Withholding*	line 13 x rate	63.33% -\$3.61
Workers' comp - employee share	line 15	\$0.00
Other voluntary deductions (if any)		\$ 0 \$0.00
<b>Net paycheck</b>		<b>\$1,312.38</b>

\*Paid Family and Medical Leave employee premiums are capped at 63.33% of the total premium. If an employer chooses to withhold employee portions of the premium, their contribution in the employer portion of this table would be less the employee's amount

## 10. Waa maxay mas'uuliyadaha kale ee aan leeyahay shaqo-bixiye ahaan?

- Loo-shaqeeyayaashu waxay leeyihiiin masuuliyado badan oo ka baxsan waxa looga baahan yahay mushaar bixinta. Kuwaas waxaa ka mid ah horumarinta iyo hirgelinta barnaamijka [badbaadada shaqaalaha, dhajinta boodhadhka shaqa loo baahan yahay, bixinta waqtiyada nasashada iyo cuntada](#), Oggolaanshaha fasax shaqo yar iyo oggolaansho marka [la shaqaaleysiyo shaqaalaha ka yar 18](#), iyo kuwo kale oo badan. Ka-qaybgalka aqoon-is-weydaarsiyada [Waaxda Shaqada iyo Warshadaha](#) ayaa aad loogu talinaya.
- Sidoo kale waxaa waajib kugu ah inaad u sheegto dhammaan shaqaalaha cusub Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka. Tilmaamaha waxaa laga heli karaa <http://NewHire.wa.gov>.
- Baro wax badan oo ku saabsan mas'uuliyadaha loo-shaqeeyaha kuna baro cutubka ah [KOBCI](#) oo [SO SOCDSII](#) ee [Hagaha Ganacsiga Yaryar ee Washington](#).

## 11. Ma u baahan tahay gargaar?

[Xiriirka Ganacsiga Yaryar](#) ee Gobolka Washington ayaa kaa caawin kara inaad hesho macluumaadka iyo khayraadka aad u baahan tahay. Sidoo kale, naga caawi horumarinta Hagaha Ganacsiga Yaryar adiga oo buuxinaya [sahan ama xog uruurin](#) gaaban oo qarsoodi ah.



# FUR ganacsigaaga

Ma yahay qorshahaaga ganacsigaaga gobolka aad  
ugu sii balaarinaysid oo uu kasii shaqeeyo  
Washington?

Ganacsigaaga ka baxsan gobolka waxay u baahan doonaan inay u hoggaansamaan sharchiyada Washington haddii aad:

- Wuxaad iibsataa ganacsiga Washington
- Ka shaqee ama ka fur goob ganacsi oo furan gudaha Washington.
- Wuxaad sameeysaa qandaraasyada muddada-dheer ama kuwa muuddada - gaaban ee Washington.
- Waaxaad shaqaalaysiisataa shaqaalooyin kuwaas oo kasoo shaqeeyaa gurigooda Washington.
- Wuxaad sameeysataa ganacsi joogta ah oo la canshuri karo (tusaale ahaan. xiriiri la yeelashada shirkadaha kale) ee gudaha Washington.

## 1. Ma wuxaad iibsantaysaa ganacsi jira oo hore u shaqaaynaaye oo ku yaalo Washington?

Haddii aad iibsantayso ganacsi ama xitaa qaar ka mid ah hantida ganacsiga, La soco in laga yaabo inaad si badheedh ah u iibsantayso deymihii hore oo ah cashuuro aan la bixin iyo qiimayn khibradeed. Qaado la talin sharchiyed karti leh ka hor inta aadan iibsantayso, sababtoo ah daymihi hore ma aha inay qayb ka yihiin dukumeentiyada dhaqaale ee caadiga ah.

- Wixii daymaha suurtagalka ah ee la xidhiidha Waaxda Dakhliga, wuxaad qasbiyan ubaahantahay in mulkiilaha inuu ku siiyo [Warqada Xaaladda Cashuur](#) ee ku saabsan cashuur kasta oo ka maqan ganacsigu. Wuxaad sidoo kale u baahan kartaa in aad waaxda dakhliga u bixisaa [canshuurta isticmaalka](#) oo ku saabsan qiimaha hantida la taaban karo ee ku jirta iibsiga, tusaale ahaan qalabka, alaabta guriga, alaabta, iwm. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg Daawacadeena aan ka qornay Mawduucyada Cashuuraha ee cinwaankiisu yahay [libka hantida ganacsiga](#).
- Magdhawga shaqaalah, libsadaha ganacsiga waxa suurtogal ah in uu masuul ka noqdo qiimaynta hanti dhawrka ee lagu leeyahay, qiimaynta la sugayo, iyo sidoo kale in la dhaxlo mas'uuliyadaha sheegashada iyo saamaynta ay ku

yeelanayaan qiimayaasha caymiska mustaqbalka. Iibsadayaasha suurtagalka ah waa inay codsadaan sheegashada iyo diiwaannada badbaadada ee ku taxan daabacaadda [Iibsadaha halista u bareera](#) ee kaa yimaada iibiyaha.

- Caymiska shaqo la'aanta, waxaa laga yaabaa inaad si badheedh ah u iibsanayso deymantii hore waxaana laga yaabaa in lagula xisaabtamo dayn kii ka horeeyey.

## 2. Diiwangelinta ajaanibka (aan Washington ahayn) - Shuraakada iyo Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan

Waa maxay qaabka dhismeedka ganacsiga ee shirkaddaada: ganacsiga aan shirkada lagu ahayn, shuraakada, shirkada ama shirkad xaddidan (LLC)? Haddii shirkada lagu sameeyay meel ka baxsan Washington, xeraynta ama faly garaynta "Diiwaangelinta shirkad shisheeye" ee Washington iyada oo loo sii marayo [Xafiiska Xoghayaha gobolka](#) ayaa caadi ahaan ah tallaabada koowaad.

Ku guuldareysiga inaad diwaangeliso shirkaddaada ka baxsan gobolka ama LLC waxay u horseedi kartaa caqabado sharci waxayna saameyn kartaa awoodaada inaad ku hesho maalgelin ama ku guuleysato qandaraasyo. Waxay sidoo kale u horseedi kartaa mas'uuliyadda mulkiilaha shakhsii ahaaneed ee deymaha. Diiwaangelinta ayaa looga baahan yahay dhammaan qandaraaslayaasha iyo ganacsiyada badan oo ruqsadaaysan iyo shahaadooyinka gaarka ah. Kala hadal lataliyahaaga sharci si aad u fahanto faa'iidooyinka, halista, iyo shuruudaha.

Diiwaangelintu waxay u baahan tahay inaad u magacowdo "[wakiil ka diiwaangashan](#)" Washington, qof fadhiisu yahay Washington amaganaci leh ciwaanka goobeed kaasoo heli doona ogeysiisyada ganacsigaaga rasmiga ah.

## 3. Hel ruqsadaha ama sharciyada iyo ogolaanshaha loo baahan yahay

Ganacsiyada badankoodu waa in ay ruqsad ka haystaan heer gobol iyo heer deegaan, qaar badana waxay u baahan yihiin [shatiyo ama shariyo xirfadeed](#). Waxay u badan tahay inaad u baahan tahay ruqsadooyin meel kasta oo aad ka ganacsanayso; ma aha oo kaliya meesha aad salka ku hayso oo aad markaas ka gacansanayso. Sidoo kale, ganacsiyada qaarkood waxay u baahan yihiin ogolaanshooyin dheeraad ah. Hubi

khidmadaha iyo/ama khidmadaha cusboonaysiinta sannadlaha ah ee la xidhiidha ruqsadaha iyo oggolaanshaha.

Qalabka [ruqsadaaynta ganacsiga](#) ee onlaynka ah waa qalab waxtar badan leh.

U isticmaal si aad u barato ruqsad bixinta iyo shuruudaha oggolaanshaha ee ganacsigaaga gaarka ah. Geli dhaqdhaqaqa ganaci ee aad damacsan tahay in aad ka shaqayso, goobta, iyo macluumaadka kale ee muhiimka ah, oo hel liis onlayn ah oo ruqsadaha gaarka ah iyo ogolaanshooyinka kuwaas oo ay u badan tahay in loo baahdo.

- Markaad xerayso ama aad fayl garayso [Codsiga Ruqsadaynta Ganacsiga Washington](#), u diyaargarow inaad wax ka qabato kuwan soo socda:
  - Macluumaadka guud ee ganacsiga oo aay kujiraan goobta ganacsigu ku yalo iyo lahaanshaha.
  - Qiyaas dulmar ah oo xaqiiq ahayn oo ah dakhligaaga guud ee sanadlaha ah ee la filayo.
  - Haddii aad doonayso inaad shaqaale aad ku shaqaalaysiiso 90 maalmood gudahooda markaad bilawdo.
  - Haddii aad rabto [caymiska magdhawga shaqaalaha ikhtiyaariga ah](#) ee milkiilayaasha ganacsiga. Haddii mulkiilayaashu aysan qayb aaaysan ka ahayn, laguma dari doono waxyeelada shaqada. Waa inaad soo gudbisaa foomka [codsiga caymiska oo la doortay ee dadka naafadaa ah](#) oo aad u gudbisaa maareeyaha xisaabaadka magdhawga shaqaalaha ganacsigaaga si aad u hesho caymiska.
  - Haddii aad u rabto caymiska shaqo la'aanta ee saraakiisha shirkadaha. Saraakiisha adeegyada ka bixiya Washington waxaa si toos ah looga dhaafayaa caymiska shaqo la'aanta, haddii aan shaqo-bixiyuhu si gaar ah u codsan in uu bixijo. Haddii aad rabto inaad buuxiso saraakiishaada shirkadda, waa inaad soo gudbisaa Foomka Doorashada ikhtiyaariga ah. Macluumaad badan ka hel [halkan](#).
- [Codsiga Ruqsadaynta Ganacsigu](#) waa foomka ruqsada ganacsiga ee gobolka oo uu xisaabaadkaaga ka samaystaa wakaalado badan oo gobolka Washington ah oo ay ku jiraan Waaxaha Dakhliga, Ammaanka Shaqada, iyo Shaqada & ganacsiga. Qaar [ka mid ah ruqsadaha](#) deegaanka iyo [kuwa](#) gaarka ah waxaa lagu heli karaa iyadoo la isticmaalayo Codsiga Ruqsada Ganacsiga. Raac xiriirinta ama links-ka sare si aad u hesho macluumaadka ku saabsan deegaanka iyo khidmadaha ruqsada gaarka ah.

- Wixii macluumaad ah ee ku saabsan Ruqsadaha deegaanka AAN lagu maamulin Codsiga Ruqsada Ganacsiga, la xidhiidh [caasimad kasta ama magaalo kasta](#) oo aad ganacsi ka samayn doonto.
- Ganacsiyada qaarkood waxay u baahan yihiin ruqsadooyin caalami ah, sida naqshadeeyayaasha, injineerada, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, la-taliyayaasha, qareennada, CPAs, iwm. Si aad macluumaad u hesho oo aad u ogaato shuruudaha, la xidhiidh [maamulka ruqsadaaynta](#) u qaabilسان xirfaddaas.
- Ganacsiyada la xiriira cuntada (maqaayadaha, meelaha qaxwada lagu iibyo, kuwa cuntada laga iibsado, kuwa wax soo saara wax soo saarka cuntada ah, iwm.) waxay u baahan doonaan ogolaanshaha maamulaha jikada iyo cuntada. La xidhiidh [waaxda caafimaadka degmadaada](#). Soosaarayaasha cuntada iyo cabitaanka iyo sameeyaasha waxay u baahan doonaan Ruqsad ka timaada [Waaxda Beeraha ee Washington](#). Haddii aad qorsheyneyso inaad iibiso, oo aad dadka ka iibiso, ama soo saarto cabitaan khamri ah, la xidhiidh [Guddiga Khamriga iyo Xashiishka ee Gobolka Washington](#) si aad u ogaato nooca Ruqsada aad u baahan tahay inaad codsato. Wax so saarada xashiishadda lagu daray, waxaad u baahan doontaa ruqsada xashiishadda. La xidhiidh [Adeegga Ruqsadaaynta Ganacsiga](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo codsado. Si aad u hesho caawimo ku saabsan ka furitaanka makhaayad Seattle, booqo [goobta makhaayadda Seattle](#).
- Ganacsiyada ku jira ganacsiga dhismaha waa in loo [diwaan galiyo in aay yihiin qandaraaslayaal dhismo](#), taasoo u baahan isku xidhid iyo caymis. Ogsongoow in xitaa suuqgeynta ama u tartamida shaqada dhismaha ay kaaga baahan tahay in adiga laguu diwaan galiyaa qandaraasle ahaan.
- Ganacsiyada keeni doona saamaynta deegaanka waxay u baahan karaan ogolaansho heer degmo iyo/ama heer gobol. La xidhiidh waaxda caafimaadka degmadaada iyo [Xafiiska hal-abuurka iyo kaalmaynta sharchiyeed](#) wixii macluumaad dheeraad ah.
- Dhismayaasha hoyga sida huteelada iyo loojoysaasha meelaha baakimada ah laga helo, waa inay Ruqsad aay ka haystaan [Waaxda Caafimaadka](#) ee gobolka.
- Ganacsiyada bixiya daryeelka deegaanka iyo meheradaha bixiya adeegyada caafimaadka iyo caafimaadka waa inay Ruqsad aay ka haystaan [Waaxda Caafimaadka](#) ee gobolka.
- Ganacsiyada xanaanada cunugga waa in ay ruqsad aay ka heystaa [Waaxda Caruurta, Dhalinyarada & Qoysaska](#) ee gobolka.





- Haddii aad qorsheyneyso inaad iibiso cabitaaanada dadkalaga iibsho ama soo saarto cabitaan khamri ah, la xidhiidh [Guddiga Khamriga iyo Xashiishka ee Gobolka Washington](#) si aad u ogato nooca Ruqsada aad u baahan tahay inaad codsato.

#### 4. Waaxaad shaqaalaysiisataa shaqaalooyin kuwaas oo ku sugar Washington

- Isku diyaar inaad wax shaqaalaysiiso, hadii loo baahdo. Inaad haysato shaqaale leh sifooyin iyo xirfado ku habboon ganacsigaaga ayaa muhiim u ah korriinka guusha leh ee ganacsigaaga. Waxaa jira ilo-maalaadyo oo kaa caawini doono qorsheynta xiriirka shaqada, waxaana ka mid ah [Macluumaadka Suuqa Shaqada](#).
- Bixinta caymiska caafimaadka waa hab fiican oo lagu soo jiito shaqaale tayo sare leh. [Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington](#) waxa uu bixiyaa agab lagu caawiyo ganacsiyada yaryar si ay u helaan caymis caafimaad oo ku habboon baahidooda ganaci. (Eeg qaybta [7. Caymiska caafimaadka](#) ee hoos yimaada "qaybta qorshee Ganacsigaaga").
- Wuxuu kuu keeni karaa cadsade xirfad leh oo diyaar u ah inay shaqeeyaan.
  - [Worksource](#)
  - Shaqo bilaash ah oo cadaalad ah, [soo dhejinta shaqada onlaynka ah](#) waxay kaa caawin kartaa kordhinta tirada dadka cadsada yashaashka ah.
  - [Dhibcaha canshuurta](#) waxay kaa caawin kartaa dhimista kharashka shaqaalahi cusub.
  - Ikhtiyaarada kaalmada [tababarka shaqaalahi](#).
  - [Kabka mushaharka tababarka shaqada](#).
  - Agabka tababarka shaqaalahi - [Buundada Xirfadda](#)
  - [Barrnaamijka tababarka la xaqiijiyay ee la isticmaalo xiliga shaqaaleysiinta](#).
  - [Tababarka la xaqiijiyay ee la isticmaalo xiliga shaqaaleysiinta ee Worksource](#).
  - [Shaqaalahi waxbarashada shaqada](#).
- Macluumaadka Codsiga Ruqsada Ganacsiga waxaa loo gudbin doonaa Waaxda Ammaanka Shaqada si loo sameeyo xisaab cashuureedka shaqala'aanta ee gobolka, iyo Waaxda Shaqada & ganacsiga si ay u dejiso magdhowga shaqaalahi koontada caymiska oo aay u bixiso ogolaanshahaaga shaqo ee yar, haddii ay khuseyso. Wuxuu kuu keeni karaa cadsade xirfad leh oo diyaar u ah inay shaqeeyaan.

biloodle ah oo aad la yeelani doonto labada wakaaladood, oo lagu daray Adeegga Dakhliga Gudaha IRS (eeg qaybta [SOCODSII ganacsigaaga](#) ee hagaha ganacsiga yaryar)

- Shaqaale kasta oo cusub wuxuu u baahan doonaa inuu buuxiyo [Foomka Xaqijintu U-qalmitaanka Shaqaalaysiinta ee federaalka ee I-9](#) saddex maalmood gudahooda ee shaqada, iyo IRS [Foomka W-4](#).
- Waxed sidoo kale u baahan doontaa inaad ka warbixiso shaqaale kasta oo dhawaan la shaqaaleysiyyay iyo kuwa dib loo shaqaaleysiyyay iyada oo loo sii marayo Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka, Qaybta Taageerada Ilmaha ee [Barnaamijka Ka Warbinta Shaqaalaysiinta Cusub](#) 20 maalmood gudahooda ee shaqlaysiinta. Ka warbixintu waa aay sahlan tahay waxaana lagu samayn karaa onlayn iyada oo loo marayo marin shabakadeed oo sugaran, [Isticmaalka sugar ee Washington \(SAW\)](#) iyadoo la isticmaalayo Qaybta Taageerada Ilmaha ee Adeegyada khadka tooska ah (DCSOnline). Haddii aanad hore u lahayn akoonka SAW, waxaad u baahan doontaa inaad saxiixdo oo aad ku darto adeega khadka tooska ah ee DCS. Si aad u soo gudbiso warbixin cusub oo shaqaaleysiin ah, baahida loo-shaqeeyaha si ay u bixiso magacooda, ciwaankooda iyo Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Federaalka (FEIN). Waxay sidoo kale u baahan doonaan macluumaaadka laga helo Foomka W-4 ee shaqaalah, oo ay ku jiraan magacooda, ciwaankooda iyo Lambarka Amaanka bulshada (SSN), oo lagu daray taariikhda shaqaalaynta shaqaalah iyo taariikhda dhalashada. Kala xidhiidh **Kooxda Xiriirkha Loo-shaqeeyaha ee DCS** lambarka ah **800-562-0479** haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabto.
- La soco in shaqaalayntu aay tahay goob leh sharchiyo muhiim ah, oo ay ku jiraan mushaharka ugu yar, mushaharka saacadaha dheeraadka ah, shaqaalaynta carruurta aan qaan-gaarir iyo xubnaha qoyska, badbaadada goobta shaqada, iwm.
- Isticmaalka qandaraaslayaasha madax-bannaan waa wax marar badan dadka aaysan aad u fahmin karin. Haddii aanu qofku si dhab ah ugu ganacsanayn naftiisa ama nafteeda, uu ruqsad haysto, oo uu si firfircoo uga ganacsanaayo suuqa, oo uu leeyahay macaamishal\macaamiil badan, oo uu qabanayo shaqo ka baxsan hawlahaga ganacsi ee caadiga ah, fursadaha waa sharciga gobolka iyo federaalku waxay u baahan doonaan in qofka loola dhaqmo sidii shaqaale.
- Shaqaalaysigu sidoo kale waa meel diiwaangalin muhiim ah iyo canshuur bixin. Waa muhiim inaad fahanto sharchiyada iyo kharashyada markaad aad qorsheynayso ganacsigaaga.



## Sharciga Shaqada

- [Mushaharka iyo Sharciyada saacadaha \(sida mushaharka ugu yar ee shaqada lagu bixiyo, saacadaha dheeraadka ah, nasashada, iwm.\)](#)
- [Shuruudaha boodhka ee goobta shaqada](#)
- [Shaqaalaysiinta carruurta yaryar](#)
- [Sharciyada takoor la'aanta](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(Shaqada & ganacsiga\)](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(Ammaanka Shaqada\)](#)
- [Qandaraaslayaasha madax-bannaan \(IRS\)](#)
- [Badbaadada goobta shaqada \(oo ay ku jiraan barnaamijka ka hortagga shilalka ee qoran ee loo baahan yahay\)](#)
- [Canshuurta mushaar bixinta federaalka](#)
- [Sharciyada Haynta Masruufka Ilmaha](#)
- Xakamaynta [heshiisyada aan tartanka ahayn](#), [taariikhda mushaharka](#), iyo [sirta mushaharka](#)
- [Shaqaalaha aanan badalka haysanin ee kaligiisa shaqeeya](#)
- [Isbeddelka Xeerarka Wakhtiga Dheeriga ah](#)
- [Sharciga Fursada & Sinaanta Mushaharka](#)

## Faa'iidooyinka Shaqaalaha

- [Canshuurta shaqo la'aanta ee gobolka](#)
- [Caymiska magdhowga shaqaalaha](#)
- [Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington](#)
- [Washington Healthplanfinder](#)
- [Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalaha](#)
- [Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad](#)
- [Noocyada kale ee Fasaxa](#)
- [Suuqa Hawlgabka](#)

Ogow: Haddii aad shaqaale ku leedahay Seattle, Tacoma ama SeaTac, ka hubi magaaladaada mushaharka ugu yar iyo shuruudaha kale ee shaqada.

## 5. Soo gudbi warbixinnada loo baahan yahay iyo canshuuraha

### Canshuuraha ganacsiga gobolka:

Gobolka Washington ma laha cashuur dakhli shakhsii ama ganacsi. Taa beddelkeeda, qaab dhismeedka cashuureed waxa ka mid ah Canshuurta Ganacsiga & Shaqada, iibka iyo cashuurta isticmaalka, cashuuraha guryaha, iyo cashuuraha kala duwan ee warshadaha gaarka ah. [Waaxda Dakhliga](#) (Department of Revenue, DOR) ee Washington waxay maamushaa in ka badan 60 canshuur oo kala duwan.

Canshuuraha gobolka waxaa ka mid ah:

- [Canshuurta Ganacsiga iyo Shaqada \(B&O\)](#) – Tani waa canshuur dakhliga guud ee ganacsiga. canshuurta B&O ee gobolka waxaa dheer, caasimooyin iyo magaaloooyin badan ayaa sidoo kale soo rogaya canshuuraha B&O ee maxalliga ah (hoos eeg)
- [Canshuurta iibka](#) – Ganacsiyadu waxay macaamiisha ka qaadaan cashuurta iibka inta badan alaabta tafaariiqda, hawlaha dhismaha, iyo adeegyada qaarkood. Sababtoo ah canshuurta iibku waxay ku saleysan tahay meesha loo socdo, ganacsiyada ururiya cashuurta iibka waa in ay dalacdaan qiimaha cashuurta goobta lagu keenay alaabta ama adeega. DOR waxay haysaa [galabka waxa lagu baadho](#) si loo go'aamiyo qiimaha cashuurta iyo lambarka goobta.
- [canshuurta isticmaalka](#) – Isticmaal waxyaabaha canshuurta khuseysaa marka ganacsiyadu ay wax iibsadaan iyagoon bixin canshuurta iibka, sida iibsashada internetka ama wax iibsiga ee Oregon.
- [Canshuuraha Hantida dhabta ah iyo kuwa gaarka ah](#) – Ganacsiyadu waxay bixiyaan cashuurta guryaha iyadoo lagu salaynayo qiimaha hantida ma-guurtada ah, dhismayaasha iyo dhismayaasha kale, alaabta guriga, qalabka iyo hantida kale. Canshuurta hantida waxaa aruuriya degmooyinka halkii ay qaadi lahaayeen DOR.
- [Canshuuraha warshadaha gaarka ah](#) – Waxaa jira canshuuro kala duwan oo khuseeya warshado gaar ah, sida adeega dadweynaha, huteelada/looajka goobaha baakimada leh ee darawalada, baabuurta kirada, sigaarka, iwm. Guji ciwaanka si aad u aragto haddii ay jiraan cashuuro gaar ah oo khuseeya ganacsigaaga.

Ganacsiga ka baxsan gobolka waxay ku xiran yihiiin canshuuraha Washington iyadoo lagu salaynayo hawlahooda gaarka ah haddii ay leeyihii "xiriiri la yeelashada

shirkadaha kale" (xidhiidh la canshuuri karo) oo ay la leeyihii Gobolka Washington. Si aad u hesho macluumaadka guud ee ku saabsan xidhiidhka, fadlan eeg hagaha [ganacsiyada ka baxsan gobolka iyo xiriirka la yeelashada shirkadaha kale](#) ee bogga Waaxda Dakhliga.

Ganacsiyada badankoodu waxay u baahan yihii inay [ku fayl gareeyaan ama xareeyaan cashuur celinta](#) DOR. [Inta jeer ee xaraynta](#) cashuurtada, ee laguu qoondeeyay ka dib markaad gudbiso Codsiga Ruqsada Ganacsiga, waxay ku salaysan tahay qiyaasta cadadka cashuurta lagugu leeyahay. Ganacsiyada waxaa looga baahan yahay inay si elektaroonig ah u xareeyaan cashuurta iyagoo isticmaalaya [My DOR](#), nidaamka xaraynta khadka tooska ah ee DOR, oo ay ku bixiyaan si elektaroonig ah iyagoo isticmaalaya mid ka mid ah dhawr ikhtiyaar oo lacag bixin ah. Si aad u hesho caawimaadda diiwaan gelinta iyo xereynta My DOR, wac 360-705-6705. Haddii aadan awodin inaad si elektaroonik ah u fayl garaysato, waxaad codsan kartaa [cafis](#).

Hoos waxaa ah xiriirinta macluumaadka dheeraadka ah iyo qalabyada ay bixiso DOR si ay uga caawiso xisaabinta iyo ka warbixinta canshuurta:

- [Aasaaska Cashuurta ee Ganacsiga Cusub](#)
- [Jadwalka Aqoon-is-weydaarsiyaha La Ansixiyay ee Cashuuraha Ganacsiga Cusub](#)
- [Kala soocida canshuurta caadiga ah](#)
- [Tilmaamaha gaarka ah ee warshadaha](#)
- [Dhiirrigelinta cashuuraha & Dhibcaha gaarka ah](#)
- [Ogolaanshooyinka dib u iibiyaha](#)
- [Eeg heerka canshuurta iibka](#)
- [Noo soo dir su'aalahaaga guud ee ku saabsan canshuurta](#)
- [Waxaad codsataa xukun canshuureed](#)
- [Hantida aan la sheegan](#)
- [Cusbooneysii macluumaadka ganacsiga](#)

La tasho xirfadlahaaga cashuuraha wixii macluumaad dheeraad ah. DOR kama wada hadli karaan xogta xisaabta canshuurta ee qarsoodiga ah wakiilka/diyaareeyaha cashuuraha ilaa aad buuxiso [foomka Ogolaanshaha Macluumaadka Cashuuraha Qarsoon](#).



## Canshuuraha ganacsiga maxalliga ah:

Casimadooyinka & magaaloooyinka

Inta badan casimadooyinka iyo magaaloooyinka waxay leeyihiiin canshuurta iibka maxalliga ah iyo canshuurta ganacsiga & shaqada deegaanka (B&O). DOR waxay u ururisaa cashuurta iibka ee bulshooyinka deegaanka, laakiin magaaloooyinka iyo magaaloooyinku waxay ururiyaan B&O deegaankooda. Iyada oo ku xidhan qaddarka lacagta uu sameeyo ganacsigaagu, cashuurta B&O ee deegaankaaga waxa laga yaabaa in la bixiyo saddexdii biloodba mar ama sannad kasta. La xidhiidh [casimadooyinka iyo magaaloooyinka](#) aad ka ganacsanayso wixii macluumaad dheeraad ah.

## Degmooyinka

Degmooyinku waxay mas'uul ka yihiiin qiimaynta iyo ka qaadista canshuurta hantida maguurtada iyo hantida gaarka ah labadaba. In kasta oo cinwaanka "hantida gaarka ah" laga yaabo inuusan sidiisa ula jeedsan, Waxaa ka mid ah alaabta ganacsiga, qalabyada, qalabka, alaabta adeega la gudbinaayo iyo hantida kale.

## Canshuurta hantida shakhsi ahaaneed

Dadka badankiis waxay og yihiiin in [canshuurta hantidu](#) ay khusayso hantida ma guurtada ah; si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in qaarkood aysan ogeyn in canshuurta hantidu ay sidoo kale khuseyso hantida gaarka ah. Inta badan hantida gaarka ah ee ay shaqsyaadku leeyihiiin waa laga dhaafay. Tusaale ahaan, alaabta guriga iyo saamaynta shakhsi ahaaneed laguma so oogo cashuurta guryaha. Si kastaba ha ahaatee, haddii alaabtan loo isticmaalo ganacsi, canshuurta hantida ayaa khuseysi doonto. Canshuurta hantida shakhsi ahaaneed ma khuseyso alaabada ganacsiga, ama hantida aan la taaban karin sida xuquuqda daabacaada iyo calaamadaha ganacsiga.

Hantida shakhsi ahaaneed waxa lagu soo rogayaan cashuur la mid ah tan hantida maguurtada ah. Sifada kala saarta hantida maguurtada ah iyo hantida qofeed waa dhaqdhqaaq hantida. Hantida dhabta ah waxaa ka mid ah dhulka, dhismayaalka, hagaajinta dhulka, iyo qalab gaar ah oo ku dheggan ama ku dul dhisan dhulka ama dhismayaasha. Hantida gaarka ah waxaa ka mid ah mishiinada, qalabka, alaabta guriga, iyo waxyaalaha adeega ah ee ganacsiyada iyo beeralayda. Waxa kale oo ku jira wax kasta oo horumar ah oo lagu sameeyay dhulkii laga kireeyay dawladda (isbedel kasta oo la sameeyay si loo habeeyo hantida kirada si loo qanciyo baahiyaha gaarka ah ee kirayste gaar ah)



Canshuuraha guryuhu waxaa ugu dambeeysoo Abril 31 iyo Oktoobar 31 ee sannad kasta. La xidhiidh [Degmooyinka](#) halkaas oo aad ka ganacsanayso si aad u hesho maclumaad dheeraad ah.

### **Canshuuraha shaqada ee gobolka:**

- [Canshuurta shaqo la'aanta](#) waxaa ugu dambeeysoa saddexdii biloodba mar Waaxda Ammaanka Shaqada (ESD). Ka warbixinta iyo lacag bixinta guud ahaan waxaa lagu sameeyaa onlayn. Taariikhaha kama dambaysta ahi waa Abril 30, Luulyo 31, Oktoobar 31 iyo Janaayo 31 ee rubuc kalandarka hore. Canshuuraha waxaa lagu xisaabiyyaa iyadoo lagu salaynayo [qadarka](#) uu dhanyahay ganacsigaaga Ammaanka Shaqada, oo lagu dhuftay mushaharka shaqaale kasta ilaa [ugu badnaan sanadlah](#). Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan cashuuraha iyo faa'iidooyinka Caymiska Shaqala'aanta waxaa laga heli karaa ayada oo loo maraayo [bogga ESD](#).
- [Khidmadaha magdhowga shaqalaha](#) waxaa kama dambaysteedu tahay saddexdii biloodba mar siiya Waaxda Shaqada & ganacsiga (L&I). Ka warbixinta iyo lacag bixinta guud ahaan waxaa lagu sameeyaa onlayn. Taariikhaha kama dambaysta ahi waa Abril 30, Luulyo 31, Oktoobar 31 iyo Janaayo 31 ee rubuc kalandarka hore. Qiimaha khidmadaha waxaa lagu xisaabiyyaa iyadoo lagu salaynayo heerka (heerarka) kala soocida halista ee ay siiso ganacsigaaga L&I, oo lagu dhuftay saacadaha ay shaqeeyaan shaqaaluhu kala soocida khatartaas. Loo-shaqeeyayaashu waxay ka jari karaan mushaharka shaqaalaha qayb ka mid ah qaddarka caymiska, sida ku cad ogaysiiska heerka laga helay L&I. Maclumaad dheeri ah oo ku saabsan Magdhawga Shaqalaha waxaa laga heli karaa si waliba bilaash ah [L&I Aasaaska u ah shabakadaha ganacsiga](#).
- [Khidmada Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad](#) ee wakhtigeedu kama dambaysta ah ayaa saddexdii biloodba mar la bixiyaa Waaxda Ammaanka Shaqada. Ka warbixinta iyo lacag bixinta guud ahaan waxaa lagu sameeyaa onlayn. Taariikhaha kama dambaysta ahi waa Abril 30, Luulyo 31, Oktoobar 31 iyo Janaayo 31 ee rubuc kalandarka hore. [Khidmadaha](#) waxaa lagu [xisaabiyyaa](#) iyadoo lagu salaynayo boqollayda mushaharka guud ee shaqaalaha. Loo-shaqeeyayaashu waxay ka jari karaan mushaharka shaqaalaha qayb ka mid ah qaddarka khidmada. Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan khidmadaha Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad ee Lacag-bixinta iyo Faa'iidada waa [la heli karaa](#).

### Ruqsada iyo Ogolaanshaha dib u Cusbooneysiinta:

- Shirkadaha, Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan, iyo shuraakada xaddidan waa inay xareeyaan ama aay fayl gareeyaan warbixin sannadle ah. Shirkadaha faa'iido doonka ah, shirkadaha aan faa'iido doonka ahayn, Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan iyo shuraakada xaddidan waxay xareeyaan warbixinadooda sanadlahaa ah [Xoghayaha gobolka](#) iyo dhammaan adeegyada ayaa laga heli karaa onlaynka ah [www.sos.wa.gov/corps](http://www.sos.wa.gov/corps).
- Ruqsadaada ganacsiga ee gobolkaagu uma baahna in la cusboonaysiyo. Si kastaba ha ahaatee, [ruqsadaha badan oo khaas ah](#), ogolaanshaha, [ruqsada maxalliga ah](#) iyo [ruqsada xirfadeed](#) ayaa u baahan dib u cusboonaysiin sanadle ah. La soco taariikhahaaga cusboonaysiinta si aad u hubiso in ruqsadahaadu ay hadda yihiin oo aad iska ilaalso kharashaadka dheeraadka ah.
- Cusboonaysiinta [diiwaan gelinta qandaraaslahu](#) ayaa loo baahan yahay labadii sanaba hal mar waxayna ku kacysaa \$113.40. Wuxaan ku cusboonaysiisay diiwaangelintaada adiga oo isticmaalaya L&I. L&I waxa kale oo ay cusboonaysiisaa ruqsadahaaga takhasuska leh ee la xidhiidha ganacsiga (sida [korontada, tuubada](#), iwm.).
- [Ruqsada bixiyaha caafimaadka iyo cusbooneysiinta xarunta](#).
- [Xirfadlayaasha & Adeeg-bixiyayaasha Daryeelka Muddada Dheer](#)
- Haddii aad hadda ganacsi ka samaynayo caasimadooyinka iyo magaaloooyinka aanad hore u haysan ruqsad, waxaad u baahan doontaa inaad hesho ruqsad maxali ah oo dheeraad ah. "Ganacsiga samaynta" waxaa ku jiri kara iibka, gaarsiinta adeega, rakibaadda, ama adeegga. La xidhiidh [caasimadooyinka ama magaaloooyinka](#) wixii maclumaad dheeraad ah.

## 6. Faham oo u hoggaansan shuruucda kale ee Washington

### Gobolka

- [Xafiiska Dadka laga tirada badan yahay & Shirkadaha Ganacsiga Haweenka](#) – Waxay shahaado siisaa ganacsiyada heer gobol ama federaal inay ka qayb qaataan fursadaha qandaraas bixinta dawladda.
- [Waaxda Beeraha](#) – Waxay nidaamisaa badbaadada cuntada, calaamadaynta alaabta, sunta cayayaanka, dalagyada iyo xoolaha, iwm.
- [Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka](#) – Wuxuu kormeeraa ilaalinta macaamiisha, iwm.

- [Waaxda Ikoolojiga](#) - Waxay fulisaa [sharchiyada deegaanka iyo qawaaniinta](#) waxayna soo saartaa [ogolaanshaha iyo shahaadooyinka](#) si loo ilaaliyo, oo loo maareeyo, oo kor loogu qaado deegaanka Washington.
- [Waaxda Hay'adaha Maaliyadda](#) – Waxay xakameysaa shuruudaha ganacsiga, maalgashiga ganacsiga, iyo deynta ganacsiga, iwm.
- [Guddiga Xuquuqul Insaanka](#) – Wuxuu nidaamiyaa hoyga dadweynaha iyo takoor la'aanta, iwm.
- [Waaxda Shaqada iyo Warshadaha](#) – Wuxuu nidaamiyaa badbaadada [goobta shaqada, magdhowga shaqaalah](#), iyo [xeerarka shaqada](#), iwm.
- [Guddiga khamriga iyo xashiishadda](#) – Soo saara shatiyada iyo ogolaanshaha. Wuxuu baraa oo uu fuliyaa sharchiyada iyo xeerarka ku saabsan soo saarista, iibinta, iyo u adeegista khamriga iyo soo saarista, qaybinta, iyo iibinta Xashiishka, waxyaalaha laga sameeyay tubaakada iyo waxyaalaha uumiga ku samaysma.
- [Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah](#) – Waxay nidaamisaa hab-dhaqanka kaynta, oogada macdanta, iwm.
- [Xafiiska Hal-abuurka iyo Caawinta Nidaaminta](#) – Waxay ka caawisaa ganacsiyada iyo muwaadiniinta inay maraan shuruudaha ogolaanshaha iyo ruqsada adag.
- [Guddiga Adeegga iyo Gaadiidka](#) – Waxay nidaamisaa adeegyada tagaasida iyo limousine-ka, gaadiidka iyo gaadiidka xamuulka, iwm.



### Maxaliga ah

- [Waaxyaha caafimaadka gobolka](#) – Waxay nidaamisaa xarumaha cuntada, agabka halista ah, caafimaadka deegaanka, iwm.
- [Qiimeeyayaasha Degaanka](#) – Waxay bixisaa qiimaynta hantida maguurtada ah ee ganacsiga, qalabka, alaabta guriga iyo hantida kale iyada oo ujeedooyinka yihiin cashuurta guryaha.
- [Caasimadooyina](#) – Waxay nidaamisaa aagagga, calaamadaynta, baarkinka, waxayna soo saartaa oggolaanshaha dhismaha iyo ganacsiga, iwm.
- [Waaxyaha dabka](#) – Wuxay nidaamisa dhacdooyinka dabka.

## 7. Ku koritaanka Washington

Waanu kugu soo dhawaynaynaa Washington waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad gobolkayaga ku korto. Eeg "[KOBCL Ganacsigaaga](#)" cutubka hagaha macluumaadka Ganacsiga Yaryar iyo khayraadka ballaarinta ganacsiga

## 8. Ma u baahan tahay gargaar?

Xiriirka Ganacsiga Yaryar ee Gobolka Washington ayaa kaa caawin kara inaad hesho macluumaadka iyo khayraadka aad u baahan tahay. Sidoo kale, naga caawi horumarinta Hagaha Ganacsiga Yaryar adiga oo buuxinaya sahan ama xog uruurin gaaban oo qarsoodi ah.





# SOCODSII ganacsigaaga

## SOCODSII ganacsigaaga

Marka ganacsigaagu uu Aadka u sareeyo ee uu shaqeeynaayo, waxaa jira waxyaabo aad u baahan tahay inaad sameyso si aad u buuxiso shuruudaha sharciyeenta iyo canshuurta. Dhaqdhaqaqyadani way kala duwan yihii iyadoo ku saleysan dhaqdhaqaqa ganacsigaaga, inta uu ganacsiga la eyyahay, iyo haddii aad shaqaale leedahay iyo haddii kale.

### 1. Canshuuraha dakhliga ganacsiga ee federaalka

Canshuurta dakhliga federaalka ee ganacsiyada waxay ku salaysan tahay faa'iidada saafiga ah (dakhligaaga oo laga jaray kharashyadaada). Iyada oo aay jraan [Shirkadaha gaarka loo leeyahay](#), [shuraakada](#), LLCs intooda badan, iyo [Shirkadaha-S](#), canshuurta dakhliga ganacsiga waxaa bixiya milkiilayaasha iyada oo loo marinaayo canshuur celinta shaqsiyadeed. Tan waxa loo yaqaan "canshuurta dhaafitaanka." Milkiilayaasha guud ahaan waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan qiyaasaha canshuurta rubuc-biloodlaha ah inta lagu jiro sanadka canshuurta iyagoo isticmaalaya Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) [Foomka 1040-ES](#). Lacag-bixintani ayaa waxaay kama dambays tahay Abril 15, Juun 15, Sebtembar 15 iyo Janaayo 15.

Haddii aad tahay mulkiilaha ka shaqeeya Shirkadaha-S, sidoo kale waxaad tahay shaqaale qaadanaaya jeegaga mushaarka caadiga ah. Waxaa laga yaabaa inaad u baahnayn inaad bixiso canshuur qiyaas ah haddii aad leedahay canshuur dakhli kugu filan oo lagaa jaray jeegaga mushaharka.

[Shirkadaha caadiga ah](#) ayaa guud ahaan looga baahan yahay inay bixiyaan qiyaasaha canshuurta rubuc-biloodlaha ah maalinta 15-a<sup>ad</sup> ee bilaha 4-a<sup>ad</sup>, 6-a<sup>ad</sup>, 9-a<sup>ad</sup>, iyo bilaha 12-a<sup>ad</sup> ee sannad-maaliyadeed kasta. Haddii aad rabto in shirkadada laguula dhaqmo sidii [Shirkadaha-S](#), buuxi [Foomka 2553 - Doorashada Shirkadha](#) Ganacsiga Yaryar 75 maalmood gudahooda marka la sameeyo ganacsigaaga ama 75 maalmood gudahooda ee bilawga sanad cashuureedka (eeg Foomka [2553 Tilmaamaha](#)).

[Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan \(LLCs\)](#) waxaa loo canshuuraa sida ganacsiga aan shirkada lagu ahayn haddii aay markaas leedahay hal milkiile. Haddii ay leeyihii wax ka badan hal milkiile, LLCs waxaa loo canshuuraa sida shuraakooyinka. Si kastaba ha

noqotee, LLCs waxay dooran karaan in loola dhaqmo sida caadiga ah ama Shirkadaha-S iyada oo ujeedada tahay canshuurta federaalka ayaga oo buuxinaayo [foomka 8832](#) ee IRS. Wuxaa la tashataa xirfadlahaaga cashuuraha wixii macluumaad dheeraad ah.

Qaab dhismeedka ganacsiga	Foomka loo baahan yahay	Taariikhda (Taariikhaha kama dambaysta ah)
Ganacsiga aan shirkada lagu ahayn ee halka mulkiilaha leeyahay iyo mulkiilaha keliga ah ee LLCs	<a href="#">1040 Jadwalka C, 1040 SE (canshuurta iskaa u shaqeysiga), 1040 ES (canshuurta la qiyaasay)</a>	Fayl garee Abriil 15 (sida qayb ka mid ah canshuur celinta shakhsii ahaaneed ee mulkiilaha). Canshuurta la qiyaasay waxay ku egtayah Abriil 15, Juun 15, Sebtembar 15, iyo Janaayo 15.
Iskaashatada iyo LLCs mulkiilayaasha badan	<a href="#">Foomka 1065 iyo 1065 K-1 foomamka aay leeyihin mulkiilaha kasta, 1040 SE (canshuurta iskaa u shaqeysiga), 1040 ES (canshuurta la qiyaasay)</a>	Ganacsiyada a isticmaalaya sanadka kalandarka waa in ay xereeyaan ama aay fayl gareeyaan Abriil 15. Ganacsiyada isticmaalaya sannad-maaliyadeed waa in ay xereeyaan ama aay fayl gareeyaan 15-ka bisha 4-aad kadib dhamaadka sanad xisaabeedka. Canshuurta la qiyaasay waxay ku egtayah Abriil 15, Juun 15, Sebtembar 15, iyo Janaayo 15.
Shirkadaha caadiga ah (ama LLCs si rasmi ah u doortay inay fayl-gareeyaan sidii shirkado caadi ah)	<a href="#">Foomka 1120</a> (oo lagu daray ka joojinta jeegga milkiilaha ee canshuuraha dakhliga, Amaanka Bulshada iyo Medicare)	Ganacsiyada isticmaalaya sanadka kalandarka waa in ay xereeyaan ama aay fayl gareeyaan Maars 15. Ganacsiyada isticmaalaya sannad-maaliyadeed waa in ay xereeyaan ama aay fayl gareeyaan 15-ka bisha 3-aad kadib dhamaadka sanad xisaabeedka.
Shirkadaha-S (ama LLCs si rasmi ah u doortay inay fayl-gareeyaan sidii Shirkadaha-S)	<a href="#">Foomka 1120-S</a> iyo foomamka 1120 K-1 ee milkiile kasta (oo lagu daray ka-goynta jeegga milkiile kasta ee cashuurta dakhliga, Amaanka Bulshada iyo Medicare)	Ganacsiyada isticmaalaya sanadka kalandarka waa in ay xereeyaan ama aay fayl gareeyaan Maars 15. Ganacsiyada isticmaalaya sannad-maaliyadeed waa in ay xereeyaan ama aay fayl gareeyaan 15-ka bisha 3-aad kadib dhamaadka sanad xisaabeedka.

## 2. Canshuuraha ganacsiga gobolka:

Gobolka Washington ma laha cashuur dakhli shakhsii ama ganacsi. Taa beddelkeeda, qaab dhismeedka cashuureed waxa ka mid ah Canshuurta Ganacsiga & Shaqada, iibka iyo cashuurta isticmaalka, cashuuraha guryaha, iyo cashuuraha kala duwan ee warshadaha gaarka ah. [Waaxda Dakhliga](#) ee Washington (DOR) waxay maamushaa in ka badan 60 canshuur oo kala duwan.

Inta badan ganacsiyada yaryar waxay u baahan yihii inay [ku fayl gareeyaan ama xareeyaan cashuur celinta](#) DOR. [Inta jeer ee xaraynta](#) cashuurtada, ee laguu qoondeeyay ka dib markaad gudbiso Codsiga Ruqsada Ganacsiga, waxay ku salaysan tahay qiyaasta cadadka cashuurta lagugu leeyahay. Ganacsiyada waxaa looga baahan yahay inay si elektaroonig ah u xareeyaan cashuurta iyagoo isticmaalaya [My DOR](#), nidaamka xaraynta khadka tooska ah ee DOR, oo ay ku bixiyaan si elektaroonig ah iyagoo isticmaalaya mid ka mid ah dhawr ikhtiyaar oo lacag bixin ah. Si aad u hesho caawimaadda diiwaan gelinta iyo xereynta My DOR, wac 360-705-6705. Haddii aadan awoodin inaad si elektaroonik ah u fayl garaysato, waxaad codsan kartaa [cafis](#). Canshuuraha gobolka waxaa ka mid ah:

- [Canshuurta Ganacsiga iyo Shaqada \(B&O\)](#) – Tani waa canshuur dakhliga guud ee ganacsiga. canshuurta B&O ee gobolka waxaa dheer, caasimooyin iyo magaaloooyin badan ayaa sidoo kale soo rogaya canshuuraha B&O ee maxalliga ah (hoos eeg)
- [Canshuurta iibka](#) – Ganacsiyadu waxay macaamiisha ka qaadaan cashuurta iibka inta badan alaabta tafaariiqda, hawlaho dhismaha, iyo adeegyada qaarkood.
- [canshuurta isticmaalka](#) – Isticmaal waxyabaha canshuurta khuseysaa marka ganacsiyadu ay wax iibsadaan iyagoon bixin canshuurta iibka, sida iibsashada internetka ama wax iibsiga ee Oregon.
- [Canshuuraha Hantida dhabta ah iyo kuwa gaarka ah](#) - Ganacsiyadu waxay bixiyaan cashuurta guryaha iyadoo lagu salaynayo qiimaha hantida ma-guurtada ah, dhismayaasha iyo dhismayaasha kale, alaabta guriga, qalabka iyo hantida kale. Canshuurta hantida waxaa aruuriya degmooyinka halkii ay qaadi lahaayeen DOR.
- [Canshuuraha warshadaha gaarka ah](#) – Waxaa jira canshuuro kala duwan oo khuseeya warshado gaar ah, sida huteelada/loojajka goobaha baakimada leh ee darawalada, baabuurta kirada, sigaarka, iwm. Guji ciwaanka si aad u aragto haddii ay jiraan canshuuro gaar ah oo khuseeya ganacsigaaga.

Sababtoo ah canshuurta iibku waxay ku saleysan tahay meesha loo socdo, ganacsiyada ururiya cashuurta iibka waa in ay dalacdaan qimaha cashuurta goobta lagu keenay alaabta ama adeega. DOR waxay haysaa [qalabka waxa lagu baadho](#) si loo go'aamiyo qimaha cashuurta iyo lambarka goobta.

DOR waxay bixisaan Aqoon-is-weydaarsiyo Cashuur Ganaci oo Cusub gobolka oo dhan inta lagu jiro sanadka. Hoos waxaa ah xiriirinta macluumaadka dheeraadka ah iyo qalabyada ay bixiso DOR si ay uga caawiso xisaabinta iyo ka warbixinta canshuurta:

- [Aasaaska Cashuurta ee Ganacsiga Cusub](#)
- [Jadwalka Aqoon-is-weydaarsiyaha Cashuuraha Ganacsiga Cusub](#)
- [Kala soocida canshuurta caadiga ah](#)
- [Tilmaamaha gaarka ah ee warshadaha](#)
- [Dhiirrigelinta cashuuraha & Dhibcaha gaarka ah](#)
- [Ogolaanshooyinka dib u iibiyaha](#)
- [Eeg heerka canshuurta iibka](#)
- [Noo soo dir su'aalahaaga guud ee ku saabsan canshuurta](#)
- [Waxaad codsataa xukun canshuureed](#)
- [Hantida aan la sheegan](#)
- [Cusbooneysi macluumaadka ganacsiga](#)

La tasho xirfadlahaaga cashuuraha wixii macluumaad dheeraad ah. DOR kama wada hadli karaan xogta xisaabta cashuurta ee qarsoodiga ah wakiilka/diyaareeyaha cashuuraha ilaa aad buuxiso [foomka Ogolaanshaha Macluumaadka Cashuuraha Qarsoon](#).

### 3. Canshuuraha ganacsiga maxalliga ah:

#### **Casimadooyinka & magaaloooyinka**

Inta badan casimadooyinka iyo magaaloooyinka waxay leeyihii canshuurta iibka maxalliga ah iyo canshuurta ganacsiga & shaqada deegaanka (B&O). DOR waxay u ururisaa cashuurta iibka ee bulshooyinka deegaanka, laakiin magaaloooyinka iyo magaaloooyinku waxay ururiyaan B&O deegaankooda. Iyada oo ku xidhan qaddarka lacagta uu sameeyo ganacsigaagu, cashuurta B&O ee deegaankaaga waxa laga yaabaa in la bixiyo saddexdii biloodba mar ama sannad kasta. La xidhiidh [casimadooyinka iyo magaaloooyinka](#) aad ka ganacsanayso wixii macluumaad dheeraad ah.

## **Degmooyinka**

Degmooyinku waxay mas'uul ka yihiiin qimaynta iyo ka qaadista canshuurta hantida maguurtada iyo hantida gaarka ah labadaba. In kasta oo cinwaanka "hantida gaarka ah" laga yaabo inuusan sidiisa ula jeedsan, Waxaa ka mid ah alaabta ganacsiga, qalabyada, qalabka, alaabta adeega la gudbinaayo iyo hantida kale.

## **Canshuurta hantida shakhsii ahaaneed**

Dadka badankiis waxay og yihiiin in [cashuurta hantidu](#) ay khusayso hantida ma guurtada ah; si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in qaarkood aysan ogeyn in canshuurta hantidu ay sidoo kale khuseyso hantida gaarka ah. Inta badan hantida gaarka ah ee ay shaqsiyaadku leeyihiiin waa laga dhaafay. Tusaale ahaan, alaabta guriga iyo saamaynta shakhsii ahaaneed laguma so oogo cashuurta guryaha. Si kastaba ha ahaatee, haddii alaabtan loo isticmaalo ganacsi, canshuurta hantida ayaa khuseysi doonto. Canshuurta hantida shakhsii ahaaneed ma khuseyso alaabada ganacsiga, ama hantida aan la taaban karin sida xuquuqda daabacaada iyo calaamadaha ganacsiga.

Hantida shakhsii ahaaneed waxa lagu soo rogayaa cashuur la mid ah tan hantida maguurtada ah. Sifada kala saarta hantida maguurtada ah iyo hantida qofeed waa dhaqdhaqaaq hantida. Hantida dhabta ah waxaa ka mid ah dhulka, dhismayaalka, hagaajinta dhulka, iyo qalab gaar ah oo ku dheggan ama ku dul dhisan dhulka ama dhismayaasha. Hantida gaarka ah waxaa ka mid ah mishiinada, qalabka, alaabta guriga, iyo waxyaalaha adeega ah ee ganaciyada iyo beeralayda. Waxa kale oo ku jira wax kasta oo horumar ah oo lagu sameeyay dhulkii laga kireeyay dawladda (isbedel kasta oo la sameeyay si loo habeeyo hantida kirada si loo qanciyo baahiyaha gaarka ah ee kirayste gaar ah).

Canshuuraha guryuhu waxaa ugu dambeeysaa Abril 31 iyo Oktoobar 31 ee sannad kasta. La xidhiidh [Degmooyinka](#) halkas oo aad ka ganacsanayso si aad u hesho maclumaaad dheeraad ah.

## **4. Canshuuraha shaqada ee federaalka**

- Tilmaamaha la xiriira canshuuraha shaqada federaalka, tixraac [Hagaha Canshuuraha Loo-shaqeeyaha](#) ee IRS. Loo-shaqeeyayaashu waxay mas'uul ka yihiiin ururinta dakhliga shaqaalaha, amaanka bulshada, iyo canshuurta Medicare, waxaa intaas dheer bixinta saamiga loo shaqeeyaha ee amaanka bulshada iyo canshuurta Medicare (6.2% iyo 1.45% ee mushaharka siday u kala

horreeyaan). Goorta iyo sida ay tahay inaad ugu bixiso lacagtaas IRS waxay kuxirantahay inta canshuur ee la qaadayo.

- [Foomamka 941](#) rubuc-biloodle waxay soo sheegaan mushaharka guud iyo cashuuraha dawladda dhexe (dakhliga, amaanka bulshada iyo Medicare). Taariikhaha kama dambaysta ahi ee lagu bixinaayo IRS waa Abril 30, Luulyo 31, Oktoobar 31 iyo Janaayo 31 eerubuc kalandarka hore.
- [Foomamka W-2](#) waxay ka warbixiyaan mushaharka iyo haynta sanadka kalandarka. Waa in la siiyaa shaqaale kasta Janaayo 31 ee sanadka soo socda.
- [Foomamka W-2](#) iyo foomka gudbinta [W-3](#) ee la socda waxaa kama dambaystii loo gudbini karaa maamulka amaanka bulshada ugu danbayn Febraayo 28 ee sanadka soo socda.
- [Foomamka 940](#) ee sannadlaha ah waxay soo sheegaan canshuuraha shaqo la'aanta federaalka. Taariikhaha kama dambaysta ahi ee lagu bixinaayo IRS waa Janaayo 31 ee kalandarka hore. Heerka canshuurta ee loo shaqeeyayaasha badankood waa 0.6% \$7,000 ee ugu horreeya ee shaqaale kastaa helo, ilaa ugu badnaan \$42 shaqaale kasta. Loo-shaqeeyayaasha aadka u yar, lacagahan waxaa laga yaabaa in la bixiyo wakhtiga xaraynta sannadlaha ah laakiin loo-shaqeeyayaasha waaweyn ayaa looga baahan yahay inay bixiyaan lacag-bixinta saddexdii biloodba mar. Ka eeg [Hagaha Canshuuraha Loo-shaqeeyaha IRS](#) wixii maclumaad dheeraad ah.

## 5. Canshuuraha shaqada ee gobolka:

- [Canshuurta shaqo la'aanta](#) waxaa ugu dambeeysa saddexdii biloodba mar Waaxda Ammaanka Shaqada (ESD). Ka warbixinta iyo lacag bixinta guud ahaan waxaa lagu sameeyaa onlayn. Taariikhaha kama dambaysta ahi waa Abril 30, Luulyo 31, Oktoobar 31 iyo Janaayo 31 ee rubuc kalandarka hore. Canshuuraha waxaa lagu xisaabiyyaa iyadoo lagu salaynayo [qadarka](#) ganacsigaaga uu ku bixiyay ESD, oo lagu dhuftay mushaharka shaqaale kasta ilaa [ugu badnaan sanadlaha](#). Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan cashuuraha iyo faa'iidooyinka Caymiska Shaqla'aanta waxaa laga heli karaa ayada oo loo maraayo [bogga ESD](#).
  - Haddii aad la kulanto hoos u dhac mudo yar ah ganacsiga, [Barnaamijka SharedWork](#) wuxuu ku siinayaa hab macquul ah oo aad ku sii haysan karto shaqaalahaaga Halkii aad wajihii lahayd shaqo ka joojinta, waxaad dhimi kartaa saacadaha shaqada ee shaqaalahaaga joogtada ah, waxayna ururin

karaan faa'iidooyinka shaqo la'aanta qayb ahaan si ay ugu beddelaan qayb ka mid ah mushaharkooda lumay.

- Saraakiisha Shirkadaha adeegyada ka bixiya Washington waxaa si toos ah looga dhaafayaay caymiska shaqo la'aanta, haddii aan shaqo-bixiyuhu si gaar ah u codsan in uu bixiyo. Haddii aad rabto inaad buuxiso saraakiishaada shirkadda, waa inaad soo gudbisaa Foomka Doorashada ikhtiyaariga ah.  
Ogow: Tani in aay khuseeyso kali shirkadaha. Xog badan ka hel [halkan](#)).
- [Khidmada Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel qoys iyo sababa caafimahad](#) ee wakhtigeedu kama dambaysta ah ayaa saddexdii billoodba mar la bixiyaa Waaxda Ammaanka Shaqada (ESD) oo labaduna waxaa la siiyaa shaqaalaha iyo loo-shaqeeyahaba. Loo-shaqeeyayaashu waxay raaci karaan [qorshe tabaruc ah](#) oo la ansixiyay ama waxay isticmaali karaan qorshaha gobolka. Xisaabinta qiimaha jaban way ka duwanaan kartaa haddii la isticmaalo qorshe ikhtiyaari ah. Si loo qiyaaso lacagaha fasaxaaga ee lacagta mushaarka la bixiyo, isticmaal xisaabiyaha khidmada. Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan doorarka iyo mas'uuliyadaha loo-shaqeeyaha ayaa laga heli karaa barta ah [Paidleave.wa.gov](#).
- [Khidmadaha magdhowga shaqalaha](#) waxaa kama dambaysteedu tahay saddexdii billoodba mar siiya Waaxda Shaqada & ganacsiga (L&I). Ka warbixinta iyo lacag bixinta guud ahaan waxaa lagu sameeyaa onlayn. Taariikhaha kama dambaysta ahi waa Abriil 30, Luulyo 31, Oktoobar 31 iyo Janaayo 31 ee rubuc kalandarka hore. Qiimaha khidmadaha waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo lagu salaynayo heerka (heerarka) kala soocida halista ee ay siiso ganacsigaaga L&I, oo lagu dhuftay saacadaha ay shaqeeyaan shaqaaluhu kala soocida khatartaas.  
Loo-shaqeeyayaashu waxay ka jari karaan mushaharka shaqaalaha qayb ka mid ah qaddarka caymiska, sida ku cad ogaysiiska heerka laga helay L&I.  
Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Magdhawga Shaqaalaha waxaa laga heli karaa si waliba bilaash ah [L&I Aasaaska u ah shabakadaha ganacsiga](#).

## 6. Warbixinta sanadlaha ah, ruqsada iyo cusbooneysiinta ogolaanshaha

- Shirkadaha, Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan, iyo shuraakada xaddidan waa inay xareeyaan ama aay fayl gareeyaan warbixin sannadle ah. Shirkadaha faa'iido doonka ah, shirkadaha aan faa'iido doonka ahayn, Shirkadaha mas'uuliyadda xaddidan iyo shuraakada xaddidan waxay xareeyaan warbixinadooda sanadlaha

ah [Xoghayaha gobolka](#) iyo dhammaan adeegyada ayaa laga heli karaa onlaynka ah [www.sos.wa.gov/corps](http://www.sos.wa.gov/corps).

- Ruqsada ganacsiga ee gobolkaagu waxa laga yaabaa inuu haysto taageerada [gobolka](#) ama [caasimada](#) oo [la cusboonaysiyo](#) sannad kasta. [Ruqsadaha badan oo khaas ah](#) ogolaanshaha, [ruqsada maxalliga ah](#) iyo ruqsada xirfadeed ayaa u baahan dib u cusboonaysiin sanadle ah. La soco taariikhahaaga cusboonaysiinta si aad u hubiso in ruqsadahaadu ay hadda yihiin oo aad iska ilaalo kharashaadka dheeraadka ah. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka hubiso wakaalada gaarka ah ee gobolka meesha ogolaanshaha laga bixiyay.
- Cusboonaysiinta [diiwaan gelinta qandaraaslaho](#) ayaa loo baahan yahay labadii sanaba hal mar waxayna ku kacysaa \$113.40. Wuxaad ku cusboonaysiisay diiwaangelintaada adiga oo isticmaalaya L&I. L&I waxa kale oo ay cusboonaysiisaa ruqsadahaaga takhasuska leh ee la xidhiidha ganacsiga (sida [korontada, tuubada](#), iwm.).
- [Ruqsada bixiyaha caafimaadka iyo cusbooneysiinta xarunta](#).
- [Xirfadlayaasha & Adeeg-bixiyayaasha Daryeelka Muddada Dheer](#)
- Haddii aad hadda ganaci ka samaynayo caasimadooyinka iyo magaaloooyinka aanad hore u haysan ruqsad, waxaad u baahan doontaa inaad hesho ruqsad maxali ah oo dheeraad ah. "Ganacsiga samaynta" waxaa ku jiri kara iibka, gaarsiinta adeega, rakibaadda, ama adeegga. La xidhiidh [caasimadooyinka ama magaaloooyinka](#) wixii macluumaad dheeraad ah.

## 7. U hoggaansanaanta sharciga

Waxa jira shuruuc badan oo ay tahay in ganacsiyadu u hoggaansamaan si joogto ah ama haddii kale ay la kulmaan ciqaabo iyo ciqaabo iman kara oo caddayn kara caqabad iyo kharash badan. Hoos waxaa ku qoran liiska aasaasiga ah ee qaar ka mid ah wakaaladaha iyo xeerarka aan horay loogu hadlin cutubkan. La soco in liisku aanu ahayn mid dhamaystiran. Waa inaad talo ka raadsataa qareenkaaga, [warshadaha ama ururka ganacsiga](#), iyo la-taliyayaasha kale si loo hubiyo inaad u hoggaansanto dhammaan xeerarka khuseeya. Wakaaladuhu waxay rabaan inay kaa caawiyaan fahamka mas'uuliyadahaaga, markaa fadlan weydiiso gargaarkooda.

### Federaalka

- [Guddiga Badbaadada Alaabta Macmiilka](#) – Wuxuu nidaamiyaa heerarka alaabta, iwm.

- [\*\*Waaxda Shaqada\*\*](#) –Wuxuu nidaamiyaa mushaharka ugu yar ee federaalka, shuruudaha saacadaha dheeraadka ah, iyo fursadaha shaqo ee loo siman yahay, iwm.

## **Gobolka**

- [\*\*Waaxda Beeraha\*\*](#) – Waxay nidaamisaa badbaadada cuntada, calaamadaynta alaabta, sunta cayayaanka, dalagyada iyo xoolaha, iwm.
- [\*\*Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka\*\*](#) – Wuxuu kormeeraa ilaalinta macaamiisha, iwm.
- [\*\*Waaxda Ikoolojiga\*\*](#) - Waxay fulisaa [\*\*sharchiyada deegaanka iyo qawaaniinta\*\*](#) iyo soo saartaa [\*\*ogolaanshaha iyo shahaadooyinka\*\*](#) si loo ilaaliyo, oo loo maareeyo, oo kor loogu qaado deegaanka Washington.
- [\*\*Waaxda Hay'adaha Maaliyadda\*\*](#) – Waxay xakameysaa shuruudaha ganacsiga, maalgashiga ganacsiga, iyo deynta ganacsiga, iwm.
- [\*\*Guddiga Xuquuqul Insaanka\*\*](#) – Wuxuu nidaamiyaa hoyga dadweynaha iyo takoor la'aanta, iwm.
- [\*\*Waaxda Shaqada iyo Warshadaha\*\*](#) – Wuxuu nidaamiyaa badbaadada [\*\*goobta shaqada, magdhowga shaqaalah\*\*](#), iyo [\*\*xeerarka shaqada\*\*](#), iwm.
- [\*\*Guddiga khamriga iyo xashiishadda\*\*](#) – Soo saara shatiyada iyo ogolaanshaha. Wuxuu baraa oo uu fuliyaa sharchiyada iyo xeerarka ku saabsan soo saarista, iibinta, iyo u adeegista khamriga iyo soo saarista, qaybinta, iyo iibinta Xashiishka, tubaakada iyo waxyaalaha uumiga ku samaysma.
- [\*\*Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah\*\*](#) – Waxay nidaamisaa hab-dhaqanka kaynta, oogada macdanta iyo kheyraadka biyaha ee ku yaal dhulka ay dowladdu leedahay.
- [\*\*Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah, Dhulka Biyaha\*\*](#) – Dhulka biyuhu waa dhulka marin biyoodka harooyinka, webiyada, durdurraha biyaha, iyo biyaha badda, sida Puget Sound. Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah (Department of Natural Resources, DNR) waxaa hagaa oo maamulaa qaunuun si ay u maamusho dhulalka biyaha ee ay dowladdu leedahay iyada oo loo marayo ujeedooyinka soo socda:
  - Ku dhiiri geli isticmaalka tooska ah ee dadweynaha iyo isticmaalka.
  - Kobcinta isticmaalka ku-tiirsanaanta biyaha.
  - had iyo jeer hubi ilaalinta deegaanka.
  - Fursadaha ka faa'iidaysiga kheyraadka dib loo cusboonaysiin karo.

- Dhakhli samee adiga oo isticmaalaya dhulka biyaha, marka ay waafaqsan yihiin yoolalkii hore.
- DNR waxay soo saartaa dakhli iyada oo iibinaysa xuquuqaha lagu guran karo kheyraadka la cusboonaysiin karo sida xayawaanka geoducks-ka duurjoogta ah iyo xayawaanada bada laga helo ee qolofka leh kale iyo ka kireynta iyo ruqsadaynta dhul-biyoodka ay dawladdu leedahay.
- [Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah, U adkaysiga Kaymaha](#) – Ayada oo aay ugu horeeyso caawinta mulkiilayaasha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay in ay daryeelaan geedahooda ilaa ay hogaaminayaan dadaallada gobolka ee lagu dhimayo dab-damiska ba'an ee aan caadiga ahayn, Qaybta Caafimaadka Kaymaha iyo Dib-u-celinta waxay ka shaqeysaa horumarinta caafimaadka kaymaha Washington.
- [Xafiiska Hal-abuurka iyo Caawinta Nidaaminta](#) – Waxay ka caawisaa ganacsiyada iyo muwaadiniinta inay maraan shuruudaha ogolaanshaha iyo ruqsada adag.
- [Guddiga Adeegga iyo Gaadiidka](#) – Waxay nidaamisaa adeegyada tagaasida iyo limousine-ka, gaadiidka iyo gaadiidka xamuulka, iwm.
- [Bakhtiyaanasiibka Washington](#) – Ganacsiyada ayaa ruqsad siinaya isi aay uu iibyaan alaabooinka wuxuuna nidaamiyaa iibinta alaabooinka bakhtiyaanasiibka ee tafaariiqda bakhtiyaanasiibka. Waxay dib u eegis ku samaysaa tafaariiqleyaasha bakhtiyaanasiibka ee dadka naafada ah.

### Maxaliga ah

- [Waaxyaha caafimaadka gobolka](#) – Waxay nidaamisaa xarumaha cuntada, agabka halista ah, caafimaadka deegaanka, iwm.
- [Qiimeeyayaasha Degaanka](#) – Waxay bixisaa qiimaynta hantida maguurtada ah ee ganacsiga, qalabka, alaabta guriga iyo hantida kale iyada oo ujeedooyinka yihiin cashuurta guryaha.
- [Caasimadooyina](#) – Waxay nidaamisaa aagagga, calaamadaynta, baarkinka, waxayna soo saartaa oggolaanshaha dhismaha iyo ganacsiga, iwm.
- [Waaxyaha dabka](#) – Waaay nidaamisa dhacdooyinka dabka.

Ogow: Fadlan ka hubi caasimadooyinka ay shaqaalahaagu (shaqaalaha) ka shaqeeyaan, maadaama caasimadooyinku yeelan karaan mushaharka ugu yar ee kala duwan iyo/ama shuruudaha Fasaxa bukaanka ee mushaarkana uu heelaayo shaqaalaha

## 8. U diyaar garow wax aan la fileyn

- Waaxda caafimaadku waxay ku siinaysaa agab kala duwan si ay kaaga caawiyaan u diyaar garowga xaaladaha degdega ah ee caafimaadka dadweynaha oo ay ku jiraan weerarada dhacdooyinka bayooloji, cudurrada dillaaca iyo masiibooyinka dabiiciga ah. Wuxaad ka heli kartaa xaashida xaqiiqda, isku xirka ama links-ka iyo maclumaaad dheeraad ah bogga [Waaxda Caafimaadka](#).
- Ka mid noqoshada [warshadaha ama urur ganacsi](#) waxay ku siin kartaa isku-xidhka asxaabta iyo fursadaha tababaro khaas ah si ay kaaga caawiyaan inaad wax ka qabato waxyaabaha lama filaanka ah.
- **Dhacdooyinka lama filaanka ah**, sida **dabka, daadadka, duufaanada** iyo **dhulgariirrada**, waxay dhaawici karaan ama burburin karaan diiwaannadaada, waxay dhaawaci karaan qalabka muhiimka ah, **ama waxay xidhi karaan ganacsigaaga** muddo wakhti ah. Dejinta qorshaha sii wadida ganacsiga wakhti hore waxa ay kaa caawin doontaa in aad ganacsigaaga u kobco oo aad si dhakhso leh u shaqeysyo.
  - [U diyaar garow masiibooyinka](#).
  - [Aaladaha, qaab-dhismeedka, iyo maclumaaadka qoto-dheer ee horumarinta qorshaha sii wadista ganacsiga](#).
  - [Gurmadka caafimaadka dadweynaha](#).
  - [Marka Dhibaatadu Dhacdo: Qorsheeyaha Dhibaatada](#).
- Haddii ay jirto geeri ku timid **lammaane ganacsi, maamule, ama milkiile** oo aad go'aansatid inaad sii wadato ganacsiga, fadlan eeg [Xiritaanka Dhimashada awgeed](#).
- Su'aalaha ku saabsan khayaanada ama khiyaamada sharcidarada ah, fadlan la xiriir:
  - [Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee Gobolka Washington](#)  
Xarunta Ilaha Macmiilka ee Ilaalinta Macmiilka  
1-800-551-4636 (gobolka dhexdiisa oo kaliya)  
1-206-464-6684 (so wacayaasha gobolka ka baxsan)  
1-800-833-6388 (Adeegga Gudbinta Gobolka Washington ee maqalka naafada ah)
  - [Guddiga Ganacsiga Federaalka](#)

## 9. Ma u baahan tahay gargaar?

Xiriirka Ganacsiga Yaryar ee Gobolka Washington ayaa kaa caawin kara inaad hesho macluumaadka iyo khayraadka aad u baahan tahay. Sidoo kale, naga caawi horumarinta Hagaha Ganacsiga Yaryar adiga oo buuxinaya sahan ama xog uruurin gaaban oo qarsoodi ah.





Maayo 2024



# KOBCI ganacsigaaga

## Ma rabtaa inaad balaadhisoo ganacsigaaga?

Fidinta ganacsigu waxay u baahan kartaa waxyaabo badan oo kala duwan, oo ay ku jiraan lacag, shaqaale, goobo cusub, iyo suuqyo cusub.

### 1. lacag

Lacaktu waxay ku iman kartaa qaab amaah ah, lacag la maalgelintu cashuuraha, curaarta iyo qabab kale. Caawimaada fool-ka-foolka ah si aad ugala hadasho fursadaha maalgelinta, tixgeli inaad la kulanto [Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar](#), [Xarumaha Ganacsiga Haweenka](#), ama la taliyaasha [SCORE](#) (kuwaas oo bilaash ah oo qarsoodi ah). Macluumadka guud ee dhaqaalaha, eeg xiriirinta ama links-ka soo socota:

- [Maamulka Ganacsiga Yaryar ee Maraykanka](#)
- [SCORE](#)
- [Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar](#)
- [Waaxda Ganacsiga ee Washington](#)
- [Xafiiska Ganacsiga Dadka laga tirada badan yahay iyo Haweenka](#)
- [Xafiiska Halyeeyada wadanka u halgama SBA](#)
- [Waaxda Hay'adaha Maaliyadda ee Washington](#)
- [Deyn bixiyayaasha yar yar ee SBA](#)
- [Maamulka Maaliyadda Horumarinta Dhaqaalaha Washington](#)
- [Barnaamijka Dhoofinta Foojarka](#)
- [Kaalmada maalgelinta debaajiga ee mashaariicda dhismaha](#)
- [Fundera](#)
- [Biloow fikrad cusub: 27 Xeeladaha Kobcinta lacagta Ganaci](#)

#### Amaahyada:

Waxaa jira deyman bixiyaal ganaci oo kala duwan. "Amaahda SBA" dhab ahaantii waa amaahyo la sameeynaayo ayada oo loo maraayo bangiyada ganacsiga iyo ururada deymaha kuwaas oo ay dammaanad ka qaadayso dawlada dhexe, kiiskan, Maamulka Ganacsiga Yaryar ee Maraykanka. [Waaxda Beeraha ee Mareykanka](#) waxay leedahay barnaamijyo dammaanad amaah ganaci ah oo si isku mid ah wax looga qabto.

### **Amaahda ganacsigu waxay caadi ahaan u baahan yihiin “5C-yada”:**

Kahor amaahinta lacagta, hay'adaha maaliyadeed ee sumcadda leh waxay rabi doonaan inay ogadaan in shuruudaha qaarkood la buuxiyey, oo inta badan loo yaqaan 5C-yada:

- Capital/Cash (Raasamaalka/Lacagta) – Tani waa maalgelinta lacagta caddaanka ah ee milkiilaha. Caadi ahaan, milkiilayaasha waxaa laga filayaa inay keenaan 25-30% kharashaadka bilowga ganacsiga cusub. Deynta balaadhinta ganacsiga la aasaasay, milkiilayaasha waxaa sida caadiga ah laga filayaa inay muujiyaan sinnaanta ganacsiga oo u dhiganta ugu yaraan 25% ee qaddarka deynta ama inay keenaan lacag caddaan ah oo dheeraad ah si wadarta lacagta caddaanka ah iyo sinnaanta aay u gaarto ugu yaraan 25 %.
- Capacity/Cash Flow (Awoodda/ Socodka Lacagta) – Caddaynta in mulkiilaha ganacsigu uu awood u leeyahay in uu bilaabo oo uu si guul leh oo wanaagsan uu u socodsiyo ganacsiga. Khibrada milkiilaha ee ganacsigiisa, tababarka ganacsiga iyo khibrada maaraynta, oo ay weheliso qorshe ganacsi oo si wanaagsan loo horumariyay, ayaa gacan ka geysan doona in la dhiso awoodda. Ganacsiyada jira, diiwaanka maaliyadeed ee shirkadu waxay muhiim u noqon doonaan muujinta hawlahaa faa'iidata leh iyo maamulka maaliyadeed ee wanaagsan. Saadaasha socodka lacagta caddaanka ah ayaa caadi ahaan loogu talagalay ganacsiyada cusub iyo kuwa dhisan labadaba. Saadaasha waxay u baahan tahay inay muujiso awoodda ganacsigu u leeyahay inuu ka soo baxo waajibaadkiisa maaliyadeed, oo ay ku jiraan bixinta amaahda, iyo inuu u adkaysto dhacdooyinka lama filaanka ah.
- Collateral (Dammaanad laga sii haayo) – Mulkiiluhu wuxuu u baahan yahay inuu ballan qadaa wax qiimo leh. Caadi ahaan dammaanad waxaa ka mid ah hantida ganacsiga, alaabta guriga, alaabta guriga aan guur guurin, qalabka, iyo alaabada, iyo hantida mulkiilaha ee ka baxsan ganacsiga (hanti ma-guurto ah, saamiyada, iwm.).
- Character (Dabeeecada) – Deyn-bixiyuhu wuxuu u baahan doonaa caddayn ah in mulkiiluhu uu si dhab ah u qaato mas'uuliyadda. Tan waxaa qayb ahaan lagu muujiyay taariikhda deynta mulkiilaha.
- Conditions (Shuruudaha) – Deyn-bixiyuhu wuxuu kaloo u baahan doonaa inuu arko deegaanka guud (dhagaalaha, isbeddellada warshadaha, iyo xoogagga suuqa) in ay taageeraan awoodda ganacsiga ee guusha.

### Deyn bixiyaasha ganacsiga:

- Bangiyada iyo ururada deymaha ee amaahda ganacsi ee caadiga ah.
- Bangiyada iyo ururada amaahda ee X 7a amaahda (waxaa loo isticmaali karaa ujeeddo ganacsi kasta) iyo Waaxda Beeraha ee Maraykanka ayaa damaanad qaaday amaahda.
- [Deyn bixiyayaasha yar yar](#) ee SBA (deymaha ilaa \$50,000 ujeedo ganacsi kasta).
- Deyn bixiyaasha SBA 504 (iibsashada hantida ma-guurtada ah iyo agabka waaweyn): [Northwest Business Development Association, Evergreen Business Capital, Ameritrust CDC](#).

Maalgelinta Lacageed: Ganacsiyo badan ayaa ku koraan iyagoo isticmaalaya lacagaha laga helo maalgashadayaasha. Erayga "maalgeliyaha" waxa uu tilmaamayaa in qofka ama kooxdu ay qayb ahaan leeyihiin lahaanshaha ganacsiga. Falka lagu hubinayo maal-gashadayaasha iyo amaah-bixiyeyaasha gaarka, hadday yihiin xubnaha qoyska, asxaabta ama shisheeyaha, waa mid si heer sare ah loo habeeyey oo waxay u baahan tahay faham [sharchiyada amniga](#).

Hoos waxaa ah kooxaha Washington ee ku xidha maalgashadayaasha iyo ganacsatada. Waxaa jira liis dhamaystiran oo agab ah oo ku yaal [bogga](#) aasaaska.

- [Alliance of Angels](#)
- [Bellingham Angel Group](#)
- [ZINO Society](#)
- [Portland Angel Network](#) (waxaa ku jira aaga Vancouver)

Gobolka Washington wuxuu bixiyaa kaalmo dhaqaale oo xaddidan oo ah [deeqo iyo deymo, curaarta, dhiirigelinta, iyo cashuur dhaafka warshadaha qaarkood](#).

Deeqyaasha ayaa loo heli karaa ganacsiyada yaryar si ay uga caawiyaan daboolida kharashyada shaqaaleysiinta shaqaale ku meel gaadh ah marka xubin ka mid ah kooxdaadu isticmaasho [Fasaxa mushaarka la bixiyo ee loo qaato sababa la xiriira daryeel goys iyo sababa caafimahad](#). Si aad ugu qalanto deeqdan, ganacsigaagu waa inuu lahaadaa celcelis ahaan 150 ama shaqaale ka yar. Ganacsiyada leh celcelis ahaan wax ka yar 50 shaqaale ah waa inay bixiyaan qaybta loo shaqeeyaha ee khidmadaha si ay ugu qalmaan.

Ganacsiyada loo aqoonsaday inay yihiiin kuwa aay leeyihiin dumar ama kuwa laga tirada badan yahay waxay xaq u leeyihiin xafiiska ganacsiyada kuwa laga tirada badan yahay iyo haweenka (Office of Minority and Women's Business Enterprises, OMWBE)

[Barnaamijka debaajiga ee ku xidhan](#). Barnaamijkani waxa uu siinayaan ganacsiyada shahaadysan inay helaan raasumaal la awoodi karo iyadoo la dhimayo dulsarka ilaa 2% iyada oo loo marayo amaah bixiyayaasha ka qaybqaata. Halyeeyga iyo Meheradaha iska leh Xubinta Adeeggu waxay xaq u leeyihiin oo aay u qalmaan [Barnaamijka deebajiga Xidhiidhka Leh.](#)

## 2. Shaqaalah

Inaad haysato shaqaale leh sifooyin iyo xirfado ku habboon ganacsigaaga ayaa muhiim u ah korriinka guusha leh ee ganacsigaaga. Waxaa jira ilo-maalaadyo oo kaa caawini doono qorsheynta xiriirkha shaqada, waxaana ka mid ah [Macluumaadka Suuqa Shaqada](#).

Bixinta faa'iidooyinka shaqaalah, sida caymiska caafimaadka, waxay ka caawin kartaa milkiilaha ganacsiga inuu qoro shaqaale karti leh oo uu haysto shaqaalah qiimaha leh. [Isweydaarsiga Dheefta Caafimaadka Washington](#) waxa uu bixiyaa agab kaa caawinaya in aad wax ka barato fursadaha caymiska caafimaadka shaqsiga iyo/ama kugu xidhi kara dallaal shahaado haysta si uu kaaga caawiyo in aad hesho qorshaha saxda ah ee ganacsigaaga. (Eeg qaybta [7. Caymiska caafimaadka](#) ee hoos yimaada "Qorshee Ganacsigaaga").

Intaa waxaa dheer, bixinta ikhtiyaarka shaqaalah ee Kaydinta Hawlgabka waxay ka dhigaysaa ganacsigaaga mid tartamaaya, laga yaabaa inay ku siiso dhiirigelinta cashuurta, waana sahlan tahay oo la awoodi karo in lagu sameeyo [Suuqa Hawlgabka](#).

Waxa kale oo jira barnaamijyo kaa caawinaya inaad hesho oo aad tababarto shaqaale tayo leh:

- [Worksource](#) wuxuu kuu keeni karaa codsade xirfad leh oo diyaar u ah inay shaqeeyaan.
- Shaqo bilaash ah oo cadaalad ah, [soo dhejinta shaqada onlaynka ah](#) waxay kaa caawin kartaa kordhinta tirada dadka codsadayaasha ah.
- [Dhibcaha canshuurta](#) waxay kaa caawin kartaa dhimista kharashka shaqaalah cusub.
- Ikhtiayarada kaalmada [tababarka shaqaalah](#).

- [Kabka mushaharka tababarka shaqada.](#)
- Agabka tababarka shaqaalaha – [Buundada Xirfadda](#)
- [Barrnaamijka tababarka la xaqiijiyay ee la isticmaalo xiliga shaqaaleysiinta.](#)
- [Tababarka la xaqiijiyay ee la isticmaalo xiliga shaqaaleysiinta ee Worksource](#)
- [Shaqaalaha waxbarashada shaqada.](#)

Haddii aad shaqaaleysiiso shaqaalahaagii ugu horreeyay, waxaad u baahan doontaa inaad dib u fayl-garayso [Codsiga ruqsada Ganacsiga](#) Gobolka. Markaad xerayso ruqsadaada ganacsiga, Waaxda Ammaanka Shaqada waxay dejin doontaa koontada cashuurta shaqala'aanta ee gobolka, iyo Waaxda Shaqada & ganacsiga waxay abuurtaa koontada caymiska magdhowga shaqaalaha waxayna soo saari doontaa ogolaanshahaaga shaqo ee yar, haddii ay khuseyso. Wuxaan yeelan doontaa mas'uuliyado xarayn saddex biloodle ah oo aad la yeelani doonto labada wakaaladood, oo lagu daray IRS (eeg qaybta [SOCODSII ganacsigaaga](#) ee hagaha ganacsiga yaryar).

Shaqaale kasta oo cusub wuxuu u baahan doonaa inuu buuxiyo [Foomka Xaqijinta U-qalmitaanka Shaqaalaysiinta ee federaalka ee I-9](#) saddex maalmood gudahooda ee shaqada, iyo Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) [Foomka W-4](#).

Wuxaan sidoo kale u baahan doontaa inaad ka warbixiso shaqaale kasta oo dhawaan la shaqaaleysiyyay iyo kuwa dib loo shaqaaleysiyyay iyada oo loo sii marayo Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka, Qaybta Taageerada Ilmaha ee [Barnaamijka Ka Warbinta Shaqaalaysiinta Cusub](#) 20 maalmood gudahooda ee shaqalaysiinta. Ka warbixintu waa aay sahan tahay waxaana lagu samayn karaa onlayn iyada oo loo marayo marin shabakadeed oo sugar, [Isticmaalka sugar ee Washington \(SAW\)](#), iyadoo la isticmaalayo Qaybta Taageerada Ilmaha ee Adeegyada khadka tooska ah (DCSOnline). Haddii aanad hore u lahayn akoonka SAW, waxaad u baahan doontaa inaad saxiixdo oo aad ku darto adeega khadka tooska ah ee DCS. Si aad u soo gudbiso warbixin cusub oo shaqaaleysiin ah, baahida loo-shaqeeyaha si ay u bixiso magacooda, ciwaankooda iyo Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Federaalka (FEIN). Waxay sidoo kale u baahan doonaan macluumaadka laga helo Foomka W-4 ee shaqaalaha, oo ay ku jiraan magacooda, ciwaankooda iyo Lambarka Amaanka bulshada (SSN), oo lagu daray taariikhda shaqaalaynta shaqaalaha iyo taariikhda dhalashada. Kala xidhiidh **Kooxda Xiriirkha Loo-shaqeeyaha ee DCS** lambarka ah **800-562-0479** haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabto.

Shaqaalaysigu waa aag leh sharchiyo muhiim ah, oo ay ku jiraan mushaharka ugu yar, mushaharka saacadaha dheeraadka ah, shaqaalaynta carruurta aan qaan-gaarir iyo xubnaha qoyska, badbaadada goobta shaqada, takoor la'aanta, iwm.

Haddii aad la kulanto hoos u dhac mudo yar ah ganacsiga, [Barnaamijka SharedWork](#) wuxuu ku siinayaa qaab kale oo aad shaqada uga joojini karto shaqaalah. Taa beddelkeeda, waxaad dhimi kartaa saacadaha shaqada ee shaqaalahaga joogtada ah shaqaaluhuna waxay ururin karaan faa'iidooyinka shaqo la'aanta qayb ahaan si ay u beddelaan qayb ka mid ah mushaharkooda lumay.

Waxa inta badan si khaldan loo fahmo waxay ku lug leedahay isticmaalka qandaraaslayaasha madax-bannaan. Haddii aanu shahsigu si dhab ah ugu ganacsanayn naftiisa ama nafteeda, uu ruqsad haysto, fayl garaynayo cashuuraha dawlada dhexe iyo gobolka ganacsi ahaan, si firfircoon u suuqa ugu jiro, leeyahay macaamishal\macaamiil badan, oo uu qabanayo shaqo ka baxsan hawlahaa caadiga ah ee ganacsiga, fursadaha waa dawlad iyo Sharciga federaalku wuxuu dalbanayaa in qofka loola dhaqmo sidii shaqaale.

Shaqaalaysigu sidoo kale waa meel diiwaangalin muhiim ah iyo masuuliyadaha cashuuraha. Waa muhiim inaad fahanto xeerarka iyo kharashyada markaad qorsheynayso oo aad ka shaqaynayso ganacsigaaga.

### **Sharciga Shaqada**

- [Mushaharka iyo Sharciyada saacadaha \(sida mushaharka ugu yar ee shaqada lagu bixiyo, saacadaha dheeraadka ah, nasashada, iwm.\)](#)
- [Shuruudaha boodhka ee goobta shaqada](#)
